# LABA MIDABLE

SULDAAN MAXAMED SULDAAN IBRAAHIM
(GARYARE)

# LABA MIDABLE

## TWO-COLOUR

## اثنين من لون

DAABACAADDII KOOWAAD

---


SULDAAN MAXAMED SULDAAN IBRAAHIM
(GARYARE)



STOCKHOLM 2014

# NALA SOO XIRIIR

Qofkii xiisaynaya buuggan ama haya wax talo ama tusaale ah oo ku saabsan mawduucan wuxu igala soo xiriiri karaa ciwaannada hoos ku qoran:

mibraahim3@hotmail.com

ama

mohamedsaid@kamia.se

Xuquuqda buuggan oo dhan waxa ay u dhawrantahay qoraaga lama daabacan karo idan la'aan.

© Suldaan Maxamed Suldaan Ibraahim

# TUSMADA

TUSMADA....................................................3

HORDHAC...................................................4

CUTUBKA KOOWAAD ............................13

CUTUBKA LABAAD................................. 55

CUTUBKA SADDEXAAD......................... 99

CUTUBKA AFRAAD.................................123

CUTUBKA SHANAAD ................ ........147

CUTUBKA LIXAAD.................................177

GABAGABO..........................................195

TIXRAAC...............................................199

# HORDHAC

Waxa aan aad ugu faraxsanahay in ay ii suuragasho in aan daabaco buuggan oo aan jeclahay in aan ku muujiyo dareenka iyo aragtida iiga muuqatay sida dadka Soomaalida ahi ay u arkaan ama u qiimeeyaan xaalad kasta oo la soo gudboonaata, amase la soo derista. Buuggani waxa uu cabbirayaa ama tilmaan ka bixinayaa dareenka qofka Soomaaliga ahi ku eego arrimmo badan oo ku hareeraysan noloshiisa ama jiritaankiisa. Arrimahaa oo dhammi waa mid lagama maarmaan u ah nolosha qofka amase uusan qofku ka gudbi karin la'aantood.

Waxa dhici karta in arrimuhu ka kooban yihiin kuwo lagu khasban yahay in lala tacaalo amase lala falgalo iyo kuwo dani badday, oo aan qofka mararka qaarkood macno weyn ugu fadhiyin, laakiin aad mooddo in ay dani keentay, una muuqan lahaa kuwo aan loo baahan lahayn haddaan dantaasi meesha ool.

Ummad waxa lagu sinji soocaa qaabka ay u nooshahay, waxaana lagaga soocaa ummadaha kale ee ay dunida kuwada noolyihiin, iyada oo ay lagama maarmaan tahay in bani'aadamku uusan wax badan ku kala geddisneyn markii laga reebo bay'adda uu ku noolyahay iyo xaaladda deegaaneed ee Alle(swt) ku baraarshay. Waxa la arkaa in ay qaadato qoraallo badan iyo baalal aan xad lahayn, laakiin laguma soo koobi karo qoraal ama buug yar oo ka kooban warqado tirsan.

Waxa qurux badan in qof walba oo la filayo in uu leeyahay dareenkii ama awooddii uu wax ku qori lahaa uu wax qoro, si looga faa'iideysto waxa maankiisa ka guuxaya, laakiin macno badan ma samaynayso in lagu sheekeeyo wixii qofka ka guuxayey. Taasi waa tan markhaantiga u ah in aanay jirin wax qoraal ah oo muddo dheer jiray, oo dadka Soomaalida ah kayd u ah marka laga reebo sannadihii dambe ee Soomaalidu bilowday in farta Soomaaliga wax lagu qoro.

Cillad iyo cudurdaarasho noqon mayso in lagu doodo Soomaalidu wax waa qori lahayde ma lahayn far qoron, arrintaasi sax ma aha, oo farta Soomaaligu kacaanka iyo xornimaddii ka horba way qorneyd. Laakiin ma midaysneyn oo meelo badan ayeyna ku kala laalneyd, iyada oo qayb walba ay agtaalay ciddii qortay, waxaana xaqiiq ah in uu jiro buug la qoray 1900kii, ayna qoreen niman Jarmal ah, booqashana ku yimi dhulka Soomaalidu degto, buuggaas waxa lagu qoray far Soomaali iyo farta Jarmalka Buuggaa magaciisa waxa la yiraahdaa isaga oo AF Jarmal ah"*Südarabische Expedition*" oo micnihiisu yahay: "Cilmi-baaristii Koonfurta Carbeed", oo ay Soomaaliya ula jeedeen.

Buuggan waxa qoray laba nin, lana kala oran jiray Leo Reinich iyo Alfred Holder[1], barayaalna ka ahaa Jaamacad kutaal Vienna

[1]Leo Reinich iyo Alfred Holder waxa ay ahaayeen cilmi-baarayaal xagga afka ah,barayaalna ka ahaa Jaacadda Vienna ee dalka Austria, waxa ayna qarnigii sagaal iyo tobnaad(19aad) dhammaadkiisii ilaa labaatanaadkii (20aad) booqasho ku soo gaareen dhulka soomaaliyeed, waxa ayna qoreen Qaamuus ama Abwaan afka Soomaaliga iyo afka Jarmalka oo is turjumaya, buuggaasna waxa uu soo shaac baxay bilowgii qarnigii labaatanaad(1902).

ee dalka Austria. Buuggan oo ah mid ka sheekeynaya dhaqankii iyo caadaadkii wanaagsanaa ee dadka Soomaalidu siduu ahaa, gumeysiga kahor, kaas oo salka ku hayey Diinta islaamka markii gumeystuhu yimise is beddel ku dhacay, ayna saameysey siyaasaddii gumeystaha ee diin Islaam la daggaallanka iyo weliba dhaqan kasta oo suubban ku saleysneyd.

Buuggani waxa uu aad u tilmaamayaa qaab dhaqmeedkii beelaha Soomaalida qayba kamid ah ay u lahaayeen, nidaam iyo kala dambeyna ku salaysan dhaqanka Islaamka, iyo weliba guurti fulisa waxa Shareecada Islaamku soo goyso, waxaana muuqata in aan ninna ku dulmaneyn, nin kalena sadbusrsiinyo ku heli jirin. Waxa kale oo jira buug hal-abuur ah(fiction), ayna qortay gabar reer Kanada ah, oo ninkeedu ahaa Injineer u shaqeyn jiray gumeystihii Ingiriiska xilliggii uu Soomaaliya haystay. Gabadhaas oo la oran jiray Margaret Laurence, buuggeedana waxa ay ugu magac dartay *"The Prophet's Camel Bell: A Mameoir of Somaliland, 1951"*, oo macneheedu yahay "Koortii Geelii Nabiga[2]".Buuggan ay Margaret qortay waxa laga helayaa qaybo Af-soomaali ku qoran, ayna ku sharraxayso gebagebada buugga, waxa uuna buuggaasi noqonayaa mid ka horreeyey qoristii farta Soomaaliga ee 1970kii.

[2] Margaret Laurence, waa gabar dhalashadeedu Kanadiyaan ahayd, waxa ayna booqasho ku timid sannadkii 1950kii dhulka Soomaaliya, oo markaas ay gumeysigii Ingiriiska, Talyaaniga iyo Faransiisku kala haystaan, Margaret, ninkeeda ayaa ahaa Ingineer u shaqaynayey dawladdii Ingiriiska, gaar ahaan gobollada Waqooyiga Soomaalida.

Soomaalida keliya ma aheyn dadyowga aan fartoodu horumar fiican lahayn, ama ay yarayd inta akhrin kartay ama wax ku qori kartay, waxaana jira ummaddo badan oo weliba la aaminsan yahay in aynu ka xadaarad iyo ilbaxnimoba horreynay. Kuwaas waxa laga helayaa in ay qoreen buugag badan ama qoraallo dhaxal gal ah oo ay ubadkoodii dhaxleen afkii la doonaba ha ku qornaadeene. Weliba nasiib wanaag waxa ah in Soomaalidu tahay ummadda keliya ee qaran la oran karo oo haddana afka ay isku fahmayaan uu yahay afkooda hooyo, *Af-soomaali*. Halka dalal badan oo dunida kamid ah ay macquul tahay in ay isku fahmaan af aysan lahayn, kaas oo ah mid loo soo ergiyey, oo qolo kale u keentay, ha ahaado mid xadaarad iyo ganacsi ugu yimi amase mid gumeysi ugu yimi.

Waxa aan qabaa haddii aan ummadda si qoto dheer, aqoonina ku jirto loo daraaseyn waxa adkaanaysa in ummadda la kobciyo ama la hormariyo, sababta oo ah wixii la doonayo in howl laga qabto waxa marka hore mudnaan leh in cilmi wanaagsan oo waafiya laga haysto, haddii ay noqoto dhanka togan(positive) ama dhanka taban(negative).

Wax kasta oo kamid ah abuurka Alle waxa laga helayaa labada dhan ee wanaagga iyo xumaanta, sidaa darteed waa in aad dareensan tahay dhan walba si aad qorshahaaga ugu darsato wixii kaaga imaan kara adiga oo taxadar u leh marwalba wixii ku soo wajaha, si ay meesha uga baxdo in ay kuula muuqato wax lama filaan ah oo sababi kara in qorshahaagii uu dhaawac iyo dib u dhac ku yimaado. Sababaha igu xambaaray in aan buuggan daabaco ayaa waxa kamid ah arrimaha aan soo xusay in la derso, dersidaa iyo ogaanshaha ah in la ogaado dhaqanka Soomaalida

ee aan qabo in Soomaalidu wax walba ay ka eegto laba waji ayaan qabaa in ay saldhig u tahay aqoonta Soomaalida ee mustaqbalka dhow iyo kan dheer in lagu fahmo, xalna laga gaaro dhibaatooyin badan oo aad la isu weydiiyo markii la doonayo in la baadi goobo xuluusha Soomaalida dhexdeeda laga raadinayo.

Labada waji ee aan xusay ayaad mooddaa qofka Soomaaliga ahi inuu ka eego xaalad walba. Waji waa kan uu markaa doonayo ee u qarsoon, kaas ayaadna moodaa in uu kalsooni weyn ku qabo amase uu aaminsan yahay in dantiisa iyo tan reerka amase kooxda uu rabitaanka u hayo ku jirto. Waxa laga yaabaa in uu muujiyo xumaanta wajigaas, laakiin aysan ahayn mid dhaafsiisan dhaleeceyntaasi carabka iyo labadiisa daan.

Wejiga kalena waa kan uu afka ka sheegayo ammaantiisa, waxaana laga yaabaa in uusan dan markaa u arag, laakiin waxa dhacda in uu bogaadiyo, oo ammaano markaas, isla sidoo kalena aysan isna carrabka iyo labada daan dhaafsiisneyn ammaantaasi. Arrimaha aan rabo in aan toosh ku iftiimiyo, aana dareensanahay in ay Soomaalidu laba waji ku eegto wax walba ayaan rabaa in aan muujiyo, aniga oo jecel haddii Alle sahlo in aan mid mid isu dul taago.

Ma aha kuwan oo kaliya, arrimaha ay Soomaalida ku eegto laba waji ama laba aragtiyood, ee waxa suuragal ah in ay jiraan kuwo intaa ka badan kana macno weynaan kara. Laakiin kuwan waa kuwo ay dhacday in aan anigu qalinka u qaato wax ka qoristooda, dad iga xikmad iyo aqoon bandanna, waxa laga yaabaa in ay ku baraarugaan, qalinka iyo warqaddana u qaataan

dhameystirka wixii ay u dareemaan in ay dhammeystir u baahan yihiin.

Arrimahaasina waxa ay kala yihiin sidan:

- CADDAALADDA IYO DIINTA
- DAWLADNIMADA
- MAGAALADA
- NABADDA
- QABIILKA (QABYAALADDA)
- QURBAHA

Arrimahan oo dhan ayaan jeclahay in aan ku falanqeeyo sida ay Soomaalidu suuragal uga tahay in mid walba laba waji ku kala eegaan amase ku cabbiraan.

Qiimeynteydu ma wada saamayso dadka oo dhan, laakiin sida aan qabo dadka badankiisa ayaa sifaadkaas ama tilmaamooyinkaas laga helaa. Taas oo ku salaysan in wax walba laba waji lagu eego, waxaana marwalba mudnaanta la siiyaa marka arrin baarid lagu samaynayo wixii ka suuragal ah tirada badan arrintaa la baarayo. Waxa aanna aad ugu kalsoonahay in aan mico iyo xikmad aan cadaalad iyo garsoori ka marneyn ku fariisiyo, wixii qalinka iyo maanku iga xadana ha la iigu dulqaato, hana la iigu cudurdaaro.

## QAAB-DHISMEEDKA BUUGGA

Guud ahaan buuggu waxa uu ka kooban yahay toddobo cutub ama qaybood. Cutub kastana waxa uu cabbirayaa arrin gaar oo muujinaysa ama tilmaamaysa hab-dhaqanka Soomaalida. Cutubka koowaad ayaa isagu ah mid ka hadlaya, faahfaahin waafi ahna ka bixinaya, xiriirka ka dhexeeya caddaaladda iyo diinta dadka Soomaalida ah. Cutubka xiga oo isna noqon doona mid aynu ka dheehanno qaab dawladeedka iyo sida ay Soomaalidu u taqaan ama ay soo martay muddadii ku sinneyd soddonka(30)sannadood, ee ka dambeysey heliddii xornimada iyo meesha ay ku dambeysay dawladnimadaasi.

Cutubka saddexaad ayaan ku xusi doonnaa Soomaalida iyo soo gelidii magaalada, iyada oo ay xaqiiq tahay in Soomaalidu asal-ahaan reer miyi ahayd marka laga reebo dad yar, oo lagu muransan yahay in ay asal-ahaan Soomaali ahaayeen. Cutubka kale oo kaa xiga ayaa isna lagu falanqeyn doonaa nabadda, oo nolosha asal u ah, Soomaaliduna aad uga dhawaajiso muhiimaddeeda, laakiin dad badani qabaan in aan Soomaalidu nabadda xil badan iska saarin ilaalinteeda.

Qabiilka ama qabyaaladda ayaa la tilmaamaa in ay astaan u tahay dadka Soomaalida ah, waxanuna ku faalleyn doonnaa cutubka shanaad. Ugu dambeyntiina, waxa aan buuggan ku soo gunaanadaynaa Soomaalida iyo nolosha qurbaha, oo ah waxyaalaha Soomaalida noloshooda hadda qayb weyn ka ah, iyo sida Soomaalidu qurba-joognimadeedu ku bilaabatay, qodobkanna waxa aan ku arkaynaa cutubka lixaad oo buuggu ku soo dhammaanayo.

## MAHADNAQ

Mahad oo dhammi Alle(swt) ayey u sugnaatay, Rasuulku(csw), waxa uu xadiis ku sheegay in nin aan Alle ummaddiisa u mahadniqin, uusan Allena u mahadniqin, sidaa darteed soo bixidda buuggan ayey adkaan lahayd haddii aan la helin shakhsiyaad dhawr ah oo buuggan sabab u ahaa soo bixistiisii.

Dhawr qof ayaa runtii iga mudan in aan si gaar ah ugu mahad celiyo. Shakhsi kastana waxa uu leeyahay mahadnaq ku salaysan qaybtii lixaadka lahayd ee uu buuggan ka gaystay.

Shakhsiyaadkaas waxa uga horreeya Ustaad Yuusuf Xaaji Cabdillaahi Xassan(Sheekhul-Casri), oo isagu had iyo goore ila garab taagnaa guubaabada iyo dhiirrigelinta in aan buuggan soo saaro, halbowlena u ahaa soo bixitaankiisii, islamar ahaantaana qaybo buugga kamid ah akhrin iyo sixitaan ku sameeyey.

Shakhsiga kale ee aan isna la soo koobi Karin mahadniqiisa waxa weeye Ustaad Axmed Sabriye Gaabow, oo isna sixitaan iyo akhrin waafiya, runtii, buuggan ku sameeyey, qaybo buugga kamid ahna talo iyo tusaale ku lahaa.

Shakhsiga saddexaad ee isna ay lagama maarmaan tahay in la xuso juhdigii iyo dadaaalkii uu ka geystay buuggan waa Abwaan Maxamed Xirsi Guuleed Samatar(Cabdi-bashiir). Maxamed waxa uu ahaa walaalkii aad iiga kaalmeeyey xagga farsamadda iyo isku dubarridka buuggan, qaybo kamid ah qoraalkana saxay, suuragalna ka dhigay quruxda iyo maamuuska buuggani leeyahay.

Waxa aan sidaa oo kale mahadnaq ballaaran iga mudan qoraa sare Maxamed Sheekh Xassan Nuur(Gacmo-dheere), oo isna igu kaalmeeyey magac bixinta buuggan, oo ah*"LABA MIDABLE"*, macno badanna xambaarsan. Waxa aan iyana la illaawi karin labadayda wiil ee Cabduraxmaan Suldaan Maxamed iyo Cabdullaahi Suldaan Maxamed oo marwalba hiil iyo hooba ila garab taagnaa, wixii khalad farsamo ah oo aan sameeyana, toosin ku hayey muddadii aan buuggan qorayey.

Soomaalidu waxa ay ku maahmaahdaa *"ninka iyo jiilaalku waa ay legdamaan waxaana la legdaa kan marwadu ka hiiliso"*, sidaa darteed marwo Xaawo Xaaji Siciid Maxamuud(Xaawo-Gini), oo ah marwada guriga ayaa iiga hiilisay wakhtiga, sidaas ayaana ugu adkaaday wakhtigii aan buuggan qorayey, iyaduna mahad aan la soo koobi karin ayey iga mudan tahay.

Haddaba waxa aan dhammaan dadkii gacanta ka geystay soo bixitaanka buuggan leeyahay; Alle(swt) ha idinka abaal mariyo, miisaanka Xassanaadkana maalinta aad u baahan tihiin Alle ha idiin saaro, dambidhaaf iyo dhawrsannaana ku waara.

***Suldaan Maxamed Suldaan Ibraahim(Garyare)***
***Stockholm, 2014***

# CUTUBKA KOOWAAD

# CADDAALADDA

Tilmaamo badan ayaa laga baxshaa caddaaladda, waxaana laga yaabaa in qof walba meeshii uu doono la aado, ama sidii uu doono u fasirto. Caddaaladdu micnaha ugu saxsan ee la aaminsan yahay waxa weeye kan Alle(swt), uu kitaabkiisa ku sheegay, waxaana weeye in Alle kitaabkiisa iyo amarkiisa loo xukun tago, ama laysu dhiibo, waxa intaa ka dib la hubaa in meeshaa caddaaladi ka jirto, sababta oo ah in caddaalad la helo waxa asal u ah in xukunka Alle uu miiska saaran yahay.

Alle meelo badan ayuu Quraanka Kariimka ah kaga tilmaamay caddaaladda, caddaalad darro iyo dulmina naftiisa ayuu ka xarrimay sidaa darteed in caddaalad darro la sameeyo ma ahan mid meesha ku jirta. Bani'aadamka oo dhammi, waxa uu doono ha aaminsanaado, meeshii uu doono ha ku noolaado, midabkii uu doono ha yeesho, waxa ay ka midaysan yihiin in aan noloshu marnaba hagaageyn haddii aan caddaaladi jirin oo aan loo sinneyn dhib iyo dheefba.

Waxa aan jeclahay in aan halkaan ku xuso laba nin oo dad badani isku raacsan yihiin in ay caddaalad faleen, labadaas nin waxa ay kala ahaayeen Amiiru Muminiin Cumar Binu Khataab, oo ahaa Khaliifkii labaad ee Islaamka soo mara, kaddib Abuubakar Al-Sadiiq, labadoodaba Alle raalli ha ka noqdee. Caddaaladda Cumar, waxa aad loogu tilmaamaa in ay ahayd tii Alle xusay, ee laga doonayey noolihiisa.

Cumar Binu Khadaab waxa uu ahaa asxaabi Ilaahay ku ciseeyay diintiisa, laga soo bilaabo maalintii uu Islaamay ilaa uu Ilaahiisii kala kulmayey, gaarahaan waxa uu Ilaahay ugu ciseeyey Muslimiinta iyo Islaamka intii uu khilaafada hayey.

Waxa aan tusaale u soo qaadaneynaa sidii uu Cumar xukunka ugu caddaalad fali jiray:

Waxa la soo eedeeyay Camar Binu Caas oo Masar mas'uul ka ahaa, waxaana Camar lagu soo eedeeyay in wiilkiisa Maxamed uu uleeyay nin Qibdiyiinta reer Masar kamid ahaa, wiil uu dhalay mana ahayn mid looga xadgooyo dhibkii loo geystey wiilkaas. Kaddib waxa dhacday in wiilkii iyo aabbihiis ay tageen Madiina si ay Amiirka ugu soo dacwoodaan waxa dhacay, markay u yimaadeen Amiirkii ayey u sheegeen in wiilkii Camar dhangadeeyey wiilkan Camarna markuu maqlay aanu waxba ka qaban. Amiiral muuminiinkii markii uu dacwaddii dhageystay isla goobtii ayuu waraaq ugu qoray Camar Binu Caas, waxaana uu amray in isaga iyo wiilkiisa Maxamed soo wada galaan magaalada Madiina.

Markii ay soo galeen magaalada Madiina ayaa Maxkamad la saaray, waxaana uu Amiirul Muuminiinku xukumay in wiilka Qibdiga ahi uu hortooda ku uleeyo oo ka goosto xadkiisii, kuna dhifto intii isaga lagu dhiftey in le'eg uuna ku dhufto Maxamed Camar Binu Caas. Markii uu wiilkii reer Qibdi waajibkiisii gutey, ayaa Cumar ku yiri wiilkii ulee Camar Binu Caasna, waayo shaarkiisa ayaa lagugu uleeyay. Intaa kaddib wiilkii ayaa yiri Amiiral Muuminiinow anigu xaqeygii waan oofsaday ninkii i garaacayna waan garaacay. Kaddib ayaa Cumar wiilkii ku yiri

Ilaahay baan ku dhaartaye haddii aad isagana garaaci laheyd kaama aan joojiyeen illaa aad adigu joojiso mooyee. Intaa kaddib Amiirul Muuminkii ayaa ku jeestay Camar Binu Caas, kuna yiri hadalkii caanka noqday ee ahaa *"Camaroow goormaad dadka addoonsateen iyaga oo hooyooyinkood xornimo ku dhaleen"*, kaddibna Cumar waxa uu eegay wiilkii iyo Aabbihiis, kuwaas oo uu ku yiri; - "Orod oo haddii Camar mardambe gef idinka galo ii soo sheega".

Waxa habboon in la ogaado in wiilkan iyo Aabihiisba aysan Muslim ahayn oo ay gaalo ahaayeen, kaddib Cumar meeshii ayuu u daayey Camar, maaddaama uusan isagu dembi gelin, wiilkiisuna uu dembiga galay, kaddibna laga qisaasey dembigii uu galay. Xaqiiqdii taas ayaa caddaalad la yiraahdaa oo sharciga Islaamka, ay Muslim iyo gaaloba u simanyihiin, maantana waxa dunidii buuxiyey oo hareeyay dulmi iyo in aan dadka ku nool dabaqadda sare uusan sharcigu qaban oo wixii ay doonaanba ay sameeyaan iyaga oo xiran shaar mas'uuliyadeed ama dawladeed.

Axadka kale oo aan halkaan ku xusayaa waxa weeye Maamiyihii ama Filasoofkii reer Athens ama Giriiggii hore, Socrates(470-399) kahor dhalashadii Nabi Ciise Calayhi salaam), waxa ay taariikhdu xustaa in uu ahaa nin ka shaqeeyey caddaaladda dadka Giriigga ah. Socrates waxa uu ka shaqeyn jiray dhagax jabinta si uu naftiisa, tan afadiisa Xanthippe iyo labo wiil oo uu dhalay u caawiyo. Socrates, aqoon baa saldhig u ahayd isbeddel xagga fikirka ah oo uu ku sameeyay filasoofiintii hore. Waxa uu wareejiyay ku foognaantii cilmiga si loo sharraxo arrimaha nolosha, waxa uuna u wareejiyay hab fikiradeed baaritaanno sameynaya oo ka qancinaya nafta arrimaha nolosha.

Socrates waxa uu ku dhashay magaalada Athens, noloshiisiina waxa uu ku dhammaystay iyada, marna ma uusan qorin waxyaabihii uu ka doodayey ama qaadaa dhigayey, waxase wax ka qoray aragtidiisii mid kamid ah ardaydiisii, lana oran jiray Plato.

Socrates waxa uu aad uga murmay caddaaladda, doodo dhaadheer kaddibna waxa uu ku qancay in ay caddaaladdu tahay wanaag iyo in uu ku heli karo qofku taas naftiisa oo uu aqoon u yeesho. Waxa uu ku dooday in wanaag jiro dunida, qof walbana uu awoodo helitaanka wanaaggaas. Socrates waxa uu soo bandhigay su'aasha ah; waa maxay caddaalad?, waxaana laga helayaa labadii buug, Jamhuuriyadda*(Rupublic)* ee ugu horreeyay uuna qoray maamiye Plato, buugaagtaas waxa laga helayaa doodii dheerayd ee dhex martay Socrates iyo filosoofiintii kale ee waayahaas noolaa. Waxa ay gunaanadkii isku raaceen in caddaaladdu tahay wanaag, sidaas darteedna sax tahay in la yiraahdo caddaalad-darradu waa shar. Haddaba si qofku caddaalad u sameeyo waa in isaga laftiisu yahay mid wanaagsan.

Sida aad wada aragteenba, caddaaladdu ma aha mid sahlan, meel aan caddaaladi jirina in aan wanaag iyo xuquuqi ka jirin baa muuqanaysa. Waxa culimmo badan oo Islaamka soo maray, aqoon iyo faham fiicanna Alle ku manaystay qabeen, ummad walba oo ilaalisa garsoorka wixii ay ku heshiiyeen, in ay baaqi iyo mid waarta ay ummaddaasi noqonayso. Cullimadaas waxa kamid ah Sheekhii Islaamka raxiimuhu Ilaahi Axmed Bin Cabdulxaliim(Ibnu Taymiya).

Ibnu Taymiya waxa uu qabay ummado badan oo aan Muslimiin ahayn in ay samaysan doonaan miisaan iyo kala dambeyn, taas oo sabab ka dhigi karta in ay ku gaadhaan nolol adduunyo, meesha ay dhici karto in kuwo Muslimiin u nasab sheegta ay burbur iyo walaahoow ku noolaadaan markii ay caddaaladdii Alle ugu yaboohay ka tagaan miisaan iyo kala dambeyn iyaga dhexdooda ahna la waayo. Waxaana taas caddaymo u ah oo muujinaya nolosha ka jirta waddammo badan oo aan Muslimiin ahayn, marka laga eego sida bulshadu u kala dambayso, oo aysan u muuqan dulmi cad oo la garan karo in uu jiro.

Waloow la dareensan yahay in dulmi jiro, haddana mid si cad u muuqda oo suuqa yaal ma ahan, ummadana kama suurtowdo in ay u dulqaataan, sababta oo ah waxa ay ku baraarugsan yihiin in aan dulmiga cidina ka badbaadeyn haddaan marka horeba afka la qaban.

Meesha dhanka kale ummado badan oo Muslimiin sheeganayaa dulmiga ka jiraa uu yahay mid muuqda oo aan caad saarneyn, welibana ay dhacdo in laysku kaalmaysto, waxaana marar badan suuragasha in dulmigu cid walba saameeyo.

Waxa nin oday ahi ii sheegay isaga oo la socda cullimmo badan oo Soomaali iyo Carabba isugu jira martina ku ahaa magaalada London doonayeyna in ay magaalada London suuqyadeeda waaweyn u adeeg tagaan. Markii meel dhexe la marayey baa oday kamid ah cullimmaddii su'aal weydiiyey walaalkii culimmada u khidmaynayey, waxa uuna ku yiri: daarahaan dhaadheer yaa iska leh, waxan ugu jawaabay ayuu yiri sida aan dareensanahay badanaa shirkado dad shacab ay

leeyihiin ayaa daarahaan mulkigoodu u badan, waloow ay dhici karto in kuwo dawladdu leedahayna laga helayo. Caalimkii su'aasha i weydiiyey ayaa waxa uu isna ku warceliyey oo yiri meeshaan noocmaa caddaalad iyo garsoor u eg ayaa ka jira, haddii kale daarahaan in ay taagnaadaan waxa ay ahaan lahayd mid aan suurtagal ahayn. Haddaba intaas oo tusaale waxan u soo meeriyey in aan si caddaan ah u sharxo fahamkayga ku saabsan caddaaladda iyo siday ummado kala duwan oo aqoon diimeed iyo mid kaleba leh ay u fahmeen caddaaladda.

Waxa aan jeclahay in aan hoga-tusaaleeyo sida Soomaalidu u aragto caddaaladda, iyada oo aan horey u soo xusay in wax walba ay Soomaalidu ku eegto laba waji. Dad badan oo Soomaali ah baa caddaaladda u yaqaan in marwalba dantiisu hor marto wixii horumarka dantiisa kahor yimaadana waxa uu u arkaa in ay tahay caddaalad darro.

Waxa aan shaki ku jirin in aan marnaba Soomaalidu helin nidaam caddaalad ah oo dadka iyo dalka Soomaalida soomara. Taasi waxa ay xalaalaysay ama waddo u noqotay in caddaalad darradu tahay qayb kamid ah nolosha Soomaalida, qofkuna waxa uu aaminay in caddaaladdu tahay wixii uu ka dheehday noloshii uu ku noolaa, oo uu ku soo hanaqaaday, taas oo uu qofku aaminsanyahay in aan marnaba caddaalad lagu sifeyn karin. Sababtuna waxa ay tahay nidaam Alle raali ka yahay ma soo marin, mid ummaddi inta ay isugu timi arrimmo meel isla dhigtay oo ay fuliyeen wixii ay isla meel dhigeena ma dhicin, sidaa darteed caddaaladdu, dadka Soomaalida ah waxa ay ahayd mid marwalba lama gaaraan iyo marti xaggooda ka ah. Taasi

waxa ay dhabbaha u xaartay in caddaalad la helaa amase la arkaa ay tahay wax aan mar naba suurtoobin.

Dadku isku mid ma aha, waxaana laga yaabaa in qof Alle ka cabsi ku jiro gacantana ku haya wax ummad ka dhexeeya in uu doono, ama ku dadaalo wax uun caddaalad u eg. Waxa aan la inkirsanayn, in qofkaasi la kulmo ceebeyn badan, sababna looga dhigo caddaaladda uu is yiri samee. Dhaleeceyntaasi waxa ay kaga imaanaysaa nidaamkii uu ka tirsanaa iyo weliba qoyskii uu ka dhashay, oo aaminsan in caddaaladdu tahay in nin walbaa uu u sad gooyo qoyska uu ka soo jeedo macquulna aysan ahayn in wax sadbursiimo ama sinnaan ah uu u sameeyo qoysaska kale ee iyana la hubo in ay leeyihiin caddaalad taa ka duwan oo ragga iyaga nidaamka ugu jiraa ay u cad gooyaan. Sidaa darteed caddaaladdu ay tahay in aysan laba caddaaladdood ama laba sadbursiinyo isku qaadan karin.

Tilmaamaaha iyo ceebeynta loo sameynayo qofkii fahmay in uusan meesha qoys ama nin lahayn ee ay ummadda u siman tahay, waxa ay ahaayeen kuwa iska cad, waxaana bannaaneyd, oo aan ceeb iyo wax laga xishooda ka ahayn agtooda bulshada Soomaalida intooda badan, in qofka lagu ammaano sida uu ugu takri falo waxa ummadda ka dhexeeya, ama uu qoys gaar ah kiishaska uga buuxsho. Middaas oo uu ku ammannaa ama uu ahaa qof ku bannaan qoyska, maaddaama uu caddaalad sameeyey, oo uu qoyskiisa sadbuursiiyo siiyey, taasna dad badan ayaa u yaqaanney caddaalad.

Fikirkaasi ma aheyn mid ku kooban dadka aan wax akhriyin amase aan wax baran ee waxa uu ahaa fikir guud oo caammo

iyo nin wax bartayba ay ka sinnaayeen markii laga reebo dad yar oo Alle unaxariistay mooyee. Reerkii aan mas'uul sare lahayna, waxa uu ahaa reer caddaaladdii ka qaday oo wixii ay sadbuursiinyo u heli lahaayeen waayey, maaddaama aysan lahayn qof mas'uul ah oo u cadgooya, kiishashkana u buuxsha.

Waxa ii warramay nin aanu saaxiibbo ahayn lana yiraahdo Maxamuud Cabdi Faarax Cadde(ina Dhoonge). Maxamuud waxa uu ii sheegay 1990kii annaga oo Xamar joogna, in uu maalin u muraad yeeshay Wasaaraddii Boostada iyo Isgaarsiinta xarunteedii ku taallay ka soo horjeeedkii Hotel Jubba. Maxamuud waxa uu rabay in uu dirsado telefoon dibadda ah, waxa uu yiri saf ayaannu ku jirnay, waxa qof walbana uu sugayey in la xaadiriyo magiciisa, nin kamid ah shaqaalaha wasaaradda ayaana liis haystay, marwalba intuu noo yimaado ayuu qofka liiska uga horreeya oranayey kaalay oo gal qolka telefoonka laga dirsado.

Mar dambe ayuu sidii caadada u ahayd noo yimi, waxa ay ishiisu ku dhacday nin aniga iga dambeeyey aana u maleynayo in ay dhawr qof noo dhaxaysay, waxa uu hal mar la soo booday wasiir maxaa safka ku geliyey kaalay oo horey u soo gal? Ninkii wasiirka loogu yeeray ayaannu hal mar wada eegnay!!! *Waxa aan is-weydiiyey muxuu yahay ninka wasiirka loogu yeeray ee dadkii caadiga ah ku dhex jiraa?* Su'aashaas waxa aan aaminsanahay in dad badani oo meesha taagnaa ay iyana isweydinayaan. Waxa uu iila muuqday nin iska caadi ah, oo aan waxba dadweyanahaa dheereyn.

Wasiirkii waxa uu ku jawaabay:- *'maya adeer safkan aan ku jiro ayaan xaq u leeyahay ee markii la gaaro wakhtigayga ii yeer, waadna mahadsan tahay!*

Maxamuud waxa uu intaa ii raacshay magaca wasiirka waana gartay, waxa uuna ahaa sidaan filayo nin wasiir mar ka noqday Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha, kana tirsanaa golihii sare ee kacaanka, lana yiraahdo Maxamuud Geelle Yuusuf, haddana ku nool dalka Switzerland. Maxamuud Dhoonge waxa uu intaas iigu daray in wasiirkii oo meeshii safka ahayd weli kusii jira, oo safkii taagan ayaan anigu dantaydii dhammeystay.

Nin kamid ahaa saraakiishii sare ee Wasaaraddii Dalxiiska iyo Hoteellada ee Soomaaliya, haddana bare wax ka dhiga dugsiyada sare ee Stockholm mid kamid ah, lana yiraahdo Maxamed Cumar Xaashi, ayaa isna waxa uu ii sheegay sheeko aan ka fogayn tan ini Dhoonge ii sheegay. Xaashi waxa uu yiri: Geelle iyo reerkiisa ayaa dibadda ka soo laabtay, gurigii ay degganaayeen, waxa aan filayaa in uu dayactir ku socday. Saraakiil ka tirsan wasaaraddii uu markaa wasiirka Geelle ka ahaa, Wasaaradda Badda iyo Dekadaha, ayaa Hotel Jubba dalab ah in ay marti u raadiyaan qolol ay seexdaan soo gudbiyey, waana loo helay waxaana la seexshay reerkii Geelle oo uu isagu kamid ahaa.

Markii xilligii dhammaaday ee reerkii gurigoodii ku noqday ayaa Geelle waxa uu maamulkii Hoteelka ka dalbaday, kharashaadkii Hoteelka ee reerka ku baxay. Maamulkii Hoteelku, Geelle waxa uu ku wargeliyey in kharashaadkii ay

Wasaaraddiisu la wareegtay, oo ay iyadu bixinayso, biilkiina Wasaaradda lagu dallacay. Xaashi waxa uu ii sheegay in Geelle xanaaqay, kuna yiri maamulkii Hoteelka, kharashaadkani ma aha mid Wasaaraddu gashay, oo anigu meesha shaqo uma joogin, ee dan khaas*(Private affairs),* ah ayaa kharashkani ku baxay ee jeexa jeexa biilka Wasaaradda, anigana igu soo qora, xafiiskana hala iigu keeno biil cusub oo aniga igu qoran.

Waxa kale oo dhacday, uuna iiga sheekeeyey nin la yiraahdo Axmed Cumar Madow, oo aan Boosaaso ku ogaa qiso dhex martay nin kale oo wasiir ahaa, kana tirsanaa Golihii Sare ee kacaanka, lana oran jiray Cabdirisaaq Maxamuud Abokor, Allaha u naxariistee, iyo nin qaraabonimo ugu tagey mar uu ahaa Wasiirka Wasaaradda Beeraha ee Soomaaliya. Axmed Cumar waxa uu igu yiri ninka wasiir Cabdirisaaq u tagey, waxa uu ahaa nin lagu xanto gacan adayg ama wax quurid la'aan, Cabdirisaaqna arrintaa waa ogaa. Ninkii waxa uu Cabdirisaaq ka codsaday wax uu gacanta ku hayey, laakiin hanti dadweyne ahayd. Cabdirisaaq waxa uu ninkii odayga ahaa u sheegay in aysan macquul ahayn, oo ay tahay dhac hanti dadweyne haddii uu codsigiisa u fuliyo.

Odaygii ma noqon nin ku qanca jawaabtii Cabdirisaaq, oo waxa uu ku canaantay in uu yahay nin aan wax quur lahayn. Cabdirisaaq oo xogta odayga hayey ayaa waydiiyey odaygii oo ku yiri: adeer waxa la ii sheegay in aad tahay nin xoolihiisa ilaaliya, oo aan dadka kale iska siin, sidaa darteed sidee u doontaa xoolo aadan adiga iyo aniguba lahayn haddii kuwii aad lahayd diidday in aad wax ka bixiso.

Waxa layaab leh nimankan Wasiiradda ahaa Soomaalidu ma jeclayn, magacyo badan oo wada iin leh ayeyna u yaqaaneen, sababtuna waxa weeye nidaamka ay dhawrayaan iyo meesha ay mas'uulka ka ahaayeen oo laga waayey sadbuursiinyo ama cadgooyo qolo u gaar ah. Waxa aan filayaa mas'uuliyiinta soo maray nidaamyaddii Soomaaliya in aysan badneyn kuwa ay u kala soocnaayeen hantida ummadda iyo toodu. Nimankan odayaasha ah, ee aan kor kusoo xusay, waxa laga yaabaa in ay fahmeen midaas, laakiin lama oran karo waxa ay ahaayeen niman ragga kale ee ay doonta wada saarnaayeen ka wanaagsanaa.

Sababta oo ah mid nimankan kamid ah, oo ah Geelle waxa uu ahaa ninkii hayey mindidii lagu laayey Soomaali badan oo kahor timid nidaamkii uu isagu ka tirsanaa, waxa uuna ahaa marwalba madaxii Maxkamaddii Badbaadada Dalka, oo nidaamku u samaystay in uu kawaan uga dhigo wixii aragtida kacaanka kahor yimaada. Haddii aan dhanka kale ka eegno, Soomaalidu ma aha dad caddaalad neceb, oo waa ay garanayeen qofkii caddaalad iyo garnaqid wanaagsan lagu yaqaan, waxa ayna ahaayeen kuwo garta u gaystay axadka ay garnaqid caddaaladdu ku dhisan tahay lagu ogyahay.

Waxa geyiga Soomaaliyeed ka jiray rag badan oo caddaaladda iyo garnaqid wanaagsan lagu yaqaan,raggaana waxa laga tilmaami karaa Faarax Maxamed Yuusuf, loona yiqiin "Ini Sanweyne". Ini Sanweyne waxa uu ahaa nin garta sida ay tahay u naqi jiray, oo aan godob iyo nin tooxsi midna lagu aqoon, geyiga Soomaalidana ka sheegganaa.

Soomaalidu marka ay maahmaahayso waxa ay u maahmaahdaa si caddaaladi ku jirto, maahmaahyada caddaaladda iyo garnaqsiga ka hadlaysana waxa kamid ah:

- Gar loo wada Islaam
- Gaal dil gartiisana sii
- Geedka hortiis garnaqso

Sida aad ka dhadhansanayso maahmaahyada iyo murtida Soomaalidaba, waxa aad dareemaysaa in aan Soomaalidu ahayn dad wax iskaga qaldan yihiin, laakiin ay yihiin dad wax og, haddana ogaanshiinyo wax walba u samaynaya.

Nin la oran jiray Cigaal Shiddaad, dhulka Soomaalidana caan ka ahaa, fulaynimana lagu tilmaamo, laakiin aan fulay ahayn, balse xikmad badnaa, ayaa maalin maalmaha kamid ah waxa ergo iyo dacwaba ugu yimi nin ay isku qoys yihiin. Ninku waxa uu ergo ka yahay, eedna u haysta nin kale oo isaga iyo Cigaalba isku qoys yihiin. Ninkii Cigaal waxa uu ku yiri: *'Cigaalow ninkii hebel ahaa ee aynu qaraabada ahayn gardarro ayuu igula kacay, ee noo garqaad, gartaydana iga sii'.*

Cigaal ninkii waxa uu ugu jawaabay "W*aa runtaa"*

Ninkii waa iska tagey markii uu farriintaa iyo cabashadiiba Cigaal u gudbiyey. Waxa Cigaal u yimi ninkii eedda loo haystay, oo isna eed sheeganaya, kana eed sheeganaya, ninkii hadda Cigaal ka tagey. Ninkii markii uu Cigaal u warramay, una sheegay in uu dacwo ka yahay ninkaa, ayaa isagiina Cigaal ugu jawaabay *"Waa runtaa".*

Markii ninkii kalena ka tagey Cigaal, ayaa haweentii Cigaal u dhaxday, oo labada ninba hadalkoodii maqlaysay, Cigaal u timi, kuna tiri: *'war Cigaal labada nin mid walba gar ma lehee mid uun baa gar lehe ragga kala garee, oo kala saar'.*

Cigaal ayaa haddana haweentiisii ugu jawaabay *"Adigana waa runtaa".*

Dhacdadan, Cigaal ujeeddo iyo in war ka haro ayuu ka lahaa, waayo Soomaali badan ayaan gartu sida ay tahay u kala goyn, una arka haddii gartu sida ay tahay loo gooyo in gar cadaawe la naqay, oo xeer jajab iyo masaalaxo aan markaa waxba soo kordhinayn garaha ku dhammeeya.

Waxa aan jeclahay in aan halkan ku xuso qiso aad dhaxalgal xaggayga uga ah, oo uu annaga oo badan nooga sheekeeyey Raxiimu llaahi Sheekh Maxamed Rashaad Macallim Isxaaq Sheekh Aweys, qisaduna sidan ayey u dhacday: Sheekh Maxamed waxa uu yiri waxa dhacday in ay tulud geel ah ku murmeen niman qoyska aan ka dhashay ah iyo niman reer Caabudwaaq ah. Sheekh Maxamed Rashaad waxa uu sheegay in qolyihii hasha isku qabsaday ay isula tageen Awoowgii Sheekh Aweys, waxa ayna ka dalbeen in uu u kala xukumo hashan isaga oo caddaaladda raacaya.

Qoladii aan ka dhashay waxa ay Sheekha si hoose ugu sheegeen in uu u hiiliyo, waxa ayna sheegeen in aysan hasha iyagu lahayn, laakiin hal hore oo si caddaalad darro ah loogaga xukumay in ay ku beddelanayaan hashan. Sidaa darteed annagaa isku qoys ahe Sheekh Aweysow maanta noo hiili ayey ku dareen

warkoodii. Sheekh Aweys waxa uu dhammaantood ka hubsaday in hadalkaasi sax yahay waana isku raaceen in uu sax yahay, waxa uuna u ballan qaaday in uu maanta u hiilinayo.

Subixii dambe markii goobtii garta lagu qaadayey la isugu yimi ayaa Sheekhii hadlay oo yiri qolo walba ha cadeysato in ay hasha leedahay. Qoladii reer Caabudwaaq, illeyn waa niman is hubee wixii caddeyn ay u haysteen ayey meesha ka sheegeen, qoladii kalena waxa ay sugayeen oo caddeyn u ah in Sheekh Aweys oo ay isku qoys yihiin u hiilin doono. Sheekh Aweys waxa uu hashii u xukumay qoladii lahayd hasha, reer Caabudwaaq, ileyn waa ogaa oo waaloo sheegay Sheekha cidda hasha iska lehe. Markii gartii dhammaatay ayey Sheekhii u tageen qoladii hasha laga xukumay, qoladii Sheekha, waxa ayna Sheekha ku yiraahddeen, haddaanu kuu sir warranay maxaad Sheekhow noogu hiilin weyday? Allahu Akbar.

Sheekhii waxa uu ugu jawaabay hadal cajiib ah, waxa uuna yiri: waxan idin weydiiyey maalinta la taagan yahay bannaanka cad ee Alle hortiis ah, oo aan qofina qof kale waxba u tari karin, yaa Alle igala hadlaya oo oranaya ilaahow Sheekhani anagga ayuu naga dhashay ee maanta xisaabtiisa annagga ayaa qoys ahaan u qaadaneyna? Raggii inta lays wada fiirshay ayaa la yiri:- Sheekhow taa ninna kuuma ballan qaadi karo. Waxa uu kale oo Sheekhu weydiiyey oo ku yiri sow iima sheegin in aydaan hashaan lahayn? Waxa ay ugu jawaabeen haa, haddaba waan idin hiiliyoo dulmi in aydan samayn baan idin ku hiiliyey, sidaana Rasuulkeenii Muxamed(csw) ayaa horey u yiri:-*'walaalkaa u hiili haddii uu gardaran yahay iyo haddii laga gardaran yahayba',* Sidaa

darteed in aad gardaran tihiin baad ii sheegteen gardarradiinana waan idin kaga hiiliyey, oo inaad cid ku gardarrootaan ma rabo.

Waxa dhici karta in aysan qoysku ku qanacsaneyn caddaaladdaa Sheekhu xukumay oo ay doonayeen in ay dhacdo maahmaahdii Soomaalidu oran jirtay oo ahayd "*Fiqi tolkii kama janno tago*" maahmaahdaas oo ah maahmaah asal ahaan jaahilnimo iyo Alle ka dheeraansho salka ku haysa. Taasi waxa ay caddeymo u tahay in Soomaalidu marwalba caddaaladda iyo xaqsoorka u taqaan wixii ay iyagu dan u aragto ama ay ugu badinayso rabitaankooda, laakiin aysan caddaaladda u arag wejiga saxda ah.

Sheekh Soomaaliyeed, lana yiraahdo Sheekh Cabdullaahi Xaaji Cabdi-suldaan, ayaa maalin jimce ah khudbadiii jimce kaddib ka istaagay mimbarka salaadda, isaga oo markaa muraadkiisu ahaa in uu dul–istaag yar ku sameeyo khudbadii Jimcaha, oo ahayd mid afka-Carabiga ku baxday. Sheekh Cabdullaahi oo, runtii, ah nin kaftan badan ayaa saddex qolo oo Soomaalida kamid ah mid walba hadal kaftan ah ku tuuray. Kaddib markii uu minbarkii ka soo dagey ayaa rag ka socda saddexdii qolo, ee uu kaftanka ku tuuray mid mid ugu yimaadeen.

Qolo walibana waxa ay ku haysatay in uu hadal aysan xaq iyo mudnaan toonna u lahayn uu ku yiri ama ka sheegay. Saddexda qolo mid waliba waxa ay maqashay oo kaliya wixii iyada laga sheegay, laakiin ma ahayn mid dan iyo heello toonna kaleh wixii kuwa kale laga sheegay, waayo caddaalad darro waxa ay u aragtaa koox walba wixii iyada laga sheegay, laakiin caddaalad darro iyo gardarro uma aragto waxa qolada kale laga sheegay.

Caddaalad xumada Soomaalidu waa mid u muuqata in ay gashay meel*(maqaam)* walba oo nolosha la xiriira, haddii ay ahaato nidaamka ama kala dambeynta, xaqsoorka iyo garqaadka iyo xallinta arrimaha bulshada. Wax lala yaabana ma aha in ay taasi suurowdo sababo badan oo aan horey u xusay baana asal u ah, oo Soomaalidu ma helin wax caddaalad ah oo soo mara ayna mahadiyaan. Taasi waxa ay dhaxalsiisey in caddaaladdii lagu eego wajigii markaa u quminayey danta qofka ama qoyska.

Ulama jeedo in aan Soomaalidu aqoon caddaalad, oo markii ay rabaan in caddaalad iyo xaqsoor wax lagu raadsho way garanayaan ciddii ay aadayaan oo waxa aan shaki ku jirin in ay aadayaan ama beegsanayaan ciddii ay ku tuhmayaan dareen caddaaladeed. Kuwaas oo ah culimmada Alle kitaabkiisa wax ka yaqaan ama dadka ku xukumaya, waana goortii la tuhunsan yahay in qofku gar helayo. Laakiin haddii uu qabo tuhun ah in aanu gar helayn, way yartahay in uu toos u abbaaro meesha caddaaladdu jirto, oo waxa la hayb-haybiyaa meelo kale oo aan caddaaladdi jirin si wax aan sax ahayn ay meesha uga dhashaan. Haddaba halkaa waxa aan ka garaneynaa in caddaaladda Soomaalidu ay ku salaysan tahay danta, laakiin aysan ahayn mid xaqsoor iyo nidaam salka ku haysa, wajiga ay Soomaalidu ku aragtana uu kaas yahay.

# DIINTA

Dunida waxa ka jira diimo badan. Inkasta oo diimaha dunidu ay aad u badan yihiin, haddana diimaha ugu caansan adduunka waxa ay ka yimaadeen qaaradda Aasiya. Diimaha ugu caansani waxa ay kala yihiin Kirishtaan, Yahuud, Islaam, Buddhism, Shikhism, iyo Hinduism, saddexda diimood ee dambe, dad badani ma rumaysna in ay diimo yihiin maaddaama aysan ahayn diimo samaawi ah 'monotheistic religions'.

Laakiin waxa ay qabaan in ay yihiin falsafado(Philosophical religions), niman caqli badanina soo allifeen, dadkana nidaam iyo diin uga dhigey. Qofkii rumeysan diin kamid ah diimahaan waxa uu aaminsan yahay in diintiisa kaliya ay tahay diinta saxda ah oo diimaha kale ay been yihiin. Diin walba waxa ay leedahay nin *'farriin side'* ah, oo diintaas dadka soo gaarsiiyey, barayna dadka. Farriinsidahaasi waxa uu dadka u sheegaa in uu sido fariintii Ilaahey oo waxa uu yiraahdaa Ilaahey ayaa isoo diray si aan dadka ugu gudbiyo fariintii Ilaahey.

Dadka uu Alle soo diray in uu tubta toosan iyo jidka wanaagsan addoommadiisa tuso, waxa loo yaqaan *Nebi ama Rasuul*. Diinta Islaamku waa tii ugu danbeeysay ee Alle(swt) u soo dajiyey dadka, sida Rasuulkeenii Muxumed(csw) inoo caddeeyay maalintii Xajatul Wadaac *"waxa uu inoo sheegay rasuulku in maanta diintii idiin kaamil tahay"*.Hase ahaatee, Nabigu(csw)waxa uu inooga warramay "in culimmadu tahay dhaxalkii nabiyadda, iyaguna ay marwalba ummadda ku hagi

doonaan diinta Alle oo ah Quraanka, Sunnada iyo fahamka salafu Saalixiinta.

Diinta Islaamku wakhtigii ay soo gaartay dhulka Soomaalida waxa ka taagan su'aalo badan maaddaama Soomaalidu aysan waxba qori jirin, mana la helayo wax qoraal ah oo caddaynaya wakhtigii ay soo gaartay. Waxaase jira caddeymo iyo taariikh hore oo sheegaysa in wakhti hore ay soo gaartay diinta Islaamku ama la oran karo jiritaanka Soomaaliduba waxa uu la bilowday imaatinkii diinta Islaamka, oo Soomaalida maanta jirtaa waa mirihii ka dhashay Muslimiintii Carabta ahaa ee dalka timi iyo dadkii madoobaa ee dhulka loogu yimi.

Waxa jira iyana riwaayad kale oo werinaysa in dhulka Soomaalidu dagto ay diinta Islaamku soo gaadhay qarnigii 10aad ee miilaadiga, kuna aadan afar boqol(400) oo sano kaddib galbintii rasuulkeenii suubbanaa Muxamed(csw). Waxa jira laba riwaayadood oo qeexaya qaabkii Islaamku kusoo gaaray Soomaaliya. Riwaayadi waxa ay sheegaysaa in Islaamku soo gaarey wakhtigii uu Nebi Muxamed(csw) joogay Maka, asxaabtuna aysan u hijroon Madiina.

Cabdalla Cumar Mansuur oo ah qoraa wax ka qora afka iyo taariikhda Soomaalida ayaa isagu aaminsan in qarnigii koowaad ee Hijriyada ay jiraan dad Soomaaliyeed oo muslimiin ahaa. Qoraa Mansuur waxa uu arrinta ku caddeynayaa qoraallo tilmaamaya qabuuro hore oo laga helay magaalada Muqdisho, waxaana qoraalladda kamid ah qabri qoraalkiisa ay ku caddahay *in Faadumo Bintu Cabdisamad Yaaquub* ay geeriyootay 101 Hijriyada. Waxa kale oo la hayaa qabri kale oo isna ay ku qoran

tahay in *Xaajiyo Bintu Maqdaam Muxammad* ay geeriyootay 138 Hijriyada, kuna aaddan qarnigii 8aad ee Miilaadiga.

Qoraallada la helay qaarkood waxa ay caddeynayaan in Berbera oo kutaal Waqooyiga Soomaalida, Baraawe oo iyana ku taal Koonfurta Soomaalida aan xilligga wax diin Islaam ahi soo gaarin. Markii asxaabta iyo guud ahaan Muslimiintii lagu dhibay Maka ayuu Nebigu(csw) asxaabtiisa qaarkeed usoo diray dhulka Xabashida, laakiin aan anigu u aqaan Daarul hijrateyn, waxaana halkaas soo gaaray tiro asxaab ah, uuna hoggaaminayey Jacfar Bin Abii Daalib, ayna kamid ahayd Jacfar xaaskiisii Asma.

Asxaabtaas oo muddo dhan tobon(10)sano joogtay dhulkaas waxa ay Islaamiyeen dadkii halkaas degganaa, waxaana laga yaabaa in ay halkaas naga soo gaartay diinta Islaamku, iyada oo nabad ah maaddaama Culummo badan oo dhulka Soomaaliya dacwad ka fidin jirtey ay ka yimaadeen xagga Galbeedka Soomaalida.

Riwaayadda labaad waxa la sheegaa in dadka Soomaalida ah, ee maanta geyiga ku nool iyo diinta Islaamkuba isku mar soo galeen dhulka Soomaalida ay maanta degto. Waxaa dad badan oo taariikhda Soomaalida wax ka qoraa aaminsan yihiin in dhulka hadda loo yaqaan Soomaaliya ay degganaayeen dad kale oo aan ahayn dadka Soomaalida maanta loo yaqaan, waxaana loo maleynayaa in ay ahaayeen dad Bantu ah.

Waxa la rumeysan yahay in Soomaalidu ay asal ahaan Carab ka timi, dabadeedna dadkii dhulka loogu yimi uu dhexmaray is dhexgal guur iyo mid dhaqan maaddaama diinta Islaamku aysan

oggoleyn in dadku is kala sooco, haddiiba ay Muslimiin wada yihiin. Waxa kale oo la aaminsan yahay in badanka dadkii Bantuuga ah loo digo riixey(durkiyey), dhanka Koonfurta oo waa wax dhaca in ummaduhu is digo riixaan, markii koror ku yimaado tiradooda. Waxa la dareemayaa in midabka dadka Soomaalida ahi uu u muuqdo laba midab oo is dhex galay, Aasiyaan iyo Afrikaan, taas oo dad badani ku doodaan in Soomaalidu labada jinsiba ay qaraabo la tahay.

Sida taariikhda Islaamka ku xusan dhulka Soomaalidu degto waxuu ahaa meelihii uu Islaamku soo dhaweynta kala kulmay oo ma'ahayn dhul Islaamku jihaadka ku gaaray ama Islaamku gaalo ka furtay. Waxa kale oo jirta in Soomaalidu ahaayeen dad aan Carab ahayn oo Cajab ah. Dad badani waxa ay sabab uga dhigaan aqoonta diinta Soomaalidu u lahayd oo hooseysey, cajabnimadooda iyo iyaga oo aan Islaamku furan dhulkooda oo uu si nabad ah ku soo gaadhay. Taasi waxa ay meesha ka saartay in diinta Islaamku si aqooni ku jirto ugu fiddo dhulka Soomaalida maaddaama ay meesha ka maqnayd aqoon hore oo uu dadku lahaa iyo in aan nidaam Islaami ah oo noocma dhul furasho ku yimi uusan meesha imaan ee diintu dhulka ku soo gaadhay nin Muslim ah oo arrimo adduunyo, ganacsi ama degaan doonasho, dhulka ku soo gaarey.

Sida ku cad buugga la yiraahdo"*Hirarkii Taariikhda iyo Halgankii Soomaalida*" ee uu qoray *Khaalid Cali-Guul Warsame Cadde(Allaha u naxariistee),* oo kamid ahaa qorayaasha Soomaaliyeed ee aadka ugu xeel dheeraa taariikhdii sooyaalka Soomaalida. Khaalid waxa uu tilmaamayaa in ay Soomaaliya soo gaareen Culimmo badan oo diinta ku fidisay Soomaaliya, kana

yimi dhankaa iyo dhulka Xijaas ilaa Cummaan, sida Saleebaan iyo Siciid Al-Jalandiini, oo ahaa laba nin oo walaalo ah, kana soo tallaabay dhanka Cummaan.

Sida taariikhyahan Khaalid cabbirayo, labadan nin waxa ay ahaayeen amiirradii markaa uga wakiilka ahaa dalka Cummaan Khaliifkii dawladdii Umawiyiinta, Cabdullaahi Binu Marwaan xilliyaddii 65-86 Hijriyada, waxa ayna Soomaaliya yimaadeen 95kii Hijriyada markii taladii ay hayeen laga wareejiyey. Waxa kale oo culimmadaa uu Khaalid tilmaamay kamid ahaa Seydiyiintii soo gaaray xeebaha Banaadir ee Soomaaliya 122 Hijriyada iyo weliba xilliggii Jacfar Cabdalla Al-Mansuur uu khilaafada hayey.

Xilliggaa waxa dhacay in niman burcad-badeed ah, Xabashina u badan ay jidgooyooyin dhigteen badda Cas ee u dhaxaysa Ereteriya iyo Ardul-xijaas ama dhulka loo yaqaan Baabul-mandab. Waxa kale oo dhacday in dad badan oo Muslimiin ahaa ay diintii ka laabteen(riddoobeen), dabadeed Jacfar waxa uu u soo diray ciidammo la dagaallama burcad-badeedda jidgooyada dhigatay iyo dadkaa diinta ka laabtay, waxa uuna u soo diray ciidan uu wato nin la oran jiray Yaxye Bin Cumar Al-Cansi. Ciidankaa uu Cansi watay waxa ay dagaalka ka soo bilaabeen xeebaha *Badda Cas* Caqaba ilaa Baabul-mandab, kaddib markii ay sifeeyeen shuftadii, waxa ay u soo wareegeen xeebaha badweynta Hindiya ee Xaafuun ilaa Mombasa. Magaalo walba oo ay soo maraan, kuna taal xeebta badweynta Hindiya waxa ay kula kulmayeen madaxdii joogtay, waxa ayna aad ugu bogeen sida dadku diinta u haystaan, uguna fidayso geyiga. Culimmada

caanka ka ahaa Soomaaliya waxa kamidahaa *Sheekh Yuusuf Al-Kowneyn* dad badan oo Soomaali ahina u yaqaan *Aw-Barkhadle.*

Sida aan ka akhriyay buug la yiraahdo"*Taariikhda Soomaalida*" majaladiisa ama qaybtiisa koowaad,[3] ee uu isla *Khaalid Cali-Guul* qoray, waxa uu ku caddeeyey in Al-Kowneyn uu Soomaalida baray sida loo higgaadiyo xuruufta afka Carabiga ee loo yaqaan *(Xuruufu Hijaa'iga)*, si ay dadku u helaan awood ah in ay bartaan quraanka. Haddaba waxa aan jeclahay in aan ka ambaqaado hadafkii aan u dan lahaa oo ahaa labada waji oo ay Soomaalidu ku eegto diinta intaa Alle iga solansiiyo.

Sida dad badani la socdaanba, Soomaalidu waxa ay lahayd gumeystaha kahor laba nidaam, oo dadku u xukun tagi jireen markii wax kala dhex galaan. Nidaamka hore waxa uu ahaa kan qabiilka, oo ka kooban aqalka odayaasha*(House of elders),* oo go'aanku ka soo fulo iyo kan dhallinyarada*(House of implementation),* oo go'aan la gaarey fuliya ama socodsiiya, sidaasna waxa caddeynaya buugga aan kor ku soo xusay ee Far Soomaaliga iyo Jarmalka ku qoran, *eeg bogga 5-6aad.* Nidaamkani waxa uu salka ku hayaa hab dhaqan beeleed ama deegaaneed, beeshuna arrimaha u gaarka waa ay ku qunsan jireen, beelaha kalena waa kula macaamili jireen. Kan kale waxa uu ahaa nidaamka diinta waxa uuna ku salaysnaa hab diini ah iyo gole

---

[3]Khaalid Cali-Guul Warsame Cadde, waxa uu ahaa qoraa soomaaliyeed, aqoon dheerna u leh taariikhda iyo dhaqanka Soomaalida, waxa kale oo uu ahaa Abwaan soomaaliyeed maansooyin badanna ka tiriyey xaaladaha kala duwan ee Soomaalidu ku sugan tahay. Allaha u naxariistee, Khaalid wuxuu geeriyooday sannadkii 2011kii, wuxuuna ku geeriyooday magaalada Koobenhagen ee carriga Denmark.

culimo, waxa ay fulin jireen wixii ka soo hara golayaasha beesha ee xukun iyo kala-saar ku salaysan. Waxa uu marwalba u muuqday mid ummaddu markii ay u baahato loo dacwo tago, laakiin waxa aan dareensanahay in uusan xukun dadka noloshooda oo dhan koobayey ahayn.

Ma muuqato in nidaam Islaami ah dadka soo maray marka laga reebo in ay qaybaha axkaamta iyo wax kala saaridda ay u adeegsan jireen, culimmaduna ma aheyn tan ummadda u talisa ee ummadda waxa horjooge u ahaa nin oday ah oo la doortay ama dhaxal ku yimi. Halkaa waxa weli ka muuqda in aan diintu dadka u noqon meel loo noqdo markii arrimuhu murgaan, laakiin markii dani timaado, sida guurka, dhaxalka, simmidda dubaakhooyinka iyo magaha in la aado culimmada, laakiin arrimaha kale ee maamulka iyo kala dambeynta ku saabsan aan marnaba culimmada waxba laga weydiin jirin.

Culimmaduna badanaa waxa ay ahaayeen kuwo u badan marti ama kuwo meelo kale ka soo baqoolay, oo ay dhif iyo nadir ahayd in ay beesha ama qoyska meesha deggan ay ka dhasheen. Taasi waxa ay shabbahaysaa, falsafaddii ama fikirkii ahaa in diinta iyo arrimmaha bulshada iyo nidaamaku ay kala baxsan yihiin, qolo walibana ay howsheeda leedahay. Taas oo laga dhaxlay diimihii ka horeeyey, diinta Islaamka, oo waxa dhacday in Kaniisadihii meel lagu xirey, noloshii kale ee ummaddana meel lagu xirey una muuqata: *"kala saaridda diinta iyo nolosha bulshada hoggaankeeda ama dawladnimada"* 'Faslu diin-canil dawlah'.

Waxa dhici karta in aan sidaas loo wada fahamsaneyn, laakiin waa muuqataa arrintaasi, ilaa maantada la joogana dad badan oo

Soomaali ah ayaa waxa laga dhaadhicin la yahay in diintu tahay min bilow ilaa dhammaad nolosha dadka, wax kale oo suuragal ah, oo dhamaystiri karana noloshana ma jiraan illaa Diinta Islaamka loo xukun tago mooyee. In aqoonta Soomaalidu diinta u leedahay ay ahayd, welina tahay mid yar waxa idiin caddeynaya gabayga uu ka tiriyey Raxiimu llaahi calayhi, Xaaji Aadan Af-qallooc Soomaalida sannadkii 1946kii.

Gabaygu waxa uu u muuqda mid maanta la nool, oo weligeedba Soomaalidu intooda badani, markii laga reebo inyar oo Alle u naxariistey mooyee, waxa ay ahaayeen kuwo diinta gees marsan: qaarna waa inkirsanaayeen, qaarna si aan habbooneyn oo curraafeysi iyo khaladaad badani ka muuqdo ayey diinta kaga dhaqmayeen ama ka haysteen.

Xaaji Aadan Af-qallooc isaga oo arrintaa cabbiraysana waxa uu yiri:-

*Sayid Maxamed baa la inkiroo gaal la aaminaye*
*Weligiin Islaanimadda waad ka arradnaydeene,*
*Ma aqbalo sharcigu xaalkaanoo waa anfiyayaaye,*
*Miyeydaan aqoon diinta waad ku andacootaane,*
*Ingiriis iyo Talyaani sidii Nebi addeecdaane,*
*Idinkuna sida aboorka iyo tukaha yaysu aragtaane,*
*Wax addoomo laydinka dhigay uumiyaa kale'e,*
*Hadba kii ajnibiyoo yimaad daba ordaysaane,*
*Nimaydaan aqoon baad fadliga u icticqaaddaane,*
*Ma aqbalo sharcigu xaalkanoo waa anfiyayaaye,*
*Miyeydaan aqoon diinta waad ku andacootaane,*
*Agoonta iyo masaakiintoo loo arxami waayey,*

*Indhoolaha gaboobiyo hablaha agab la'aan jooga,*
*Iyagoo agtiinii ku qadey oo anfaco waayey,*
*Hadba meel nin lagu aasey baad adhiga geysaane,*
*Ma aqbalo sharcigu xaalkanoo waa anfinayaaye,*
*Miyeydaan aqoon diinta waad ku andacootaane.*
*Agoon baad dhacdeen iyo faqiir aabihiis go'aye,*
*Inyar baa sekada qaybisee waad asturateene,*
*Isimkii Ilaah baad xilibii ka arfac yeesheene,*
*Alle haddaad taqaanniin dulmiga eegga kala jooga,*
*Arjaca oo wixii hore tagee ahabka soo raaca,*
*Istiqfaarta iyo Toobaddana laabta ka ogaada,*
*Ikhwaa magaca laydin baxshee eedda kala daasta,*
*Haddii kale abaalkiina suga aragte qaarkiise!*

Gabaygan oo sifeynaya heerka Soomaalidu diinta ka taagan tahay, waxa aan qabaa in aan Xaaji Aadan Af-qalooc uusan ku gafin waxa uu Soomaali ku sifeeyey.

Nin adeerkay ah, oo aanu waliba saaxiib nahay ayaa iiga sheekeeyey sheeko si qosol u leh sina naxdin iyo argagax u leh. Ninkaa waxa la yiraahdaa Cabdi Siciid Dhuule, waxa uu ii sheegay in oday aanu qaraaba nahay, laakiin aanan anigu arag uu u soo martiyey nin wadaad ahi. Wadaadkii ayaa ninkii odayga ahaa sooryeeyey oo u loogay, dhankaa Soomaalidu ammaan bay ku leedahay oo illaa xad culimmada waa ay karaameeyaan, xataa reerka uu yahay lama haybsado, waana la soo dhaweeyaa.

Wadaadkii markii uu nastay, muddana la fadhiyey odaygii ayna is wareysteen ayaa wadaadkii kor tagey, oo Ubbadii/weysadii biyo loogu shubay, waxa uuna geedkii ay hoos fadhiyeen surey

oo uga tagey kitaabkiisii. Odaygii waxa uu arkay kitaabkii oo geedkii suran, dabadeedna waran ayuu odaygii soo qaatay oo kitaabkii baalba meel dhigay. Wadaadkii baa soo laabtay waxa uuse arkay waxa dhacay, amakaag iyo af kala hayn baa dadkii ka soo harey.

Odaygii waxa la weydiiyey waxa uu kitaabka Alle ku maagay, waxa uuna ku jawaabay; -

*"kitaabku sow kii wananka iyo orgiyada iga qali jiray ma aha anna maantaan wakhti u helay wanan dambe a yuusan iga qali doonin"*

Dhacdadaan oo runtii u muuqata dhacdo xanuun badan ayaan qabaa in culimmada laftoodu qayb ka ahaayeen, marka laga reebo inyar, in dadka qaarkiis kitaabkii Alle colaad u qaadaan, iyaga oo aan la barin in Kitaabka Alle ay xaq tahay in lagu dhaqmo. Laakiin kitaabku uusan ahayn mid ummadda lagu dawarsado ama xoolaha lagaga urursado, oo noocmaa shaqo abuurasho ah laga dhigto.

Waxa iyana jirta oraah la adeegsado marka la doonayo in culimmada la maago oo la rabo in wax laga sheego, taas oo ah:

*"Haddaan culimooy cad la goostiyo cashar mooyee ciidan kaa dayo ceeb anaa falay"*

Qiso kale oo, runtii, aniga igu reebtay dareen aad u dheer oo aan ka qaatay hab dhaqanka Soomaalida ayaa waxa iiga sheekeeyey walaal aan jeclahay, lana yiraahdo Sheekh Cabdiweli Xuseen, kuna nool magaalada Stockholm ee dalka Sweden. Sheekh

Cabdiweli waxa uu yiri: waxa dhacday in oday Soomaaliyeed oo reer miyi ahi uu laba wiil oo uu dhalay geel laba boqol oo halaad ah uu uga baxshay yarad laba gabdhood.

Waxa mudda gaaban kaddib geeridii Alle u timi labadii wiil. Odaygu ma dhalin wiilal kale oo gabdhihii dumaala, maaddaama dhaqanka Soomaalidu ku salaysan yahay in gabadhii reerka soo gasha haddii saygeedu dhinto ay habboon tahay in gabadha say kale la siiyo, si qoyskii u sii waaro, gabdhuhuna aysan qoyska uga dhex bixin maaddaama gabadha xoolo badan oo yarad ah laga baxshay. Taas oo ay dheer tahay haddii ninkii hore ee dhintay uu carruur ka tagey, ay xal u tahay in carruurtu hesho aabbe u beddela aabbahood, oo aan ahayn nin qoyska ka baxsan. Odaygii waxa uu damcay in isaga laftiisu gabdhihii dumaalo, odaygii waxa loo sheegay in aan Shareecada Islaamku oggolayn dumaasha gabdhaha ay wiilashiisu ka dhinteen, kitaabka Allena aysan ku qorneyn.

Odaygii waxa uu ku jawaabay:-

*'Kitaab Alle dantay mooge gabdhaha hala ii mehersho'.* Waxa kale oo aan maqlay; *"kitaab Alle dantay ma moogee gabdhaha ha la ii mehersho"*

Oraahdan dambe waxa iyana ii sheegay Ustaad Axmed Sabriye Gaabow, oo ah bare afka Soomaaliga ka dhiga dugsiyada dalka Sweden', qoraana ah.

Sheekada kale ee Soomaalida dhexdeeda macruufka ka ah ayaa waxa ay tahay; in nin Geel-jire ah lagu yiri;-

*'war ninyahow maad Soontid oo Tukatid oo Geelana Sekada ka bixisid, miyaadan nin Alle ka baqaya oo Muslim ah aadan ahayn?*

Ninkii wuu xisaabtamey, Soomaaliduna waa dad Geela aad u jecel, lexo jeclo badanna u qaba.

Ninkii waxa laga hayaa hawraarta ah:

- *Soon iyo maxaa iiga dana, Caano subax diidka.*
- *Salaad iyo maxaa iga galay, Suxullo mayrmayrka*
- *Seko iyo maxaa iiga jira, Qaalmo sogan dhiibka.*
- *Soddon intii aan qadi laa, ama aan Suxullo mayrmari laa, ama aan Qaalmo sogan bixin laa, Naartu hay sugato.*

Hawraartani waa mid kuu muujinaysa aqoon darro aad u weyn oo haysata ninkaa Geel jiraha ah, una muuqda mid u bareerey, Cadaab, oo qofkii garanayaa ama Quraanka iyo Axaadiistu uga sheekeeyeen, aan ahayn meel lagu deg-dego, iyada oo adduunyo jaceyl iyo dan dhabarka la marsanayo. Arrintani waxa ay i xasuusisay, gabay uu waa hore tiriyey Allaha u naxariistee Abwaan Cabdullaahi Macallim Axmed(Dhoodaan), isaga oo aad ula yaabban, damiirka dadka Soomaalida ah, isaga oo kala garan waayey in dadka Soomaalida ahi ay Muslimiin yihiin iyo in kale, waxa uuna Dhoodaan arrintaa ka tiriyey gabay dheer, oo ay tixdani kamid ahayd:

- *Gidigeedba Soomaali Guudka ka Islaam dheh, Gun markaad u eegtana Gaalo taag daran dheh.*

Ma aha wax aan dhici karin in dad badan oo Soomaali ahi ku qanacsan yihiin u xukun tagga Shareecadda Alle, wallow ay

su'aal gelinayaan cidda ku xukumaysa, waxadna mooddaa in halkaa aamin la'aani ka jirto, taas oo salka ku haysa laba arrimood midood:

Waa tan horee culimmadii Soomaaliyeed horey loogama baran in ay dadka u soo diyaariyaan nidaan Islaami ah oo kala dambeyntiisa iyo dhameystirkiisa leh, dadkana gaarsiiya qaab dawli ah, oo ilaa maantadan la joogo ayaa la isku fahmi la'yahay. Waxaana jirta ciddii rabta in ay dadka xujada Alle ku oogto in magacyo loo bixiyo, waxaana la leeyahay wax aan ummaddu aqoon ayey la yimaadeen, waana midda hadda jirta, dad badanse kuma baraarugsana arrintaa.

Waa tan labaade dadka marwalba qalbigooda waxa ka guuxaya reerka ama beesha ay noqon karaan dadka Kitaabka Alle ku dhaqaya, waxaana taa sababay, dadku weli ma arag nidaam ka sarreeye reer ama beeleysi marka lagu daro dawladihii iska calmaaniga ahaa ee dalka soo maray. Dadku in ay is weydiiyaan, cidda xukunka u qabaneysa waa wax laga dhaxlay wixii ay horey u soo mareen, dhegehoodu ma maqal, indhahooduna ma arag wax aan nidaam darro iyo sadbursiinyo ahayn.

Waxa caado iyo hadal hayn ka ahayd dhulka Soomaalida in aan xisaab weyn lagu darsan ninku haddii uu wadaad yahay, waxaana la aaminsanaa in aan wadaadku ku jirin ragga, meesha wax lagu qaybsanaysana aan laga heli jirin. Hadalkaas waxa ku jira carrab dalab leh oo ah in aan wadaadka xisaabta ragga marwalba lagu buuxsho, ama la yiraahdo reer hebel ama ilmo hebel waa wadaaddo oo macno badan ma leh.

Arrintaasi waa arrin, runtii, qiimeyn hoose ah, laguna cabbirayo qofka ehlu diinka ah, lamana fahmi karo dhibaatada ka dhalan karta in miisaan hoose loo yeelo ciddii Alle diintiisa xambaarsaneyd ama baratay. Sidoo kale waxa iyana macruuf ahayd markii la tirinayo oday walba wiilashiisa in uu u kala saaro wiilashiisa, oo uu yiraahdo waxan dhalay shan nin oo mid wadaad yahay. Dhanka kale Soomaalida waxa lagu ammaanaa in ay yihiin dad diin jecel, culimmadana aad u soo dhaweeya. Arrintaasi waa mid muuqata, waayo qoysaska Soomaaliyeed, waxa aad ku dhex arkaysaa ubad ay dhaleen culimmo badan, oo aan reerka ka dhalan, welibana waxa culimmadaa loo guurin jiray hablaha ay dhalaan odayada reerka u arrimiya, si loo sharfo Sheekha reerka la degay.

Anigu waxa aan ahaa mid ku soo barbaaray gobollada Koonfureed, laakiin markii aan tagey bariga Soomaaliya, qoyskayaguna dego, ayaa waxa aan la kulmay dhallinyaro badan, hayb-ahaanna aan qoyska ahayn, laakiin la qabtan iyo qaaraanba ah. Dhallinyaradaasi waa ubadkii iyo faracii culimmo reerka la degtay, waxna bari jirtay. Waxa layaab leh, mar Soomaalidu waxa ay ahayd mid liidda culimmada, oo ragga ka saarta, marna waa mid derejo iyo karaamayn siisa, taas oo muujinaysa hadba wajiga iyo qaabka ay markaas u arkaan diinta iyo culimmadaba.

Waxa xaqiiq ah in Soomaalidu diinta u baran jirtey laba arrimmood middood:

- In qofku diinta barto dadkana baro, in qofku diinta barto una barto inuu ku shaqeysto,
- In qofku diinta barto una barto inuu ku cibaadeysto,

Laakiin marnaba meesha kuma jirin in diinta la barto, dabadeedna xukun heer dawli ah gaarsiisan la isugu xukumo, arritaasna wax cusub oo aan la arag lana maqal ayey Soomaalidu u aragtaa.

Waxa marar badan soo noqnoqota, oo dad badani ku doodaan in Soomaalidu tahay dad aad diinta u jecel, rabana in ay u xukun tagaan. Arrintaasi run iyo sax ma wada aha, laakiin wax ayaa ka jiri kara, waxaana dhici karta dad badani in aysan fahmin diinta ha loo xukun tago waxa ka dambeeya, laakiin ay afka baarkiisa tahay. Waxa marag ma doonto ah, in Soomaalidu aysan jeclaan jirin amase aysanba hadda jecleyn Sheekhii ay u dareemaan in uu kahor imaanayo wixii dantu markaa ku jirto.

Waxa dhacda, oo suurtagal ah, in Sheekhaa loo baxsho magacyo iyo tilmaamo badan. Waxa iyana jirta in loogu yeero Sheekh aan rajo lahayn ama dadka qalbiga ka jabiya, dadkana cadaabta geliya, ileyn waxa dhici karta waxa uu Sheekhu dadka ka waaninayo in qayb kamid ahi cadaab lagu mudan karo, diintuna waa mid dadka uga digta in cadaab Alle la mutaysto, jannana ugu bishaareysa kii isu aammina in uu yahay addoon Alle. Laakiin waxa dhacda in Sheekha dantii ay rabeen la fahma, wanankana ka urursada, wax digniin iyo wacdi ahna aan u soo jeedin, dhabarkana ka dharbaaxa oo yiraahda jannaa idiin dagatay in la jecleysto, lana soo dhaweeyo, xoolana loo urursho.

Meeshaa waxa ka muuqda calaamad ah in aan diin laga hadleyn, laakiin dani ka jirto, dantuna marwalba qofka Soomaaliga waxa ay kala weyn tahay wixii dantaas ka soo hara.

Waxa geyiga Soomaalidu degto, ha ahaato kuwa xornimada lagu sheego amase kuwa la gumeysto, Soomaali Galbeed ama Gobollada Waqooyi Bari kaga yaal dalka Kenya la yiraahdo, in laga helo fadhiyo badan oo xer lagu yaqaan xertaas iyo Sheekhooduba kuwo xoolo ay u soo xeroodaan ma aha.Shaqo hanti badan laga kasban karana meesha kama muuqato, haddana qaab nololeedkoodu waxa uu ka sarreeyaa qaybo kamidah kuwa adduunyada u saaxiibka ah. Waxa sabab looga dhigi karaa, waxa ay Culimmo u yihiin jannadana ugu bishaareeyaan kuwa horjoogayaasha ka ah dawladaha gumeystaha ah, Itoobiya iyo Kenya, ama maamullada ka jira goboladda kale. Waxaana loo aaminsan yahay in ay yihiin qayb kamid ah shaqaalaha nidaamyada, miisaaniyad dhaqaalena waa laga siiyaa, waxa ayna ku mutaysteen waa diinta ay dantii la rabay dhex geliyeen ama ku jideeyeen.

Waxa jira in maahmaahyo loo sameeyey culimadda Soomaalida, maddaama dad badani dareensan yihiin in culimmada qaarkeed dantooda ku dherershaan diinta, oo kolba sida ay ugu badinayso la adaan kitaabka Alle, iyaga oo ka eegaya maslaxaddooda.

Maahmaahyadaas loo baxshay waxa kamid ah kuwan:-

- *Wadaad qiil uu ku bannaysto iyo qandi uu ku rito midna ma waayo.*
- *La jiifiyaana bannaan la joojiyaana bannaan.*
- *Culimmo waa koore geel.*

Dhamaaan maahmaahyadani waxa ay tilmaamayaan dhanka taban(negative), ee culimmada Soomaaliyeed laga dareemay amase laga arkay, lana tuhunsan yahay in ay hadba sidii ay doonaan diinta u jeediyaan dantoodana ku dhereriyaan. Waxa aanu hadda kahor gurigiisa ku soo booqannay aniga iyo laba nin oo aanu saaxiib nahay oday kamid ah siyaasiinta Soomaalida, oo weliba siyaasadda ku soo jiray ilaa 1960kii. Odayga qaraabo ayaannu nahay, aabbahayna saaxiib ayey ahaayeen. Markii aanu cabbaar sheekeysaney odaygii ayaa sheekadii waxa ay nala gashay diinta iyo ku dhaqankeeda. Odaygii waxa uu la soo booday diinta in la isku xukumo waa sax, oo gacanta la gooyo qofkii wax xada, qofkii sineystana la karbaasho ama la rajmiyo, laakiin wakhtigeedii ma aha oo waa in muddo la sugaa.

Odaygan adeerkay ahi eed maleh, waxa uuna noo sheegay heerka aqoontiisa diimeed gaarsiisan tahay, haddiiba uu diinta Islaamka in la isku xukumo uu ka garanayo dhawr qodob oo kamid ah xadka ama ciqaabta la oofinayo. Wixii aanu ku dhaannay ayaannu u sheegney waana ka soo tagnay, annagoo dareensan in aysan ka daadegeyn wixii aanu u sheegnay, waayo todobaatan(70)sano ayuu fikirkaas ku soo gaarey, marka saacado loogama saari karo, maskaxdiisuna ma aha mid qaadan karta wax ay todobaatan sano qaadan weyday ama ay dhici karto in aan horey loogu sheegin.Sawirkaa xun ee ku dhaqanka Shareecada Alle laga baxshay, qayb kamid ah Culimmadii hore ee Soomaalida ayaa sabab u ah, waana soo xusay, qaybta kalena, nidaamyadii dalka soo maray oo iyagu nidaam aysan aqoon gacanta loo geliyey, dabadeedna madaxa la isu gashay ayaa sabab u ah.

Anigu waxa aan kamid ahaa ardadii Soomaaliyeed ee dugsi sare ka qalin jabisey 1984kii, maddooyinka dugsiga sare lagu dhigtona waxa kamid ahayd maaddada taariikhda, cutub kamid ah ayaa ka sheekeeynayey taariikhda Islaamka.

Cutubkaas oo cinwaankiisu yahay Taariikhda Islaamka; *'Khilaafkii Cali iyo Mucaawiye'*, waxa uu ardayda barayey ama u soo gudbinayey khilaafkii soo kala dhexgalay qaybo asxaabtii Rasuulka kamid ahaa(csw). Laakiin ma ahayn mid marnaba xusayey dawladihii ama khaliifooyinkii Islaamka ee dunida gaarsiiyey ku dhaqanka Shareecada Alle(swt).

- *Haddaba, su'aasha is weydiinta mudani waxa ay tahay: Dawladdii Islaamka ee Bartamaha Yurub ilaa Bariga fog gaartay oo caalamka mar wada saydaraysey ma waxa tariikh u noqday oo weliba dal sheeganaya in dadkiisu Muslimiin yihiin, in la xuso oo keliya khilaaf mar asxaabta dhex galey?*

Arrintaa waxa ka shaqeeyey hay'adda u qaabilsan Sahyuuniyadda Caalamka baabi'nta akhlaaqiyaadka Suubban ee Diinta Islaamka, hay'adaasi waa '*United Nations Educational, Scientific and Cultural Organization*'(UNESCO).

Hay'addan ayaa ah mid dhaqaale iyo farsamoba gacan ka siisa hay'adaha waxbarashada u qaabilsan dal kasta oo u hoggaansan hoggaanka Qaramada Midoobay. Nidaamyadii Soomaaliya soo marayna kuwaas u hoggaansan ayey kamid ahaayeen oo ma jirin wax mabaa'dii ah oo ay ku diidi kareen. Manaahijta waxbarashada(curriculums) iyo nooca loo soo gudbinayo qorshaha waxbarashadana iyada ayaa maamuli jirtey, waana tan

keentay in Khaliifadii Islaamka, ee aysan weli dhicin nidaam lamid ah ama la tabar ah oo caalamka soo mara, in lagu soo koobo taariikhdeeda khilaaf laba asxaabi Allaha raalli ka noqdee, dhex maray, wax ka horeeyey iyo wax ka dambeeyeyna oo taariikh ah, lana xuso uusan jirin.

Dhacdadaan oo u muuqata runtii arrin aad u liidata, in qof Muslim ah laga iibsho ama laga dhaadhiciyo, waana masalo aad raqiis u ah,'*Primery issue*'. Layaab ma leh qofkii isagu Islaamka mabda'aahaan ula dagaallamaya, ee waxa liidnimo iyo dulli u sugnaaday kan isu haysta in uu yahay mid aaminsan Islaamka, aqoon maaddiyana sheeganaya, mowduucaa raqiiska ahna gacantiisa ku qoraya, fahamkiisuna gaarsiin waayey in uu xataa af ahaan u fahmo ereygan ama tusalahaan.

Waxa aan daawadey barnaamij ay soo diyaariyey Shaashadda BBC ee dalka Britain qaybteeda ku hadasha afka ingiriiska. Barnaamijku waxa uu ka hadlayey isbeddelka dhaqaale iyo midka siyaasadeed ee Shiinuhu ku tallaabsaday. Nin weriye ah ayaa magaalada Peking dhex taagan waxa uuna agtaagan yahay sawir dhagax ah oo loo sameeyey hoggamiyihii kacaanka Shiinaha Mao Tse Tung. Dad badan oo isugu jira rag iyo dumar ayuu wareysanayaa, waxa uu weydiiyey siday u arkaan isbeddelka siyaasadeed ee Shiinaha ka socdaa iyo fur-furnaanta suuqa dhaqaalaha(*Laissez-faire*)[4] iyo sida uu ku yimi, dadkii waxa ay ugu jawaabeen in ay tahay wax wanaagsan.

[4]Laissez-faire, waa kelmad ama erey Faransiis ah, micnihiisuna yahay in suuqa dhaqaalaha laga madaxbanneeyo faragelinta iyo waardiyaha ay

Waxa uu haddana weydiiyey, siyaasadda dhaqaalaha ee hadda furfuran, laakiin xilligii Mao ahayd mid xir xiran, halkana waxa aynu hor taagannahay, sawirkiisii oo dhagax, sow lama oran karo Mao, dalka Shiinaha xarig adag oo horumar la'aan ah ayuu ku hayey, dadkuna hadda in ay ka reysteen ayey u muuqataa? Dadkii hal mar ayey aamuseen, waxaana weriyihii ku baraarugey isaga oo laga kala dareeray, waxa uuna dareemay in warkiisii la qoonsaday turjubaankii la socday ayaa waxa uu ku wergeliyey oo uu u sheegay in uu ku sigtay in lala daggaallamo, meesha innaga keen ayaana turjubaankii kula taliyey.

Arrintaasi waxa ay calaamo u tahay in aan qofku marnaba mabaa'diida uu aaminsan yahay oggolaan karin in wax xumaan ah laga sheego, welibana qof uu aaminsan yahay, in uu yahay cadowgii mabda'aa isagu tiradaba kuma sii jiro, dadka reer Shiinana Mao waxa ay u haystaan kii badbaadiyey, waana u mabaa'dii wixii uu ula yimi. Weriyihii waxa uu sheegay in dantu ku khasabtay in uu barnaamijkii joojiyo, isaga oo ay ku adkaatay in uu sii wado wareysigii, cabsi xagga amniga ahna dareemay, waxa uuna go'aan ku gaaray in uu meeshii ka tago, isaga oo dareensan in uu dambi galay, maaddaama uu ummad dhan mabaa'diideedii iyo halyeygoodii uu qiimo darro ku sameeyey[5].

---

dawladdu ku samaynayso, suuquna isagu go'aanka ganacsi ama wax isweydaarsi uu xor u yahay.

[5] Mao Tse Tung, waa aabbihii dadka reer Shiine, waana buddhigihii kacaankii hantiwadaagga ku slaysnaa ee Shiinaha ka hirgalay 1940kii. Mao, dadka Shiinaha calaamad ay ku daydaan ayuu u yahay, waxa ayna u arkaan sharftii Shiinaha in uu xambaarsan yahay.

Waxa kale oo aan daawadey barnaamij la oran jiray *"7 Up South Africa was made in 1992"*, oo ay diyaarisey Shaashadda caalamiga ah ee Al-jazeera qaybteeda Englishka sannadkii 2013kii. Barnaamijkasi waxa uu ka hadlayey mustaqbalka carruurta reer Koonfur Afrika iyo sidii loo hirgelin lahaa mashruucii la doonayey in lagu baab'iyo nidaamkii midab kala sooca(Apartheid), ahaa ee dalkaa muddo qarniyo ku siman ka jiray, dalkana laga hirgeliyo aragtidii ahayd in la isku mid yahay *(Rainbow Nation)*[6], oo aheyd in dad siman la wada yahay, laakiinse ay jiraan midabyo kala duwan.

Barnaamijkan oo ahaa mid lagu wareysanayey carruur aan da'doodu ka weyneyn toban(10)jirro, kana koobnaa dhammaan qowmiyadaha kala duwan ee dadka reer Koonfur Afrika, sida Afrikaanerka*(Caddaanka tirada yar)*, Xhosa iyo Zulu. Waxyaalihii Carruurtaa la weydiinayey waxa kamid ahaa afka ay ku hadlaan ama ay jecel yihiin in dadka dunidu ku hadlaan, ilmo waliba oo carruurtaa kamid ahina waxa uu ku jawaabayey afka uu isagu markaa ku hadlayey in ay noqoto afka lagaga hadlo dunida ama dadka dunida oo dhammi ay isku wada fahmaan(Lingua

[6]Rainbow Nation, waa aragti ama hal-kudhig siyaasadeed iyo mid bulsho, salkana ku haysa in dadyowga ku nool dalka Koonfur Afrika ay yihiin dad isku mid ah, sinnaaanina ka dhexeyso wallow ay midabkoodu iyo jinsigooduba kala geddisan yahay. Ereyga Rainbow Nation waxa soo saarey ama hal-abuurkeeda lahaa ninka Baadariga ah, lana yiraahdo Desmond Tutu, waxaase hirgeliyey, horumar iyo adeegsina ku sameeyey Nelson Mandela, oo ah madaxweynihii ugu horreeyey ee madow ah , dhawaana geeriyooday, dalkaasna soo marey.

Franca)[7].Taasi waa mid ku tusaysa in qofku waxa uu asal u leeyahay ay marwalba tahay mid halbeeg u noqoneysa qofka jiritaankiisa, la'aanteeduna aysan ahayn mid munaasib ah. Haddaba ummadi waxa ay ummad leh jiritaan ku tahay hadba sida aay u ilaashato waxyaalaha lama taabtaanka u ah oo aay Diintu ugu horreyso. Sidaa darteed aragtida Soomaalida ee diinta ku wajahani waa middaa aan kor ku soo xusay, aadna mooddo in dantu kala weyn tahay diintooda.

Dad badan oo Soomaali ah ayaa sheekooyinkooda ku dara marka ay miisaan saarayaan xiriirka ka dhexeeya Soomaalida iyo diinta. Waxa ayna cabbiraan in Soomaalidu tahay dad jecel diinta Islaamka, laakiin aan diyaar u ahayn ku dhaqankeeda, waayo danta ayaa qofka Soomaaliga ah kala weyn diinta. Qofka Soomaaliga ahina waaa mid jecel in uu Muslim iska ahaado, laakiinse aan la keenin ama aan xisaabta lagu darin wixii markaa dantiisa qof ahaaneed arbushaad ama xujo gelinaya. Dad badan ayaa aaminsan in qofka Soomaaliga ahi yahay mid jecel in uu salaaddiisa iska tukado, wixii markaa uu munaasib u arkana sameeya, isaga oo aan xisaabta ku darin in ciqaab iyo caro Alle ka iman karto.

Dadka qaba aragtidani waa kuwo ku xoojinaya dooddooda sida Soomaalida uu sahal u la yahay in ay Qabyaalad isu ururiso, isuna abaabusho, iyada oo diyaar u ah in ay wax ku dulmiso.

[7]Lingua Franca = Afka la isku fahmo, waa af ay dadku isku fahmaan, weliba dadka kala afka ah, oo aan isku qowmiyadda ahayn, sida Ingiriiska dadyow badan ayuu u yahay af ay isku af-gartaan, waxa kale oo la yiraahda 'Bridge Languge' Iskuxirka-afka'

Ceebna kama aha Soomaalida in ay durbaanka u tumaan qabyaaladda, ilaa la gaarsiiyey in xataa Halbeeggii Siyaasadda(*Political Standard*), qabyaalad lagu cad goostey. Qof walba oo doonaya in uu miidaanka siyaasadda soo galana, waa in uu ahaadaa mid Qabyaaladda soo mara, mana muuqato in la heli karo jid bixiye kale oo qofku siyaasadda ku soo geli karo, taas oo ah arrin aad u liidata, qof xishoonayana uusan isu quuri karin meesha Soomaalidu siyaasadda iyo hoggaanka ay ka dooneen, iyaga oo qabyaalad shafka u garaacaya.

# CUTUBKA LABAAD

## DAWLADNIMADA

*Lixdankii israaciyo markii dawlad la aas-aasay,*
*Iyo maanta oo tii afraad idinka loo dhiibey,*
*Tabaaniyo acwaan iyo siniin idan leh weeyaane,*
*Irbad lama dun gelin oo dib baad u ambaqaaddeene,*
*Ayaan noolba waxan loo fadhiyin baannu aragnaaye,*
*Raggii hore arrimmo dhow oo lagaga eed sheegtey,*
*Idinkana digniintiin ah baan oranayaa qaare.*
*Aqoon la la collobiyo jahliga jahliga amarka loo dhiibay.*
*Idaaradaha waxa ay qabtaan waana la ogaannin.*
*Ilaashihiyo tuugoo shurkoo gura adduunkeenna.*
*Araajida la qorayaan jawaabtoodu imanaynin.*
*Ajuurada la siin kuuligii daynka ku amaahday.*
*Sharcigoo la iibsanahayoo xaqa la awdaayo.*
*Intikhaab dacaawiga ahoo daallinku adkaado.*
*Dambi oogta ka caddaan ciqaab lagaga aargoosan.*
*Acyaan aan xilkas ahayn waxa uu urursho mooyaane.*
*Ballan aan la oofinoo ninkii yidhiba eedoobey.*
*Aanadiyo xeerkoo dadkii lagu adkaynaayo.*
*Anafada ninkii shaqo hayaa ah iyo laan sheegto.*
*Ninba meesha lagu aaminoo koonto ku abuurto.*
*Ixtiraam la'aan iyo dadkoo aan is addeecaynin.*
*Iskuullada caqiidada inkira Sharci Islaameedka.*
*Jawaasiis Ameerikoo dalkii lagu ibaaxeeyey.*
*Kuwa aradka qaar haysta ooy Roomi ku illowdey.*
*Amuuraha Shacbigu diidbuu ka ashtakoonaayo.*
*Intaas bawgu yare xaalku wuu sii af-dheeryahaye.*

***"Xaaji Aadan Axmed Xassan(Af-qallooc), Allaha u naxariistee".***

Sida dad badani ay rumaysan yihiin, Soomaalidu weli ma helin qaab siyaasadeed oo midaysan, kaas oo u horseedi kara waxa loo yaqaan dawladnimo. Waxa caddeyn u ah qaabka dawliga ahi waxa uu leeyahay qawaacid iyo qaab dhismeed aan khilaaf ka taagneyn, haddii uu yahay mid cilmaani ah amase mid diini ah. Sida uu Noah Webster ku qeexayo qaamuuskiisa,

*"dawladi waa awood abaabulan, taas oo tilmaamaysa hay'adaha hoggaanka iyo qoondaynta awood wax tar leh" "Government means organized authority and implies the institutions of leadership and authoritative allocation of values"*

Sida aqoon-yahanno badan oo Muslimiin ah iyo kuwa aan Muslimiin ahaynba ay qabaan, waxa jira laba dariiq oo muujinaya waxa dawladda loo yaqaan ee caalamkan aan ku noolnahay soo maray, oo weliba qaar kamid ahi ay weli jiraan.

Midda koowaad waxa ay tahay nooca loo yaqaan dawladdaha aan diimaha ku dhisnayn*(Secular State),* oo ah dawlad xukunkeeda ay dadku leeyihiin, waxa ayna u kala baxdaa saddex nooc oo kala ah keligii taliye*(oligarchy),* boqortooyo*(monarchy)* iyo kuwo dabaqad gaar ah ay xukunto, dabaqadaas waxa lagu sifeeyaa hantida ay haystaan ama sharafta ay leeyihiin *(aristocracy).*

Nooca kale ee dawliga ah ee caalamka soo maray waxa weeye dawlad Diini ah*(Theology State of Government),* taas oo ah dawlad ku dhisan Diin, lana dhaqan geliyo qawaaniinta Alle dadkuna u hogaansamaan awaamiirta iyo nidaamka uu na farayo Kutubta Alle iyo Sunnadda Rasuuladda(csw).

Haddaba waxa aan rabaa in aan qadar yar soo dhiraandhiriyo aragtida ama nadariyadda ay kala leeyihiin labadan qaab dhismeed ee dawladnimo iyo kuwii Soomaalida soo maray soddonkii(30) sano oo Soomaalidu dawladnimada sheeganaysay, 1960-1990kii, wixii ay isaga mid yihiin iyo wixii ay ku kala duwan yihiinba.

## ARAGTIDA DAWLADDA CALMAANIGA AH (THEORY OF SECULAR GOVERNMENT)

Mowduuca dawladninada ee calmaaniga ahi ma aha mid cusub. Dawladi waa xubin, taas oo leh awood ay ku fuliso ama ku socodsiiso sharciga u yaal, islamarkaasna ka dhex abuuraysa wada shaqayn bulshada iyo hay'adaha dawliga ah, kuwa diiniga, kuwa culluumta iyo ururrada kale ama kooxaha kale ee sharciyadda dawladnimada hoos yimaada. Macnaha ugu muhiimsan oo dawladi xambaarsan tahay waxa weeye, xukumid iyo ka warhayn, maamulid, ha ahaato hay'ad dawli ah iyo mid rayid ahba, waana in ay ururisaa amase ilaalisaa hantida qaranku leeyahay, mid gaar ah iyo mid guudba.

Qaabkaan dawladeed ayaa saldhigiisu yahay mid ka fog astaamo diimeed ama in talada xagga Alle loo celinayo, waxaana dhab ah in uu yahay qaab dadku go'aan ka gaarayaan mustaqbalkooda siyaasadeed ama bulsheed. Qaabkan dawliga ah ayaa ah mid aad uga kobcay ama uga hanaqaaday dalalka reer galbeedka, laakiin dhulalkii ay iyagu gumeysteen, nidaamyadoodiina kaga tageen, aysan weli gaarin qaab dawladeed u dhigma kan ay iyagu haystaan, calmaaniyaddana salka ku haya, waxaana ka jira jahawareer siyaasadeed, mid bulsho, mid dhaqaale iyo mid amniba.

Nidaamyada dalalkaas ka jiraana ma aha kuwo lagu tirin karo in ay yihiin nidaam calmaani ah, dadkuna xor u yihiin masiirkooda, maaddaama aysan jirin nidaam ku dhisan kan diiniga ah, oo waxa muuqata in labada nidaamba loo diiddan yahay.

Rashiid-Al-Qaanuuji, ahna madaxa Xisbiga Ikhwaaniga ah ee Nahda ee dalka Tuuniisiya, ayaa qoraal uu ka sameeyey ama ka qoray nidaamkii xiddidada loo siibay ee dalka Tuunisiya, madaxna uu ka ahaa Sayn Al-Caabidiin bin Cali ku eedeeyey in uusan kala saarin nidaamka dawliga ee calmaaniyadda ku dhisan iyo diinta Islaamka, beenna uu ka sheego calmaaniyadda. Al-Qaanuuji, waxa uu ku eedaynayaa Sayn Al-Caabidiin bin Cali ninkii isaga madaxweynenimada ugaga horeeyey ee Xabiib Burqiiba, in ay ahaayeen niman sheegta in ay dawlada calmaani ah madax ka yihiin, haddana ma ahayn kuwo faraha kala baxa hawlaha Islaamka.

Waxa ay mararka qaarkood ahaayeen kuwo iska dhiga in ay yihiin Culimmadii Islaamka, dawrkii culimmadana qaata, iyaga fataawooyin khaldan, diinna aan shaqo ku lahayn, cilmigeediina ka muuqan ummadda idaacadaha iyo meelaha ay dadka kala hadlaan isla soo taagi jiray. Al-Qaanuuji wuxuu eedeyn u soo jeedinaya madaxda dalka Faransiiska, horeyna u gumeystay Tuuniisiya, nidaamka calmaaniga ahna kaga tagey, raggan uu tilmaamayna nidaamkii dalka gacanta u galiyey.

Al-Qaanuuji waxa uu ku doodaya in nidaamka aan diinta ku dhisnayn ee dalalka reer galbeedka ka jira; Faransiiskuna kamid yahay, uu kala saaray arrimaha Kaniisadaha iyo tan dawladda, laakiin nidaamkan aan diinta ku dhisnayn ee ay kaga tageen meelo badan oo ay horey u gumeysteen aysan ahayn kuwa kala saaray diinta iyo dawladda. Al-Qaanuuji waa mid dhaliil ka muujinaya, in aan xataa dalalkii la gumeystay loo quurin mid u dhigma nidaamka diin la'aanta ah ee reer Galbeedka ka jira.

## Aristotle (384-322) kahor dhalashadii Nabi Ciise (CS)

Maamiyihii ama Filasoofkii reer Makedooniya ee Aristotle, ayaa waxa uu qoray buug la yiraahdo *Hordhaca Dawladnimada (Introduction of the Government).* Aristotle[8], dawladnimada waxa uu ku cabbirayaa in ay tahay heshiis dhex mara bulshada, mana aha ayuu leeyahay dawladdu mid waardiye ka haysa bulshada sida nin waardiye ka haya idihiisa, laakiin sharciga waa loo siman yahay kan dawladda madaxda ka ahi iyo kan madaxda loo yahayba.

*"He holds that absolute government is not properly political that government is not like the rule of a 'shepherd over his sheep' but the rule of equals over equals".*

Aristotle, waxa uu qabay in xubin laga ahaado dawladda ay ku xiran tahay in marwalba dawladdu raadiso wanaagga xubneheeda, waxa uuna ku cadeeyey buuggiisa la yiraahda Heshiishyada Dawladda(*Treaties of the Government*).Waxa uu leeyahay, Aristotle:- waxa jira xad u kala yaalla dawladda iyo xubneheeda, xadkaasi waa mid ku dhisan midka ugu wanaagsan uguna macno weyn oo loola dhaqmo xubnaha dawladda ku jira oo uu ula jeedo bulshada ee kama wado xubnaha dawladda maamulkeeda ku jira.

---

[8]Aristotle waa Maamiye ama Filosoof kamid ah kuwii ka soo baxay dadka Giriigga, Aristotle waxaa lagu naaneysaa 'Boqorkii Xikmadda ama Filosoofiyiinta', waayo waxa uu ahaa mid garta khaladaadkiisa intii aan loo sheegin, taasna waxa ku ammaana dadka aad u aaminsan afkaarihiisii filosoofiyeed ama aragtidiisii.

## Niccolò Machiavelli (1469-1527)

Waxa isna sidaa si le'eg uga hadlay waxa dawlad la yiraahdo, Filasoofkii Siyaasadda ee Talyaaniga ahaa, lana oran jiray Niccolò Machiavelli. Machiavelli, buuggiisa la yiraahdo Dalabkii Florentine *'Florentine inquiries'*, waxa uu ku xusay in jadwalka dawladdu uu ahaado mid marwabla u ah wanaag waddaniyiinta, mana loo baahna in dalku uu muddo dheer gacanta ugu jiro hal qof, taas oo meesha ka saari karta in dalku ahaadu mid ku waara nabad iyo jiritaan. Intaa waxa aan ku soo koobayaa aragtida dawladda aan diin ku dhisnayn, laakiin qawaaniin dad samee ah salka ku haysa.

Waxa aan hadda jeclahay in aan soo gudbiyo aragtiyada ku salaysan dawladaha diinta ku salaysan, waxaana tusaale noogu filan kuwa Shareecadda Islaamka ku dhisan, iyadaana nooga filan dawlad Diini ah. Maaddaama aan taariikhdu aad u xusin dawlad Diini ah oo aan ahayn kuwii ku dhisnaa Shareecada Islaamka ee kamidahaa dawladihii mar soo maray caalamkaan aan ku noolnahay ummad badana gaarsiiyey ku dhaqanka Shareecada Islaamka iyo diintaba.

## ARAGTIDA DAWLADDA ISLAAMIGA AH (THEORY OF ISLAMIC GOVERNMENT)

Abuuridda caddaalad ay ka siman yihiin dhammaan bulshadu kuwooda Muslimka ah iyo kuwa aan ahaynba, waa astaamaha ama calaamadaha dawlad Islaami ah. Taasina waa sababtii uu Alle(swt) u soo diray Rasuulkeenii Suubbannaa Muxamed(csw), muddo afar iyo toban qarni iyo bar ku dhawaad ah.

*"Suuratul Xadiid, Aayaddeeda 25aad, Alle waxa uu ku sheegayaa "Waxanu dhab ahaan la dirnay Rasuulladanaddii xujooyin cadcad, waxanuna u soo dajinay kutub iyo garsoor".*

Islaamku ma ogola musuq-maasuq, laaluush, awoodda oo si khaldan loo isticmaalo, abuurid khalkhal bulshada dhexdeeda colaad looga dhex abuuro, iyada oo qof ama koox danteedu ku jirto, jirdil, boob, iyo cabburin intaasi oo dhammi waa camal shaydaan dawladda Islaamiga ahina way la dagaalammaysaa. Waana waajibaadka dawladda in ay caddaaladda si siman ugu fuliso ummadda ay xukunto oo dhan iyada oo sharciga Alle waafaqsan. Nidaamka dawladda Islaamiga ah aasaaska u ahi, waa Kitaabka Alle, Sunnada Rasuulka iyo waxa ay ku midoobeen Culimmadii Islaamka badankoodu oo waafaqsan Kitaabka iyo Sunnadda.

Rasuulku(csw), isaga oo Muslimiinta iyo guud ahaan dadka u caddeynaya caddaaladda iyo nidaamka Islaamka, ayuu waxa uu yiri; "*Allaha nafteydu gacantiisa ku* jirto ayaan ku dhaartaye, *haddii Faadumo Bintu Rasuul ay wax xaddo gacanta ayaan goyn lahaa*" oo

halkaa waxa aad ka garanaysaa in aan Islaamku cidna gaar u xukumayn, xukunka Islaamkana loo siman yahay

- *In ay tahay wax qiraal ah in Alle xukunka iyo abuurkaba uu isagu leeyahay, maxay tahay waxyaalaha ay fulinayso dawladda Islaamiga ah?*

Gole Shuuro oo ku fadhiya qawaaniinta Islaamka ayaa iyana ah rukumada ay dawladda Islaamiga ahi ku fadhido. Dawladda Islaamiga ahi ma ahan mid ku dhisnaan karta ama ay macquul tahay in kooxi maroorsato xukunka, waxa kaloo iyana aan meelna ka soo gelin xukunka Islaamiga ah boqortooyooyin is dhaxla, ummadda waxa marwalba Khaliif u noqonaya, ninka loo filayo in uu xagga Alle ugu dhowyahay, oo laga dareemo in ay aad ugu dheer tahay cabsida iyo cibaadada Alle.

Waxa aan ka cudurdaaranayaa in aan soo qaatay aragtiyada dawladda ku dhisan habka Islaamiga, waxaana aad u yar in ay jiraan dawlado kale oo ku dhisnaa nooc diiniya, caalamkana soo mara, marka laga reebo Kaniisadaha Yurub oo mar awoodda haystay, kaddibna la kala saarey awooddii Kaniisadda iyo tii Boqorka, '*Regard Kaiser as Kaiser's and regard God as God's,*[9] wax

[9] Regard Kaiser as Kaiser's and regard God as God's, waa fikrad calmaanimo ah, diimaha iyo dawladnimadana kala saareysa, waana fikraddii ay la soo baxeen nimankii isugu yeerey in ay diimaha iyo Kaniisadaha ay ummadda ka xoreynayaan bartimihii qarnigii 16aad, Maan-furka(Enlightment), waxaana madax u ahaa ninkii la oran jiray Marthin Luther, una dhashay dalka Jarmalka. Aragtidaas mid aan ka fogeyn ayaa maanta waxa laga helayaa dad badan oo Muslimiin sheeganaya, fikaradaas mulxidnimada ahna bannaanka la soo taagan, iyaga oo weliba ku faanaya in ay calmaaniyiin iyo dimuqraadiyiin yihiin.

caddeyn ahna looma hayo in Diinta Masiixigu, sida tan Islaamka ay wada maamushay dhul badan, kana sameysay nidaam dawli ah, marka laga reebo in qaybo kamid dalalka Yurub ay kaniisaddu awoodda lahayd, laakiin looma tirin karo in nidaam dawladeed, diinta Masiixigana salka ku haya ay ka hanaqaadeen ama u arrimiyeen.

## DAWLIDIHII SOOMAALIYA SOO MARAY IYO FAHAMKA DAWLADNIMO

Si hufnaani ku jirto, caddaaladdana aan ka fogeyn, ayaa waxa looga doodi karaa argtiyada aynu soo aragnay ee noo kala dhigay nooca dawladaha caalamka soo maray. Kuwa aan diiniga ahayn ama kuwa Islaamka salka ku haya iyo kuwii Soomaaliya soo maray oo ahaa kuwo la qaab ah ama shaabbahaya nooca hore, cilmaaniga, laakiin ay muuqato in ay wax badan kaga duwan yihiin, marka la barbardhigo aragtiyada ama nadariyadda dawladnimo.

Dad badan oo Soomaali ah, oo aan anigu kamidahay ayaa qaba in aan wax dawlad la yiraahdo, oo xambaarsan guud ahaan micnihii dawladnimada ay Soomaalidu heshay marka laga reebo in faraha na loo gashay xafiisyo, calan iyo nidaam aynaan aqoon oo gumaystihii inooga tagey.

Sida ku cad buugga aan kor ku soo xusay, ayna qoreen nimanka reer Austeriya ee la kala yiraahdo Leo Reinich iyo Alfred Holder, waxa ay ku muujinaayaan qaab dhaqan dawladeedkii ay Soomaalidu lahaan jirtay gumeysiga kahor. Qaabkaas oo ahaa mid ku dhisan ama salka ku hayey dhaqanka Islaamka iyo fulintiisa. Qorayaashu waxa ay tilmaamayaan sida Sharcigu u goyn jiray ama uga gaari jiray go'aan haddii arrini dhex marto dadka hoos tageya maamulka meesha ka jira, oo udub dhexaad Islaamka u ahaa. Waxa ay tilmaamayaan in uu jiray Gole culimmo, wixii wax lagu kala goynaysana soo diyaariya iyaga oo marwalba tixraac iyo adeegsi ka dhiganaya shareecada Islaamka. Wixii ay soo gooyaan ayaana odayada

guurtida iyo golaha loo soo gudbin jiray, dabadeedna waxa ay amri jireen in la fuliyo. Waxa isna jiray gole dhallinyaro oo u heellan in ay fuliyaan arrinkaa culimmadu soo gaadhay, odayaduna amreen in la fuliyo. Labadan Qoraa waxa ay buggooda ku xusuyaan arrin laba nin dhex martay iyo qaabkii lagu kala saaray, oo ahaa qaab Xis iyo Sharci ah, Soomaalidana u yaallay gumeystaha kahor, diinta Islaamkuna asal u ahayd.

Ma aha mid muran ka taagan yahay in ummaddu lahayn nidaam qaab dawladeed ah, oo ay ku dhaqmi jirtay, iskuna xukumi jirtay, laakiin wixii gumeysiga ka dambeeyey jahwareer la geliyey, ummaddiina madax loo geliyey wax aysan ka bixi karin oo ah nidaamyo la soo dhoofiyey gumeystihiina kaga tagey.

Waxa isna arrintaas aad ugu xusay buuggiisa *"Hirarkii Taariikhda iyo Halgankii Soomaalida"* Allaha u naxariistee Qoraa Khaalid Cali-Guul Warsame Cadde. Khaalid waxa uu tilmaamayaa in nidaamka Soomaalidu, oo lagu tilmaami karo nidaam dawli ah, kana horreeyey nidaamyadii Islaamiga ahaa iyo kuwii gumeystihii reer Galbeedku inoo keenay. Nidaamkaas ayuu Khaalid sheegayaa in uu soo maray saddex marxaladood. Marxaladda Koowaad: oo ahayd mid wax lagu xukumayey xeerar ay Soomaalidu samaysatay, oo aan ahayn mid la barxay ama tarraxaadi ku jirto, qaabkeeduna ahaa mid curad ah, horeyna wax loogu qaybsan jiray iyo mid ugub ah, oo ahaa mid cusub, horeyna aan wax loogu qaybsan.

Marxalladda Labaad: waa nidaam ka dhexeeyay xeerarkii dhaqanka iyo kii Diinta Islaamka, lana oran jiray Xis iyo Sharci, dadkana lagu kala saari jiray, laguna kala dambayn jiray, mana la

oggollaan jirin wax Sharciga Islaamka kahor imaanaya. Nidaamka waxa ummadda horseede u ahaa ama xukumi jiray nin aqoon sare u leh diinta Islaamka. Marxaladda Saddexaad: waa nidaamkii ugu dambeeyey oo Soomaalida ka dumay, kaas oo ahaa mid ay noo keeneen gumeystihii dalka ka tagey, lana yiraahdo(Penal Code), laguna barxay xeerkii iyo nidaamkii ay Soomaalidu horey u lahayd, kaas oo madaxa loo galiyey nidaamkii ay dadku haysteen ama yaqaaneen.

Nidaamkan dambe, ayaan ahayn mid Soomaalidu u lahayd aqoon waafiya oo gaarsiin karta in ay isku maamulaan, waana kii burburka Soomaalida u horseeday dal iyo dadba, kala fogaanshiinyo iyo kala erdhowna ummaddii ku reebay, ilaa uu ummaddii ku habsado dareen ah kala aamin bax iyo wax isu quurid la'aan.

Ma ahi mid aad ugu dheeraanaya nidaamkii Soomaalidu lahayd gumeystaha kahor, laakiin waxa aan qormadan isu dul taagay in aan xuso nidaamka innaga burburay in uusan ahayn kii aynu naqaannay ama ku dhaqmi jirnay gumeystaha kahor, laakiin uu yahay mid la-inoo soo ergiyey/dhoofiyey.

Waxa aad loo hadal hayaa in dawladihii Soomaalida ee soddonka(30)sano jiray ay maalmo ku burburaan, sababna ay u tahay in aysan awalba dhidibbo ama tiirar dawladnimo ku taagneyn. Laakiin ay ahayd mid ku bilaabatay, musuq-maasuq, ku xad gudub sharafta qofka iyo iyada oo aysan ahayn wax laga xishooda in wixii ummadda u dhexeeyey ee hanti iyo maamulba ahaa in koox is qaraabaysataa ku tagri fasho*(Nepotism)*. Midaas, oo ugu dambayntii albaabada isugu dhifatay dawlad ku sheeggii

Soomaalida intii u dhexaysay 1960-1969kii. Arrintaana Xaaji Aaden Af-qallooc oo ka gabyayana waxa uu yiri;-

*"Kuwii doorashada noo gala gabay halkoodiiye,*
*Khalqiga oo horey u guurayeey dib u gucleeyeene,*
*Googgoye Soomaali oo gobolba meel aadye,*
*Guryaha iyo ceelkaa dartood laysku gawracaye,*
*Waa taa gamaaduhu bateen goobta lays dhigaye,*
*Gidldhigaanka waxa loo sitaa goosankii haraye,*
*Caawana kursi aad gaadhid baa guure loo yahaye,*
*Gurdan baan maqlaayaa sidii guuto weraraehe,*
*Gawaadhidu tolla'ay bey siddaa guuxu baxayaaye,*
*Kuwii guurey baa daaqad kale nooga soo galaye,*
*Gumeystaha jaddiidaa aroos loo galbinayaaye,*
*Waraabihii Gol qabatada yiqiin geelu waw halise,*
*Goodaadsey Calankii dhulkuu gaadho baw hadhaye,*
*Gobonimmo xaqii ay lahayd geed fog lagu laalye,*
*Goblanse maaha Maandheeq haddey gabadin moodeene"*

Markii horeba, dawladda Soomaalidu waxa ay ku bilaabatay hab-beeleed(Clan system), taasi waxa ay sahashay in hay'adihii aasaaska u ahaa dhismaha dawladnimo ay meesha ka saaraan aragti ku dhisan qaraabanimo, ilma adeernimo, wiilasha ilma adeerta, walaalaha iyo waliba seeddinimo iyo soddognimo. Wixii intaa ka dambeeyayna waxa dhacday in ay meesha ka baxdo wixii ku salaysnaa dimuqraadiyad beenaadkii iyo nidaamkii aan aasaas dawladeed lahayn laga bilaabo 1960-1969kii.

15kii oktoober ayaa Madaxweynihii dalka, Cabdirishiid Cali Sharmaarke, Allaha u naxariistee, maalin cad lagu toogtey magaalada Laascaanood, isaga oo halkaa booqasho hawleed ku maraya.Waxa dilkaas geystey nin kamid ah ciidammadii amniga ee dalka, kuna labbisan dharkii lagu yaqaaney Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. Taas oo, runtii, calaamad u aheyd in aan nidaam dawlad lagu tilmaami karo dalka ka jirin, marka laga reebo magac u yaal.

Xaaji Aadan Af-qallooc, oo mar kale tilmaamaya nooca dawladdii Soomaaliyeed ayaa iyadana gabey dhaxal gal ah ka tiriyey.

*"Isim baa jiraye dawladnimo kuma aas-aasneyne,*
*Inyar baa ku noolaan jirtey way indho la'ayde,*
*Intihaasi iyo dabaqadda aayo ku lahaaye,*
*Amreekiyo Talyaanaa guddoon dib ugu oodnaaye,*
*Marna haddaan awood Baarlamaan cidina eegeyne,*
*Ay doorashadu iibtihiyo yaa ilma adeer ah,*
*Si uu Elegshan kale u dhacaa aaminkeed dhimaye,*
*In uu geeshku na ilaaliyiyo aarmigaa wacane".*

Xaaji Aadan sida gabeygiisa ku jirta waxa uu jecleystey in dalka ciidammada qalabka sidaa ay taladiisa la wareegaan, si loo soo afjaro musuq-maasuqa siyaasadeed ee asxaabtii dalka qaybo kamid ah lagu tuhmayey in ay codkii dadka boobeen, dulmina sameeyeen. Asxaabtaas waxa kamid ahaa kii dhallinyarada, lana

oran jiray SYL[10], talada dalkana gacanta ku hayey, aadna loogu tuhunsanaa in uu boob siyaasadeed ku sameeyey codadkii dadka. Arrintaasna Abwaan Cabdullaahi Suldaan Timacadde, oo isaguna tilmaamaya waxa uu yiri;

*"SYL ilaah kama baqdiyo ololkii naareede"*

Abwaan Qaasim, oo isna xaajada la yaabban, ayaa isna maanso yar ka tiriyey xaaladda xilligaa dalku ku sugnaa, wuxuuna yiri:-

*Cishadii Gashaba waagu waa caynad gooniyahe*
*Inay curadyo khayrlihii Kacaan ciidan la arkaaye,*

21kii Oktoober 1969kii, waxa dalkii af-gembi aan dhiig ku daadan taladii dalka kula wareegay, taliyihii xoogga dalka, Generaal Maxamed Siyaad Barre. Inkasta oo dadka aqoonta u leh af-gembiyada ciidan, ay sheegaan in af-gembiyada noocaan ahi ay marka dambe cagaha dhiig la galaan, sida Soomaaliyaba ka dhacday. Kacaankii Soomaaliyana waxa uu soo gabagaboobey isaga oo cagaha dhiig ku leh, ummaddiina bar laayey barkii kalena qaxiyey. Sidaa darteed oraahda ah kacaankii Soomaaliyeed waxa uu ahaa mid aan dhiig ku daadan waa kelmada xaqiiqda kafog, dhiig daadin buuna dalkii ku sagootiyey. Waxa halkaa ku soo gabagaboobay dawladdii ku magacowneyd rayidka oo muddo Sagaal(9)sano ah talada dalka

[10] SYL = Somali Youth League, waa dhaqdhaqaaqii dhallinyarada Soomaaliyeed, kaas oo ka koobnaa saddex iyo toban(13)dhallinyaro, kuna midoobay in ay soomaaliya xornimo gaarsiiyaan, gumeysigana la dagaallamaan, ururkan waxa la aas-aasay 15kii May sannadkii 1943kii, waxaana lagu aas-aasay Muqdisho.

haysay. Barre iyo afar iyo labaatan(24)sarkaal oo la magac baxay Golihii Sare ee Kacaanka, ayaana taladii dalku gacanta u gashay. Golihii sare kacaanka ee talada la wareegayna waxa ay kala ahaayeen:

- Sarreeye Gaas: Maxamed Siyaad Barre
- Sarreeye Gaas: Jaamac Cali Qoorsheel
- Sarreeye Gaas: Maxamed Caynaanshe Guuleed
- Sarreeye Guuto: Xuseen Kulmiye Afrax
- Gaashaanle Dhexe: Axmed Maxamuud Cadde
- Gaashaanle Dhexe: Maxamed Cali Samantar
- Gaashaanle Dhexe: Salaad Gabayre Kediye
- Gaashaanle Dhexe:Cabdalla Maxamed Faadil
- Gaashaanle Dhexe: Cali Mataan Xaashi
- Gaashaanle Dhexe: Maxamed Sheekh Cismaan
- Gaashaanle Dhexe: Maxamuud Mire Muuse
- Gaashaanle: Ismaaciil Cali Abokor
- Gaashaanle: Maxamed Cali Shire
- Gaashaanle: Axmed Saleebaan Cabdalla
- Gaashaanle: Maxamuud Geelle Yuusuf
- Gaashaanle: Faarax Wacays Dhuule
- Gaashaanle: Muuse Rabiile Good
- Gaashaanle: Axmed Maxamuud Faarax
- Dhamme: Axmed Xassan Muuse
- Dhamme: Maxamed Cumar Jees
- Dhamme: Cismaan Maxamed Jeelle
- Dhamme: Maxamed Yuusuf Cilmi
- Dhamme: Cabdi Warsame Isaaq
- Dhamme: Cabdirisaaq Maxamuud Abokor

- Dhamme Cabdirisaaq Xaaji Maxamed Masalle

Saraakiishaan ciidammada ah waxa maamulkii ay dhiseen ku weheliyey afar iyo taban(14)xoghaye, oo ay wasaaradihii dalka u magacaabeen, saddex iyo toban(13)kamid ah ayaana rayid ahaa, kuwaas oo kalana ahaa:-

- Xassan Cali Mire
- Cismaan Nuur Cali Qonof
- Maxamed Aaden Sheekh Maxamuud
- Maxamed Canshuur Xassan
- Cabdulle Aw-faarax
- Maxamed Buraale Ismaaciil
- Maxamuud Jaamac Axmed
- Axmed Maxamed Maxamuud
- Maxamed Cabdi Carraale
- Cumar Carte Qaalib
- Cabdulqaadir Aaden Cabdulle
- Maxamuud Maxamed Cismaan
- Maxamuud Geelle Cilmi

Waxaa intaa weheliyey in Sarreeye Gaas Jaamac Cali Qoorsheel, kana mid ahaa golaha sare ee kacaanka oo isna xoghaye wasaaradeed loo magacaabay. Abwaan Qaasim gabay kale ayuu ka tiriyey markii kacaanku dhashay, isaga oo dhaliilsan farsamooyinka kacaanku durba bilaabay, oo u muuqday kuwo uu saluugsan yahay, gabaygaasna mirihiisii waxa kamid ahaa:-

*Guryasamo ilaa lagu furay gibisha saarnaane*
*Gaargaarimaysoo askari giigsan baa wadiye.*

Saraakiishaani waxa ay maalmo kaddib faafiyeen in ay dalka ku dhaqayaan nidaamka hantiwadaagga cilmiga ku dhisan (Scientific Socialism), kaas oo laga soo amaahday Midowgii Sofiyeeti, oo isagu markaa hormuud u ahaa aragtida siyaasadeed ee ku dhisneyd hantiwadaagga, kuna salaysnayd, qaabkii danaysiga*(Dialectal Materialism)* ee Maarkiisamka, looguna yeeri jiray Nidaamkii Dahabiga ahaa*'Golden Rule'*. Nidaamkaas oo qeexaya awoodda qofka, isaga oo halhays ka dhigan jiray: 'Qof walba ha helo in u dhiganta awoodda wax soo saarkiisa' *'From each according to his ability; to each according to his needs"*

*Haddaba waxa markiiba la is weydiin karaa aqoon fiican oo heer maamul iyo mid siyaasad buuxda gaarsiisan ma u lahaayeen nidaamkan hantiwadaagga ah askartii la wareegtay taladii dalka?*

Qoraa Maxamed Sheekh Xassan(Gacmo-dheere) ayaa iiga sheekeeyey sheeko kaftan magaaleed ama kaftan dhable ah, waxa uuna yiri: Beryihii kacaanku dhashay ayaa laba dhallinyaro ah oo reer Cadale ahi yimaadeen xaafadda Hawlwadaag goleheedii hanuuninta*(Orientation)*. Labada dhallinyaro waxa la kala oran jiray Fiidow iyo Tooxow. Labadii dhallinyaro waxa ay arkeen afar sawir oo saddex kamid ahi garar waaweyn tahay iyo Maxamed Siyaad Barre oo afar ku ah. Saddexda sawir waxa ay kala ahaayeen sawirraddii nimankii Hantiwadaagga aas-aasay oo kala ahaa Karl Marx, Friedrich Angels iyo Vldamir Lenin, oo labada hore Jarmal ahaayeen kan dambanna uu Ruush ahaa.

Fiidow ayaa yiri isaga oo ku hadlaya lahjadda deexda lahaga hadlo, aryaa Tooxow nimankan garka weyni xay ahaayeen? Tooxow ayaa ku jawaabay: aryaa waa awliyadii Carabta!!! Fiidow ayaa haddana su'aal kale weydiiyey oo yiri:- Aryaa xaa oday Xaad ku daray? oo uu ula jeeday Maxamed Siyaad Barre.

Tooxow ayaa ku jawaabay: aryaa oday Xaad inta raacdoo rumayduu ugu horreeyaa!!!

Runahaantii, labada dhallinyaro ma ahayn kuwo aan garanayn nimankan, laakiin wax ay cabbirayeen, in kacaanku uusan qaadan ama dalka ku dhaqayn nidaam uu aqoon u lahaa ama Soomaalidu garanaysay, laakiin ay nidaam ka dhigteen wax aan Soomaalidu garanayn ama aysan aqoon waafiya, oo nidaam isku xukun gaari kara leh.

Tirada baarlamaankii dawladdii talada dalka lagala wareegay waxa uu ahaa boqol iyo saddex iyo labaatan(123)mudane, laakiin tan militariga ee talada dalkana la wareegtay, hantiwadaaggana ku dhisan, waxa ay lahayd gole sare kacaan, kana kooban shan iyo labaatan(25)askari/sarkaal iyo saddex iyo toban(13)xoghaye, oo rayid ah. Halkaa waxa ka cad in noocma ay noqotaba aysan hannaan dawladeed oo nidaam dawli ah ku salaysan uusan meesha ka muuqan, laakiin hadba qolo kale aynu wax ka soo ergisanno/amaahanno.

Haddii dawladihii hore ee rayidka ahaa lagu eedeeyey, musuqmaasuq iyo eex, tanina wax weyn kama beddelin oo waddaddii hore ayey qaaddaay, welina micnihii dawladnimo ma gaarin oo dawladdu sideedaba waxa ay ilaalisaa qiimaha qofka

waddaniga ah iyo xuquuqda dadka oo dhan, iyada oo aan loo eegayn diintooda iyo kala duwanaashahoodaba. Miraha soo baxaana waa abuurkii meesha lagu riday, ee macquul ma ahan abuur aadan meel ku ridan in uu kuu soo baxo, sidaa darteed wixii Soomaaliya ka dhacay in ay yihiin abuurkii dawladdihii hore dadka u beereen wax inkiraad iyo muran ahi kama taagna.

Haddaba fahamka Soomaalida ee dawladnimada haddii uu sidaa yahay una muuqdo mid gees marsan qaabkii dawladaha lagu yaqaanay: mid Calmaani ah ama mid Shareecadda Islaamka ku dhisan, *ilaa intee ayaa qofka Soomaaliga ahi dawlad aamini karaa ama garan karaa waxa dawladi tahay?*

Qofka Soomaaliga ahi dawladda wajiga uu u yaqaan waa kaa aynu soo aragnay ee ku dhisan eexda iyo xaqdhawr la'aanta, waxa uuna marwalba qabaa dareen ah in dawladdu ay tahay dhib aan dheefi ku jirin, haddii aadan markaa cid kuu xoolo goysa kuugu jirin maaydaanka(booska)dawladda. Dareenkaasi waxa uu ka soo horjeeda waxa dawladdu tahay, hadal uu horey u sheegay nin lagu tilmaamo in uu ahaa nin maskax badan, soona maray nidaamka caalamka, dad bandanna ay aaminsan yihiin in uu ahaa bud-dhigihii kala dambeynta iyo dawladnimada dalka Maraykanka, laguna tiriyo in uu kamid ahaa waxa Maraykanku ugu yeeraan Aabbayaashii Aas-aaska dalka Maraykanka*(The Founding Fathers of the United States).*

Ninkaa waxa la oran jiray, Abraham Lincoln, waxa uuna noolaa intii u dhexaysey(1809-1865),waxa uuna ahaa madaxweynihii ugu horreeyey ee loo doorto Jamhuuriyadda dalka Maraykanka(American Republic). Inkasta oo uu ahaa

madaxweynihii 16aad, waxa uu xilligiisii la kulmay dagaalkii u dhexeeyey dadka Maraykanka qarnigii 19aad, taariikhdu waxa ay xustaa in dagaalkaa laftigiisa lagu shirqoolay Lincoln. Dadka madow ee ganacsiga lagu geeyey qaaradda Ameerikana*(Slave trade)* qaybtooda Maraykanka ku noolna isaga ayaa xoreeyey oo yiri dalka ayaad u dhalateen ee dega, mana jirto wixii hadda ka dambeeya in aad kamid ahaataan hantida dadka cad.

Lincoln mar wax laga weydiiyey waxa la yiraahdo dawlad, Lincoln waxa uu ku jawaabay:-'*Government of the people, by the people, for the people,'* dawladda dadka, dadkayna ka timi, dadkaana leh.

*Innaga oo tixraacayna hadalkaa Lincoln, Soomaalidu dawlad ay leedahay ma aragtay, mase ahaayeen dawladihii Soomaaliya soo maray, kuwo dadka ka yimi?*

Iyada oo su'aashaasi ay taagan tahay, ayaan haddana Soomaalidu wax aaminaad ah ku qabin dawladnimada, laakiin waxa aad dareemaysaa in Soomaalidu marar badan ay ku celceliyaan dawlad ayaan rabnaa, iyaga oo aan qeexi Karin dawladda ay rabaan nooca ay tahay iyo sida ay u egtahay. Dawladdii kacaanku markii ay duntay, wixii hanti ahayd ee ummadda u dhexaysey waxa la mariyey gacanta, waxaana boob ku qaaday dadweynihii Soomaaliyeed ee badanaa hantidaas lahaa, sababta oo ah hantida dawladdu waa hantida shacabka waxa ayna ka timi canshuuraadkii laga qaadi jiray dadka Soomaaliyeed tabar kasta ha la haadeene. Dadku ma ahayn kuwo dareensan in hantidan la boobayo ama la jajabinayo ay tahay toodii. Hantida lagu ciyaarey waxa kamid ah adeegyadii

bulshada oo ay kamidahaayeen, hay'adihii dawladda, goobihii waxbarashada sida jaamacadihii, iskuulladii, isbitaalladii iwm.

Xaaji Aadan Af-qallooc ayaa muddo laga joogo kontoneeyo sano kahor gabay arrintaa ka tiriyey, isaga oo cabbiraya qaabka ay dawladdda Soomaaliyeed ku dambeyn doonto, Xaajiguna waxa uu arrintaa ka yiri:

*"Akhlaaqdii xumaatoo xishood laga awaareeye,*
*Iimaanku laabtuu jiraye aragahow guurye,*
*Kun jeer ixsaan fari ma jiro axad maqlaayaaye,*
*Waxa ay dhegehu aad ugu furmaan ereyga ceebeede,*
*Ilaah lagama baqo shillinka oo la arko mooyaane,*
*Axad gaabsha lama caawiniyo kii itaal darane,*
*Nin adduun hayaa kii kaluu alamsanaayaaye,*
*Waa lays inkirayaa sidii maalintii urure,*
*Islaam sheegte diintiina way ago maraayaane,*
*Wax badanoo astaan muumin laa uur-ka-kaafirahe*
*Israa'iil tiihii helaynu ashbahaynaaye".*

Dadku ma lahayn wacyi dheer oo ay ku gartaan hantida dawladdu in ay tahay tii dadweynaha, waxa ayna aaminsanaayeen in hantidaan uu leeyahay ninkii dawladda ku jiray mansab kasta haka hayee. Mana dhicin in maamulladdii dalka soo maray ay waqti dheer iyo howl badan ku baxshaan in dadka la baro waxa ay danta guud tahay. Dadku uma baahneyn wacyigelin xagga hantida gaarka ah, oo qof walbaa wuu garanayaa waxa uu gaarka u leeyahay, dawladduna waxa ay ilaalisaa danta guud iyo tan gaarka ahba.

Dhabahaantii, burburkii dawladdii Soomaaliyeed kaddib, waxa soo if baxay in Soomaalidu ku dadaalaan in ay dib u dhisaan fadhiyaddii adeeggii bulshada, iyaga oo ku salaynaya hab deegaaneed ama beeleed.

Waxa dhacday in *Degmo* walba ama *Tuulo* walba laga hirgaliyo adeegyo bulsho oo dhamaystiran, dadkuna ay dareensan yihiin in ay iyagu leeyihiin kuwan maaddaama ay og yihiin in ay hadda iyagu dhisteen, laakiin kuwii hore oo ay si dadban u dhiseen ma aysan ogeyn in ay hantidooda ahayd.

Guud ahaan Afrika ayaad mooddaa in ay dawladnimaddii ay haystaan ay ahayd mid meelo kale laga soo dhoofiyey, dal walba oo qaaradda ka tirsana, fahamka dawladda uu haystaa waxa ay ku xiran tahay nidaamkii gumaystihii ka tagey dalkaa. Waxa aad dareemeysaa illaa maantadan la joogo in Afrika ay u kala qoqoban tahay nidaamyaddii imbiryaaliistaha ahaa ee horey u kala qayb-qaybiyey Afrika*(Scramble for Afrika iyo Sykes-Picotkii dadyowgii Carabta lagu kala qaybiyey)*[11], waxaana mowduucaan aad

[11]Scramble for Africa, wuxuu ahaa mashruucii Afrikada madow ama waxa ay reer galbeedku ugu yeeraan 'Sub-sahara Africa' lagu kala qaybiyey iyada oo lagu jaangoynayo qaybsigii ay reer Galbeedku Afrika iyo dunidii kaleba qaybsadeen, xadad aan horey u jirina iyagu u sameeyeen.
**Sykes-Picot,** oo isna ahaa heshiis dhex maray labadii wasiir dabadeed ee Ingiriiska iyo Faransiiska*(Sir Mark Sykes of Britain and François Georges of France)*, kaas oo kala googoynayey dhulkii ay ka arrimin jirtay Khilaafadii Islaamka ee Cismaaniyiinta, iyada oo dad badan oo Carab ah, caddaawad looga dhigay Turkiga, oo markaa Khaliifada Islaamka xarunteedu ahayd, loogana talin jiray.

ugu xusay buugga la yiraahdo *"Timihii Gumeystuhu Kaga Tagey Adduunyada"* oo aan soo saarey bartamihii sannadkii 2014kii.

Soomaalida oo kamid ahayd dadyowgaas la kala qayb-qaybiyey ayaan lahayn nidaam ka horreeyey kii gumeystuhu gacanta u geliyey markii uu dalka ka tagey, mana ahayn mid Soomaalidu garanaysey.

Waxa aan xusuustaa sheeko, runtii, aad mooddo in ay taabanayso xaqiiqda ka jirta Afrika iyo guud ahaan dalalkii la gumaystay, sheekadu maaheyn dhacda asal ah, laakiin waa sheeko la sameeyey oo noocmaa hal- abuur oo kale ah(fiction story). Sheekada waxa lagu soo daabacay wargeyska billaha ee la yiraahda *New Africa,* kana soo baxa dalka Ingiriiska. Sheekada oo ku billaabatey su'aal la is weydiiyey oo la doonayey in jawaab loo helo, ayaa aheyd sidan:

*"Maxaa madaxda Afrika markii maamulka si xoog ah oo cinqilaab ku dhisan loogaga tuuro ay ugu soo cararaan oo u yimaadaan dalalkii gumaystay dalalkooda, dabadeedna ay u noqdaan shaqaale xirfad hoose ku shaqeeya sida darawal taxi(Cab driver) iwm?*

Su'aasha jawaabteedii waxa ay ku bilaabatay sidaan: Afrika, markii gumeysiga caddaanka*(European)*, ahi yimi waxa uu markiiba shaqaalaystay laba nin oo kamid ah dadkii uu gumeysiga ugu yimi dhulkooda, shaqadii uu kala siiyeyna waxa ay ahayd, Ilaal*(Guardian),* dhulka iyo meelaha dadku ku badan yahay tusa, isagana ka waardiyeeya cadowgiisa. Ninka labaadna waxa uu ahaa Cunto kariye*(Cook)* isna gumeystaha cuntada u kariya isaga iyo reekiisaba. Gumeystihii waxa uu labadii nin ee

uu shaqada siiyey dhex dhigay colaad aad u weyn, una muuqata mid aan xal laga gaari karin, waxa uuna ku tala galay, markii uu dalka ka tago in aysan heshiin oo colaaddoodu noqoto mid aan dhammaad lahayn.Cunto kariyuhu, waa nin reerka gumeystaha ku dhex jira maaddaama uu jikadii iyo meeshii reerka laga maamulayey uu isagu u sarreeyo, laakiin ilaalku, kadinka hore ee guriga ninka gumeystaha ah ayuu qori la hor taagan yahay, mana dhacdo in uu guriga soo galo, oo reerka lagu dhex arko, shaqadiisa ayaana sidaas ahayd.

Sida caadiga ah cunto kariyuhu, nin qatooyo iyo gaajo cabsi ka qaba ma ahayn maaddaama uu isagu dherigii gacanta ku hayo, laakiin ilaalka waxa isugu darsamay gaajo iyo dhaxan.Cunto kariyuhu, cuntada ka soo harta reerka amar waxa uu ku qabaa in uusan cidna siin, laakiin uu haanta qashinka lagu shubo ee bannaanka taal ku soo daadsho. Ilaalku, marka uu weydiiyo, cunto kariyaha in uu wax ka siiyo cuntadan la daadinayo, cunto kariyuhu waxa uu ku jawaabaa amar baan qabaa in aanan cidna siin ee iga raalli noqo tani waa shaqadeyda, oo wajibaadkaygaan gudanayaa, sida aad adiguba kaaga u gudanayso.

Ilaalkii colaad iyo dagaal aan xad lahayn ayuu u qaaday cunto kariyihii, isaga oo aaminay in xumaan iyo canaad ka buuxo cunto kariyaha, kaas oo xataa u quuri waayey hambadii gumeystaha. Qorshahani waa kii ninka gumeystaha ahi ku talagalay sidii uu u qorsheeyey ayeyna u dhacday, oo waxa muuqata in aan labadii nin ee isaga u shaqaynayey aysan isu noolayn, sida muuqatana midba mid kale uusan aheyn mid badbaadinaya haddii uu waqtigu u saamaxo.

Maalintii gumeystuhu tagayey, ayuu nin walba oo shaqaalihiisii kamid ah gooni u la dardaarmay.Dardaarankii gumeystuhu waxa uu ahaa mid xaabo ku sii kordhinaya colaaddii uu labada nin dhexdhigay, mid walbana waxa uu dhegta ugu sheegay in uu gurigii, dalkii iyo dawladnimadiiba, isaga kaga tagey. Maalmo markii uu sii maqnaa gumaystuhu, ayaa ninkii ilaalka ahaa, oo isagu markaa qorigii(gun)looga tagey gacanta ku haysta gurigii soo galay dabadeedna dilay ninkii cunto kariyaha ahaa ee uu waqtiga la sugayey.

Sheekadani waxa ay muujinaysaa in badanka waddammaddii gumeystuhu ka tagey, oo markii hore maamulka iyo talada dalka ay qabteen saraakiil rayid ah, nooc doorasho axsaab ahna ay ku bilaabatay, laakiin muddo ku siman tobon sano waxa ka wada dhacay af-gembi ciidammadu horseed ka ahaayeen*(military coup).*

Soomaaliyana waxa ay kamid ahayd dalalka uu af-gembi ciidan ka dhacay ku dhawaad toban sano, taas oo aad moodda cabirka sheekadu in uu saaran yahay wixii ka dhacay dalalkii la gumaystay. Sheekadanina waa mid xoojinaysa in aan wax nidaam iyo is maamul dadku lahaayeen uusan meesha ool, laakiin ummaddu ay la kulantay jahwareer ka dhex taagnaa raggii gumaystuhu ka tagey iyo wixii uu dhaxalka uga tagey. Sheekadan aan kor ku soo xusay waxa lamid ah nidaamkii ka jiray Ameerika xilliggii dadka madoobaa*(Negroes),* ee badankooda laga soo daabbulay Afrika, loona soo kaxaystay qaab adoonsi(Slave) ah. Nidaamkaasi waxa uu ahaa mid dadkii madoobaa ee la addoonsanayey u kala qaybiyey laba qaybood oo kala ah:

Addoonka Guriga*(House Negro)*[12], oo isagu ah adeegaha guriga ninka soo addoonsaday ee caddaanka ah. House Negro waxa uu aaminsan yahay in uu isagu caddaanka ku xigo, nolol fiicanna haysto, dhar qurxoona ku labbisto, meesha qaabka kale ee addoonsiga ee isna la oran jiray Addoonka Bannaanka*(Field Nergo),* kaas oo isagu ku kooban shaqooyinka bannaanka laga qabanayo sida beero falidda, ilaalinta xoolaha, sida lo'da iyo fardaha.

Field Negro, ma ahayn mid la siman House Negro, waana mid isagu ku noolaa nolol ka hoosaysa tan uu haysto House Negro, marka laga hadlayo xagga sharafta iyo qiimeyntaba, arrintaasna waxa aad uga sheekeeyey Malcolm X(Allaha u naxariistee)[13], oo ahaa nin muslimay, kana mid ahaa Maraykanka madow.

---

[12] House Negro, waa siyaasad uu caddaanku ku kala saarayo dadkii madoobaa ee uu addoonsiga u soo kaxaystay, waana mid darajo gaar ah siinayso addoonka guriga ka shaqaynaya, kaddib markii uu oggolaaday amase ku qancay in la addoonsado. Laakiin Field Negro, waa kan maantii oo dhan beerta jooga, cudbiga iyo dalagga kalena guraya, oo aan awoodin in uu foodda soo galiyo guryaha caddaanku leeyihiin, maaddaama laga dareemay madax-taag iyo in uusan ku faraxsaneyn in la addoonsada, laakiin isu arka nin la khasbayo.

[13] Malcolm X ama El-Hajj Malik El-Shabazz, wuxuu ahaa Maraykan madow, xuquuqda daka madowna u dooda, Muslimna noqday kaddib markii isaga oo xabsiga ku jira ay ku soo booqdeen niman muslimiin ahaa oo kamid ahaa ururka loo yaqaan 'Nation of Islam', dabadeedna ku wacdiyey in uu diinta Islaamka qaato, wuuna ka yeelay, ilaa uu gaarey Xajka ayna ku kulmeen Allaha u naxariistee boqor Faysal Ibnu Cabdul-casiis, lana aaminsan yahay in uu ahaa ninkii ugu Islaamka jeclaa reer boqor ee xilka qabta. Malcolm X waxa la dilay 21kii Febraayo sannadkii 1965kii

Ujeedkaygu ma aheyn in aan ku dheeraado siyaasadaha is bedbedelaysaa ee marwalba ka dhacda dalalka, ee waxa aan rabay in aan halkaan ku muujiyo, wixii aan ummaddu lahayn marnaba macno weyn uguma fadhido.Ummaddu in ay ilaashato oo ay wakhti ku bixisana waa wax aan laga filayn, waayo in ay ka maqnaato iyo in ay haysato wax kala duwanaasho ah oo ay u samaynaysaa ma jirto, oo waxa aad mooddaa in ay isugu mid tahay. Soomaalida, in aysan dawladihii soo maray wax dareen iyo raad ah ku samayn waxa u daliil ah sheeko dheer oo aan rabo in aan halkaan ku soo bandhigo. Sheekadaas oo cabbiraysa culayska iyo miisaanka dawladihii Soomaaliyeed inta uu le'ekaa iyo in aan dadka badankiisu ogeyn wax dawladnimo la yiraahdo iyo nidaamkeedaba.

Annaga oo koox ah oo guri ku sheekaysanayna ayaa waxa irridka ka soo galay laba nin, labada nin mid kamidah waan garanayey, laakiin midka kale ma aanan garaneyn. Ninka aan garanayey waxa uu ahaa nin oday ah, oo cullimadda Soomaalida kamid ah, qawaaniinta reer galbeedkana bartay. Ninkaasi waa Sheekh Xuseen Cabdulle Cusmaan(Codweyn), oo dad badan oo Soomaali ahi ay wada garanayaan.arkii la is nabdaadshay oo la is wareystay, ayaa waxa biloowday in la sheekaysto, Sheekh Xuseen oo aan filayo ragga meesha joogay in uu u da'weynaa ayaa billaabay nooc waano iyo wacdi ah, sidii lagu yaqaaneyba qofka daaciga ah.

---

isaga oo damacsanaa in uu dib u habayn ku sameeyo magaca Nation of Islam, damacsanaaana magaca ah Sunni Islam, oo aan qowmiyad iyo jinsi gaar ah salka ku hayn, laakiin Muslimiinta oo dhammi ku bahooboon, maaddaama Nation of Islam ay ku mideysan yihiin oo kaliya dadka Madowga ee ku nool dalka Maraykanka.

Sheekh Xuseen mowduucii uu ka hadlayey waxa uu ahaa: ku dhaqanka Shareecadda Islaamka, iyo sida ay waajib ugu tahay dadka Muslimiinta ah, iyo in ay taa leeyihiin oo aysan marnaba qaadan karin qawaaniin dad soo dhoodhoobeen, oo aan macno weyn oo adduunyo iyo mid aakhiraba lahayn. Sheekh Xuseen waxa uu nooga sheekeeyey arrin ku dhacday isaga iyo rag badan oo ay isku arday ahaayeen oo 1962kii dalka Talyaaniga wax barasho heer Jaamacadeed u tagey, gaar ahaan cilmiga qawaaniinta*(Law)*.

Sheekh Xuseen waxa uu noo sheegay, maalin maalmaha kamid ah iyaga oo fasal ku jira, in nin macallim ah oo qawaaniinta Dastuuradda bara ardada weydiiyey ardadii Sheekh Xuseen kamid ahaa su'aal ah in Soomaalidu Dastuur leedahay. Sheekh Xuseen waxa uu intaa noo raacshay in ardada fasalka ku jirtaa ay dhammaan ahaayeen arday Soomaali ah, oo waxanu degdeg ku baranaynay ayuu yiri afka Talyaaniga, wallow ay wax nooga bilownaayeen.

Dhammaantayo waxa aanu ku jawaabnay haa! Waxa uu barihii na sii weydiiyey in aanu sharaxno Dastuurka Soomaalidu leedahay. Waxa aanu tilmaamo ka bixinnay kii aanu dalkii kaga nimi, annaga oo weliba ku hanweyneyn, oo difaacayna sax-ahaantiisa. Barihii oo ahaa nin naga badsha Dastuurka aanu difaacayno asalkiisu meesha uu ka yimi, ayaa su'aal kale oo tii ka daran haddana na weydiiyey, oo waxa uu yiri Dastuurkiina immisa qof oo Soomaali ah ayaa taqaan? Waxa uu sii dhexgelieyey su'aal kale oo uu na weydiinayo tirada dadka Soomaalida ah, waxanuna si sahal ah u sheegnay tiro aanan hubin sax-ahaanshaheeda, laakiin aannu qiyaas ku fariisinnay, oo

markkii waxa aan jeclahay in aan tiro sheegnay ayuu Sheekh Xuseen intaa daba dhigay.

Waxa uu Barihii sii watay, su'aashii uu su'aasha kale soo dhex geliyey oo ahayd immisa qof ayaa Dastuurka Soomaalida taqaan oo kamid ah tiradaa aad sheegteen? Waxa aanu ku jawaabnay ayaan filayaa ayuu Sheekh Xuseen sii raacshay ilaa tiro gaareysa kun(1000)qof, oo aan weliba aaminsanahay in aysan tiro intaa dhammi aqoon Dastuurkii dalka. Barihii inta uu qoslay ayuu waxa uu noogu jawaabay wixii aad maanta oo dhan daafacayseen haddii kun qof oo idin kamid ahi taqaano kaasi Dastuur idiin ma aha ee dastuurkiinii ka raadsada meesha uu idin kaga dhumay.

Baruhu si wanaagsan oo doqoni magarato ah ayuu noola hadlay, laakiin niman wax u cad yihiin baannu ahaynoo, ma aanan fahmin hadalka macnaha weyn xambaarsan ee uu baruhu na yiri!!! Sheekh Xuseen, sheekadii ayuu noo sii waday waxa uuna noo sheegay in ay dalkii ku soo laabteen maalmo kahor intii aan af-gembigii ciidammadu hor kacayeen dhicin.

Waxa dhacay af-gembigii maalmo kaddib, anigu waxa aan markiiba noqday la taliyaha xagga sharciga ee madaxweynihii cusbaa, Maxamed Siyaad Barre. Waxa aan goobjoog u ahaa maalintii Barre ka aqriyey warqaddii siyaasadda cusub ee dawladda, oo ahayd 13kii qodob ee kacaanka, kana hadlaysey siyaasadda gudaha iyo tan dibadda. Sheekh Xuseen waxa uu yiri:-waxanu joognay oo dhex taagneyn garoonkii Kubbadda Cagta ee hore, lana oran jiray Konis Stadium, kuna yaalley xaafadda Cabdulcasiis, markii horena loo yaqaanney Kaambo

Amxaaro. Halkaa waxa tubnaa dadweyne badan oo Soomaaliyeed, saraakiisha cusub ee dawladduna waxa aan filayaa in ay ku dhammaayeen.

Sheekhu waxa uu yiri waxa aan kamid ahaa ragga madaxweynaha agtaagan, weliba kuwa isaga ugu dhawaa markaas, waxa uu jeebka kala soo baxay warqaddii kacaanka, waxa uuna isla meeshii oo jeebkiisii ahaydna geliyey mid kale waxa uuna yiri:

*'Maanta laga bilaabo dastuurkii dalka ee sagaalka sano soo jiray ma jiri doona, oo waqtigiisii waa dhammaaday, waxanuna ku beddelnay 13kii qodob ee kacaanka'.*

Sheekhu waxa uu yiri markii intaas afka madaxweynaha ka dhacday ayaa waxa aan eegay dareenka dadweynaha iyo waxa ay sameyn doonaan, ileyn Dastuurkoodii baa la laabaye. Dastuur, sidiisaba haddii wax laga beddelayo*(amendment)* afti dadweyne *(Referendum)* ayaa la qaadaa, waana arrin ku adag waddammada Dastuurka ay iyagu leeyihiin ku dhaqma, qof keli ahina wax daqiiqado kayar in uu ku dhawaaqo in aan wax Dastuur ahi jirin.Waxa aan arkay ayuu yiri Sheekh Xuseen dadkii oo farxad iyo reyn-reyn ka muuqato, aana dareensaneyn in wax is beddel ahi dhacay, weliba waxa ay indhahaygu qabteen dadka oo geed Hindiga Muqdisho ka baxa caleemo ka jartay oo weliba aad u ruxaya farxadda ay ku jiraan darteed. Sheekh Xuseen waxa uu noo sheegay maalintaa in uu helay jawaabta ah in aan kani Dastuur noo ahayn, laakiin uu Dastuurkayagii naga dhumay meel uu nagaga dhumayna aanan ogeyn, waana hadalkii barahu muddo siddeed(8)sano kahor ah nagu yiri.

Dhacdadan Sheekh Xuseen uu goob jooga u ahaa, kana kala dhacday laba goobood aad u kala fog, Itaaliya iyo Soomaaliya, runtii, waa dhacdo mudan in lagu cibro qaato, muddada uu Sheekhu ka sheekaynayo, dadkii dhashay waa kuwa maanta aan filayo in qayb kamid ihi ay Soomaalida maanta hor yaacayaan ama ay yihiin dadka ku jira maaydaanka siyaasadda ee Soomaalida. Sheekh Xuseen oo helay qayb kamid ah jawaabtii uu raadinayey, ayaa weli waxa muuqata in uu baadigoob ugu jiro dhameystirkii jawaabta, waxa uuna hadda falankeeda hayaa howshaas. Sheekh Xuseen waxa uu noo sii waday sheekadii isaga oo markaan iftiimin doona meesha uu ka helay jawaabta qaybta ka dhiman, oo noqonaysa in uu helay Dastuurkii uu baadi goobayey ee la yiri waa kaa dhumay iyo meesha uu ka helay.

Sheekh Xuseen isaga oo weli noo wada sheekadii, ayaa yiri: Sannadkii 1974kii ayaa haddana Madaxweynihii dalka, Barre waxa uu isa soo taagay Konis Stadium, isaga oo mar kale dadka ogeysiinaya go'aan cusub, ileyn kii horeba dadka ayuu markhaati uga dhigay fulintiisa, isaga oo dadka la maragsanaya in aan Dastuur jirin. Maantana waxa uu wadaa in qaybo kamid ah Suuratu Nisaa, oo ka hadlaya dhaxalka ragga iyo dumarka Alle uu kala siiyey, waxa ayna u muuqatay in madaxweyne Barre dib u sixid ku samaynayo, taas oo lamid ah in Alle(swt) khaldamay, laakiin la saxayo, *Subxaana llaah.* Arrintaasi dareen xoog leh iyo buuq ayey dhalisay, dadka Muslimiinta ahina ma ahayn mid ka daadagi karta, sababta oo ah dadku waxa ay garanayaan waxa ka dhalan kara Kitaabka Alle iyo xukunkiisa oo addoon Alle fara fareeyo.

Sheekh Xuseen waxa uu goobjoog u ahaa in dad badan oo Muslimiin ah oo cullimmo u badani arrintaa ka hadleen, darteedna qaar loo dilay qaar kalena loo xirxirey. Taasina waxa ay ku dhacday in dadku fahmayeen ama garanayeen aayadahaan la yiri waaqiciga lama shaqayn karaan, in ay yihiin kuwo xagga Alle ka soo degay, dadkana dhaqan iyo Dastuur u ah meesha kii hore ee dadku xar-xariiqay aysan dadka wax macno iyo qiimo ah midna ugu fadhiyin.

Waxa Masaajidada magaalada Muqdisho laga ururiyey Culimmo badan, oo arrintaa falaad xumada ah ee Diinta Alle lagula kacay ka dhiidhiyey, waxaana la qab-qabtey ilaa tobon(10)wadaad 17kii Jannaayo, 1975kii waxaana la deldeley lix(6)maalmood kaddib, kuna beegneyd 23kii Janaayo, naxariistii janno Allaha ka waraabiyee. Culimmadaa la deldelay, oo ahaa rag ka caroodey arrintaa aan soo xusay, ayaa waxa ay calaamad u tahay in aan Soomaalidu marnaba aqbali karin Dastuur iyo nidaam aan ahayn kan Alle(swt) soo dejiyey, dunidan iyo dadkana ugu tala galey in ay ku kala dambeeyaan.

Culimmadii la deldelay waxa ay kala ahaayeen:

1 - Sheekh Axmed Sh. Maxamed(Walaaleeye)
2 - Sheekh Muuse Yuusuf
3 - Sheekh Axmed Iimaan
4 - Cali Xassan Warsame
5 - Xassan Ciise Iley
6 - Maxamed Siyaad Xirsi
7 - Cali Jaamac Xirsi

8 - Aadan Cali Xirsi
9 - Saleebaan Jaamac Maxamed
10- Yaasiin Cilmi Cawil

Waxaana la rajeynayaa in ay ahaayeen Shuhadaa Alle dartiis loo laayey, ee aan adduunyo iyo dano gaar ah loo layn. Waxa kale oo jiray culimmo iyaganna lagu xukumay xabsiyo kala duwan, xabsigaas oo u dhexeeyey labaatan(20)ilaa soddon(30)sano. Culimmada soddonka sano lagu xukumay oo tiro ahaan ka koobnaa lix(6)xubnood waxa ay kala ahaayeen:-

1- Aadan Nuur Cilmi
2- Maxamed Samantar Cali
3- Cabdi Salaad Cabdullaahi
4- Xirsi Xuseen
5- Aadan Cabdullaahi
6- Xassan Barre

Culimmada iyana lagu xukumay xabsiga dhan labaatanka sano, waxay ahaayeen todoba iyo toban(17)xubnood, waxa ayna kala ahaayeen:-

1. Axmed Maxamed Cusmaan
2. Cabdi Cali Cabdiraxmaan
3. Cabdi Cabdullaahi
4. Maxamed Maxamuud Weheliye
5. Axmed Cali Yuusuf
6. Shariif Maxamed Yuusuf
7. Cabdullaahi Faarax Cigaal
8. Xassan Cawaale

9. Ismaaciil Xassan aadan
10. Maxamed Cabdi
11. Abuubakar Xassan
12. Cumar Sheekh Cali
13. Cali Mursal Maxamed
14. Bashiir Sheekh Maxamed
15. Cabbaas Muuse Faarax
16. Yacquub Maxamed Macallim
17. Xassan Macalliim Cabdiraxmaan

Sheekh Xuseen waxa uu noo sheegay in uu ku baraarugay wixii dhacay dabadeedna ay u soo baxday jawaabtii uu muddaba raadinayey, oo ahayd mee Dastuurkiinii? Sheekh Xuseen oo warkii sii wada ayaa waxa uu noo sheegay; in uu xabsiga ku booqday maxaabiis ku jirtey xabsiga Warsheekh, loona soo xiray in ay ahaayeen kuwo ka dhiidhiyey gefka diinta Islaamka lagula kacay. Waxa ay maxaabiistu Sheekh Xuseen u sheegeen in nin maxaabiista kamid ahi ku riyooday in xabsiga biyo ugu soo galeen, dabadeedna wiil dhallinyaro ah oo raggan ku jira uu biyihii ka badbaadey. Sheekh Xuseen waxa uu yiri, raggii xabsiga Warsheekh ku jiray ayaa maxkamad la horkeenay, waxaana filayaa in uu yiri kow iyo toban(11)ayey ahaayeen.

Markii maxkamaddii bilaabatay ayaa nin walba mar qol lala galayey oo la weydiinayey waxa uu ka qabo ama sida uu u arko *Buuggii Xeerka Qoyska*, oo ku doodayey in ragga iyo dumarku simanyihiin, oo fikraddii markaa ka soo horjeedda buuggana ay tahay mid khaldan, oo dambi lagu mudanaya, waa xeerka u yaal dawladdee. Qolka ragga mid mid loo gelinayey, waxa ku jira oo fadhiya nin xoog weyn, shaarubo dhaadheer, oo aan weligood la

gaagaabinna leh. Sheekh Xuseen waxa uu hadalkiisii ku sii daray in ay ninka is yaqaaneen, oo weliba magaalada Garoowe ay ka wada yimaadeen, ninkii loo geliyaba handadaad iyo caga jugleyn ayuu kahor keenayey, waxaana hor yaalley miis yar, ayna wada saaran yihiin buugga xeerka qoyska iyo Kitaabka Musxafka ah. Sheekh Xuseen waxa uu intaa ku daray, waxa dhacday in wiil dhallinyaro ahi markii uu u galay ninkii dadka handadayey isagii cannaan iyo hanjabaad ku billaabay isaga oo leh:-

*'Waryaa ma waxa aad is barbar dhigaysaa Kitaabka Alle ee samada ka soo degey iyo buuggan xunka ah ee gaaladu soo xarxariiqday Alle wajigaaga ha dooriyee'.*

Ninkii dadka handadayey ee marba ninkii u gala hanjabaadda ka horkeenayey ayaa Alle waxa uu qaddaray in isagii gacan ku gabbad uu galo, dabadeedna uu askartii ku amro in ninkaan laga kaxeeyo oo laga qariyo 'Allahu Akbar'. Raggii badanaa waala sii daayey markii laga reebo wiilkii dhalllinyarada ahaa ee ninka handadey, wiilkiina waxa la geeyey saldhigga ciidanka amniga ee degmada Wardhiigley. Dad badan oo Soomaali ah, arrinta wiilkana maqlay ayaa saldhigga ugu yimi, iyaga oo hadiyado badan u wada. Sheekh Xuseen waxa uu la kulmay qaar kamid ah askartii saldhigga oo aad u ammanay wiilka, kuna yiri annaga xataa waanu ku liibaannay oo dadku waxa ay naga codsadeen in aan wiilka dhaqaaleyno inta uu annaga na la joogo, iyaguna ay hadiyad abaalgud ah u keenayaan askarigii wiilka dhaqaaleeya. Alle fadligii wiilkii waa la siidaayey isaga oo sharaf iyo cis dadkii Soomaaliyeed ee Muslimiinta ahaa ka helay Allena xaggiisa aan rajeynayo in uu maqaam wanaagsan ku leeyahay, riyadii la sheegayna wiilka biyaha ka badbaadey in uu isaga ahaa ayaan

filayaa, ayaa Sheekh Xuseen yiri maaddaama raggii kale khalkhal iyo cabsi lagu abuuray, aragtiyo ay markii hore qabeenna ayey dib uga laabteen. Laakiin wiilku waxa uu ahaa mid diidey in uu ka noqdo arrinta ah in Aayadaha Alle aysan addoomaddiisu fashikhi karin, kibir iyo gaalnimana ay ku dhacday ciddii arrintaa isku dayda.

Sheekh Xuseen oo hadalkiisu gabagabo ku dhowyahay ayaa ku sii nuux-nuuxsaday, in maalintaa wixii ka dambeeyey uu qorshaystay in uu daraasad dheer ku sameeyo Diinta Islaamka culuunteeda kala duwan si uu inta noloshiisa ka dhiman ugu khidmeeyo ama u caawiyo ummadda Muslimiinta ah ee Soomaaliyeed. Waxa uuna go'aansaday kaddib, sannado badan oo uu qawaaniinta bani'aadamka bartayna in uu ku beddelo cilmibaarista Sharciyadda Alle. Haddaba dawladnimadeenu sidaas ayey ahayd, sharcigeeduna kaa uu Sheekh Xuseen sheegay ayuu ahaa.

Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame(Hadraawi), oo isna la yaabban hantiwadaaggan la sheegay in cilmi lagu dhisay ee dhaqankii iyo diintii Islaamkaba la dagaallamaya ayaa gabay la yiraahdo "Jarkii Hoogga" ka tiriyey, wuxuuna Hadraawi yiri:-

*"Cilmigan dib u heega-dhaca*
*Cilmigan dul ka-xaasidka ah,*
*Cilmigan sama-dawdarka ah*
*Caqligu ka daboolan yahay*
*Bukaankiyo daafka qaba*
*Gumeysigu diin u yahay*
*Ilaah lagu diiddan yahay*

*Islaam la-dagaallanka ah*
*Daneysigu weel u yahay*
*Dir-soocu u aabbe yahay*
*Daandaansigu guul u yahay*
*Dabkiyo wada hawsarka ah*
*Dilkiyo wada dhiig-cabka ah*
*Duullaankiyo boobka jecel*
*Cilmigan dal-daloolka badan*
*Damiirku ka meydka yahay*
*Khansiirkiyo duufka cuna*
*Dillaalkiyo tuugga dhala*
*Daydaygiyo jeelka qaba*
*Wanaaggu ka deyro yahay*
*Xumaantu u dooran tahay*
*Dadkiyo simay xoolihii*
*Raggiyo dumarkii furfuray*
*Intuu dumarkii is-baday*
*Raggii dumar qaar ka dhigay*
*Af-duubkiyo qoolka taxan*
*Run baa lagu daahayaa*
*Dijaal korayaa qarsoon*

***"Maxamed Ibraahim Warsame(Hadraawi)"***

Taasi waxa ay meesha ka saartay in aynaan dawlad aynu naqaanno ama wax ka garanayno weli arag marka laga soo tago mid cid kale oo weliba cadow ahi innagu reebtay, welibana kuwii ay u sii dhiibatay cadaawad iyo is aaminid la'aan dhex dhigtay, sidaa darteed wajiga Soomaalidu dawladnimada u taqaan waa kaa aynu kor ku soo aragnay. Midaas waxa aynu ka

dhaxalnay nolosha aan ku noolayn, haddii aan tusaale u soo qaato dawladnimada.

Qofka Soomaaliga ahi dawladnimada waxa uu u yaqaanay qof cayroobay oo shaqo raadis ihi in uu xafiisyada ama meelaha nidaamka dawliga ahi ka dhow yahay ag meeraysto, taasina waa qiimeyn hooseysa oo aan dawladnimada ka fahansanayn.

Waxa aan idin siinayaa tusaale ahaan, arrin ka dhacday deegaankii aan anigu ku soo barbaaray xilligii dawladihii rayidka ahaa*(civilian governments)* [14] ,ee kacaanka ka horreeyey. Deegaankaasi waa magaalada dhulbeeraadka u saaxiibka ah ee *Qoryooley* ee gobolka *Shabeellada Hoose*. Waxa dhacday xilli kamid ah xilliyadii doorashada in dadka deegaanku ay nin ugu duceeyeen in uu baarlamaankii markaa jiray uga mid noqdo deegaanka Qoryooley. Ninkaas oo u muuqday nin la maquuniyey, shaqo dhib badan, oo cayrnimo ahna loo diray reerkiisii, xoolihiisii iyo beerihiisiina laga masaafuriyey[15]. Ninkaa odaga ah waxa la oran jiray Allaha u naxariistee Maxamed Cabdulle Casiir, waxaana lagu naaneysi jiray markii dambe 'Faataxo' oo aheyd in uu Faataxo qaato, dhibna u adkaysto,

[14] Civilian Government, waa dawladdii Rayidka ahayd ayna madaxweynayaasha ka ahaayeen Aadan Cabdulle Cismaan(1960-67kii) iyo Cabdirashiid Cali Sharmaarke(1967-69kii), labadaba Allaha u naxariistee.

[15] Maxamed Cabdulle Casiir wuxuu ahaa oday kamid ah odayada reer Qoryooley, gaar ahaan deegaanka Farxaane, oo lix(6km)kiilo-mitir uga beegan degmada Qoryooley dhanka koonfureed, waxaana dawladdii rayidka ahayd ee 1960kii duco loogu maray in uu golohii Shacabka ee xilliggaa jiray uu kamid noqdo, isaga oo ay weliba dhib ku ahayd.

ummadda reer Qoryooley iyo nawaaxigeedana baarlamaankii waagaa jiray u matalo.

Tusaalooyinkan waxa aan u soo qaatay, dadka Soomaalida ah waxa aad mooddaa in aysan dawlad ay leeyihiin arag amase garan.Taas oo laga dhaxlay burburka maanta ina haysta, eeddeedana ay leeyihiin, aniga aragtidayda, dadkii majaraha siyaasadda u qabtey dawladahaas, oo aan dareensanahay in ay jidkii saxda ahaa ka leexdeen ha ahaato aqoon yari ama dhego adayg ay ka dhego adeygeen jidkii saxda ahaa, oo ahaa in Alle lagu raalli geliya nidaamka uu dunida u soo dejiyey oo ah in Shareecadda Islaamka laga dhigto nidaam iyo Dastuur.

Taas mireheedii maanta cid walba waa ay guraneysaa, iyada oo ay weli muuqato in tiih iyo wareer ku jiraan, mana muuqato jid la ogyahay oo loogaga bixi karo haddii aan dadku Alle u toobad keenin, kana qoomameyn khaladaadkii ay galeen. Waxa aad mooddaa in Soomaalidu ku sifeysan tahay gabey uu Xaaji Aadan Af-qallooc tiriyey muddo laga joogo konton(50) sano ka badan. Gabaygaasi waxa uu tilmaamayaa in aysan habbooneyn in war iyo ilaaq meel lala soo taagnaado, laakiin ay habboon tahay in runta loo soo dhawaado, walaahowgii hore ee ummaddu ku hungowdeyna meel la iska dhigo. Isaga oo taa tilmaamayana Xaajigu waxa uu yiri:-

*"Islaam sheegte diintiina way aga maraayaane,*
*Wax badan oo astaan muuminlaa uur ka-kafirahe,*
*Israa'iil tiibii helaynu ashbahaynaaye,*
*Dhulku waa ogyahay khaa'inkii ciidda iibsada'e,*
*Dadkuna wuu arkaa daallinkoo wuu ka aargudane,*

*Ajashiyo ayaantiyo wakhtigu aaminaad ma lehe,*
*Ifku waa dixide meel kalaa la askumaayaaye,*
*Ninkii aan arxamin waxa uu galaa ololkii naareede".*

***"Xaaji Aaden Af-qallooc"***

# CUTUBKA SADDEXAAD

## MAGAALADA

Taariikh ahaan, haddii aanan khaldaneyn magaalooyinka ku yaal dhulka Soomaalidu degto waxa ugu dhismo horeeyey kuwa dhaca xeebaha ku yaal Soomaaliya, ha ahaato badweynta Hindiya amase Badda Cas. Dad badan oo tariikhda Soomaalida wax ka qora ayaa aaminsan in aysan Soomaalidu wax weyn oo la taaban karo ku lahayn dhismayaashii magaalooyinka dhaca xeebaha, Soomaaliduna ahayd dad xoolo dhaqato ah oo xoolohooda marwalba ula dhawaada dhulka daaqsinta leh, sida badanna, dhulka daaqsinta ihi waa dhul ka fog xeebaha.

Sida ka muuqata magacyadii hore ee magaalooyinka dhaca xeebaha waxa ay u badan yihiin magacyo Carbeed iyo Faarisiyiin (Persians). Taasi waxa ay markhaati u tahay in Soomaalidu magaalooyinka soo degtay mar dambe oo ay deegaamoobeen.

Sida uu Cabdalla Cumar Mansuur ku tilmaamayo buuggiisa *'Taariikhda iyo Luuqadda Bulshada Soomaaliyeed"* magaalada Muqdisho waxa dhisay muslimiintii ka soo haajirtay Jasiiradda Carbeed qarnigii tobnaad(10), inkasta oo uu raaciyey in Muqdisho kahor ay jirtay magaalo la oran jiray Xamar, kana fogayn meesha hadda Muqdisho kutaallo, taas oo buburburtay. Magaaladii la oran jiray Xamar waxa ka talin jiray nin Suldaan ah, Carabna ahaa, laguna magacaabi jiray *Suldaan Ascad Al-Ximyari,* isaga ayaana dhidibbada u taagey magaaladaas sannadkii 225kii milaadiga kahor.

Ustaad Mansuur waxa uu buuggiisa ku caddeynayaa in burburkii Xamar ay ka hartay xaafadda deegaanka hadda loo yaqaan *Afisione* ee ah garoonka diyaaradaha ciidammadda qalabka siday.

Magaalada Berbera iyo Saylac ayaa iyana ahaa meel magacyo aan Soomaali ahayn loogu yeeri jiray buugga la yiraahdo "*The Periplus of the Erythraean Sea*" lana qoray qarnigii kowaad ee miilaadiga, uuna qoray ninka lagu magacaabo Hipolus ahaana nin badmareen ganacsade ah, una shaqaynayey Boqortooyaddii Roomanka, ayaa Berbera ugu yeeri jiray *"Malao"* magaalada Saylacna waxa lagu magacaabi jirtay *"Avalits"*

Magaalada Boosaaso, oo iyana loo aqoon jiray Bander-Qaasim waxa la xusaa xusaa in ay asal ahaan yimaadeen niman Yaman ah, markii dambana degay. "*Mosylon*" ayaana Giriiggii hore u yaqaanneen, buuggan kor ku xusan,"*The Periplus of the Erythraean Sea*" ayaana magaca iyo taariikhda Boosaasaba ku caddahay, mana aha meel Soomaali markii hore dhisatay. Waxa iyana jirtay magaalo kale oo Boosaaso ka yareyd lana oran jiray Bandar-Siyaad, Soomaaliduna Qaw ugu yeeri jirtay, Gumeysigii Ingiriiskuna dumiyey markii uu dalka Soomaaliya kala qayb-qaybinayey.

Haddii aad u sii dhaqaaqda xaggaas iyo Badweynta Hindiya, dhammaan magaalooyinka dhaca waa kuwo magacyo aan Soomaali ahayn loogu yeero, sida Qandala, loona yaqaan "Gacanka Hodonka".

Magaalooyinka Xaabo iyo Caluula oo iyana aad mihiim ugu ahaa xiriirkii ganacsiga ee bariga ayaa iyana loo yaqaanay

magacydan ay hadda leeyihiin oo awalba ahaa magacyo aan Soomaalidu u bixin, waxaana loo yiqiin afka-soomaaliga "Meelihii dhirta Udgoonaa" ama afka-ingiriiska waxa ay ahayd *"The capes of Spices"*. Magacyadana waxa u yaqaanay Boqortooyadii Romanka ee aad ugu wanaagsanayd xagga xiriirka ganacsiga.

Magaalooyinka kale ee iyana magacyada aan Soomaaliga ah lahayn waxa kamid ah:

- Ceelaayo, oo ay ugu yeeri jireen *"Massaylum"* iyo *"Raas Xantaar"*.
- Gaardafuy oo iyana loogu yeeri jiray *"Elefandid"* iyo *"Raasal-fiil"*.
- Caluula oo iyana loogu yeeri Jiray *"Akannai"*.
- Xaafuun, oo iyana loo yaqaanay *"Space Market"*

Badaha dhaadheer ee ku wareegsan dhulka Soomaalida iyo gaadiidkii ugu horreeyey ee dadku adeegsado oo ahaa doonyo ayaa loo tirinayaa in ay sahleen in dalka Soomaalida dad badani yimaadaan, iyaga oo aan wax jidgooyo ama xannibaad ah la kulmin.

Waxa aan daawaday barnaamij uu Axmed Xassan Cawke, oo muddo dheer kamidahaa weriyaasha ugu caansan idaacaddii qarankii Soomaaliyeed soo mara, ku wareysanayo oday Soomaaliyeed oo magaalada Saylac jooga kana mid ahaa, sida aan jeclahay, wafuuddii ka qayb gashay xafladdii lagu caleema saarayey Ugaaska Beesha Ciise, Ugaas Mustafe, 1dii bishii Maarso sannadkii 2010kii. Odaygaa Soomaaliyeed, da'diisa ku

sheegay wax boqol(100)sano ka badan, ayaa waxa uu caddeeyey in uu soo gaarey magaalada Saylac muddo dhow kahor in ay Soomaalidu Xoolaha, Caanaha, Subagga iyo Haragga keeni jirtay, Sonkorta iyo quudka kale oo ay uga baahan yihiina ka iibsan jiray. Laakiin ma aysan jirin degaan la tilmaami karo, oo ay Soomaalidu ku lahayd, waxa uuna odaygu sheegay in ay magaalada degganaayeen dad asalkoodii ka soo jeeday Carab, Turki iyo Yuhuud.[16]

Maaddaama ay Soomaalidu xoolo dhaqato u badneyd, lama biciidsan karo in Soomaalida laga helayey tiro yar oo magaalooyinka xeebaha ku yaalla degganaa, oo wax la qabay dadkii aan Soomaalida ahayn ee magaalooyinka degganaa. Taasi ma ahan mid lagu cabbiri karo in Soomaalidu magaalo joog ahayd, laakiin ummad kasta waa laga helaa noocyada kala duwan ee noloshu ka kooban tahay, haddii ay noqoto xoolo dhaqato, magaalo joog, kalluumaysato iyo weliba beeralay, laakiin wax shaki ahi kama taagna in badanka Soomaalidu uu reer miyi u badnaa, xoolo miyina Alle ku manneystay.

Dhaqammada iyo caadaadka ummadi leedahay ayaa laga dheehan karaa ummaddaasi meesha nolosheedu ku salaysneyd, inkasta oo noloshu hadba is bedbedesho lana jaan qaado *(tadawurka)*ama horumarka*(Human development),* ay la kulanto.

[16] Saylac waa magaalo qadiimi ah, dhacda xeebaha Badda Cas ee Soomaaliyeed, Saylac waxa ay ahaan jirtay caasimaddii Imaaraddii Islaamiga ahayd ee Cadla, waxa ayna kmid ahayd todobadii(7)Imaaro ee Bariga Afrika ka arrimin jiray Xilliggii Khaliifooyinkii Islaamku caalamka u arrimin jireen, Saylac waxa booqasho ku yimi bad-mareenkii reer Marooko ee Ibnu-Batuutah sannadkii 1330kii.

Soomaalidu, dhawaan ka horow qofkii magaalo ku nool waxa lagu xisaabin jiray dadka dhintay, waxaana magaalo geli jiray nin ku fashilmay ama horumar weyn ka samayn waayey nolosha miyiga. Horumarka miyigu waxa uu ahaa in ninku soo xereysto mawaashi/xoolo aad u badan iyo reer ballaaran oo ilaa afar bahood/xaas ka kooban, ninkii intaa waayana waxa uu ahaa mid ku ceebeysan nolosha miyiga.

Runahaantii, ma ahayn in uu qoys ballaaran haysto, laakiin waa in uusan cayr ahayn, taasi waxa ay sababi kartay in ay adkaato in uu soo fariisto golaha ragga, waxa ayna ahayd arrin isaga waji gabax ku ah ama lagu naaneysi doona ceyrnimadiisa. Sida aan soo xusayba, dhaqanka Soomaalida waxa kamid ahaa in ninka magaalo galaa uu ugu xisaabsanaa inta dhimatay, waxaana nin reer miyi ah hadda kahor la weydiiyey su'aal ahayd yaa badan inta dhimatay iyo inta nool? Jawaabtii ninkii reer miyiga ahaa waxa ay noqotay in uu yiraahdo: *"Haddii reer magaalka lagu daro waxa badan inta dhimatay"*, halkaa waxa ka muuqata in ninka reer miyiga ahi uusan reer magaalku xisaabta dadka dunida ku nool ugu jirin.

Waxa jira laba qaab nololeed, oo ay kala leeyihiin reer magaalka iyo reer miyigu. Labadaas qaab nololeed ayaa ah kuwo kala duwaansho ka muuqato, waana kuwo aad dareemayso in ay kala fogyihiin. Qaab nololeedka reer miyigu waa mid lagu tilmaamo in uu ad-adayg ka muuqdo, inanka ama wiilka reerkuna waxa uu inta badan wakhtigiisa la joogaa aabbihii, haddii uu geelii la jiro ama reerka la joogoba, taas oo meesha ka saarta in wiilku wax macaamil ama la dhaqan ah uu la yeesho hooyadii ama dumarka walaalihiis ah. Dad badan oo reer magaal

ah oo reer miyigana cillad ama ceebeyn u raadinaya ayaa ku dooda in aan wax naxariis ahi inanka reer miyiga ahi ku soo korin, isna aan laga filayn. Dhanka kale, reer magaalka ayaa isna ku dhaqan nolol taas ka geddisan oo ah in hooyada reerku marwalba ka war hayso carruurta oo dhan, wiilkuna wakhti badan hooyaddii iyo hablaha walaalihiis ah uu la joogo, aabbuhuna yahay mid wixii ay quudan lahaayeen baadi goob u gala.

Inankii magaalada ku soo koray waa mid ka naxariis badan kii reer miyiga ahaa maaddaama uu og yahay naxariista hooyada, waxa uuna noqdaa mid xaaskiisa u naxariista, isaga oo dareensan wixii hooyadii la soo martay. Waxa kale oo Soomaalidu aaminsan tahay in wiilashu ay marwalba dhegaystaan hadalka hooyada una dhega nuglaadaan, taas oo wiilasha ku xambaari karto in ay xaasaska/oorida ay guursan doonaan ay ixtiraam iyo la dhaqan wanaagsan la yeeshaan.

Dhanka kale in gabdhuhu iyana ay la macaamilaan aabbayaashood, dhega nugeylna u sameeyaan waxa ay iyana dhabbaha u xaaraysaa in mustaqbalka habluhu si wanaagsan oo raalliyonimo ah ay ula dhaqmaan raggooda/saygooda. Waxa laga yaabaa suurtagalnimada ay ubadku waalidka u helaan wakhti ay kula saaxiibaan ama kula sheekaystaan in badanaaba laga helo dadka magaalooyinka ku nool, laakiin aysan suurtogal ahayn amase aan wakhtigu u saamaxayn dadka reer miyiga ah. Koox qaraabo ah, oo aan anigu kamid ahaa, meel lagu caweeyona fadhida, ayaa waxa nin kooxdii kamid ihi weydiiyey wiil ragga ugu yaraa, kooxdana kamid ahaa su'aal la xariirta, in uu soo booqdey gabar walaashiis ah, muddo horena ay isugu

dambeysey, miyigana lagu qabo. Wiilkii su'aasha la weydiiyey ayaa ku war celiyey "haa" waan soo booqdey walaashay xoolana "Arina" waa ay i soo siisey. Su'aal kale ayaa haddana wiilkii lagu ceshay, oo isla ninkii hore ayaa weydiiyey, su'aasha labaadna waxa ay ahayd: ninka walaashaa qaba ma is aragteen? Wiilkii waxa uu sheegay in ay is arkeen isna soo barteen.

Isla ninkii ayaa haddana su'aal saddexaad inankii weydiiyey, waxa uuna yiri ninku magacii? Wiilkii waxa uu ku jawaabey magaciisa ma'aqaan, macno weyna ma leh in la barto magaciisa, waayo waa reer *MIYI* ama reer *BAADIYE!!*

Intaa kaddib odey meesha fadhiyey, wiilkana awoow ugu toosnaa ayaa hadalkii soo gaarey, odayguna waxa uu ahaa odey reer miyi ah, oo markaa miyiga ka yimi wiilka iyo ragga kalena goobta kula kulmey. Odaygii oo la yaabban sida wiilku u quursadey reer miyiga iyo sida reer miyigu u arkaan reer magaalka, oo kaaf iyo kala dheeri ah, dhawrsanaanina ka muuqato ayaa ku jawaabey '*WALLEE-SOOMAALI-KALA WAR-LA*'.

Markii nolosha Soomaalida wax iska beddeleen, oo ay dhacday in dad badan oo Soomaali ahi ay xoolihii miyigu dhaafeen gacantoodana ka baxeen, dad badan oo Soomaali ah baa magaalooyinka soo galay. Dadka magaalooyinka soo geli jirayna waxa uga badnaa dhallinyaradda ragga ah, dumarkuse kuma badneyn. Ninkii dhallinyarada ahaa ee magaalada soo galay waxa laga yaabaa in marka hore noloshu ciriiri ku noqota sababo badan awgood, waayo waxa laga yaabaa in uusan lahayn xirfad uu magaalada kaga shaqaysto, qaraabo ka soo horeysay,

oo uu gacan qabasho ka helaana aysan jirin, illeyn dadkaba noloshaan magaaladu ayaa waxa ay ahayd mid ku cusub.

Ninkii magaalada soo galay, shaqada ugu badan oo uu qofku heli karey waxa ay ahayd in uu meel waardiye ka noqdo ama uu askari galo si uu nolosha u maareeyo. Ninkii dhallinyarada ahaa ee magaalada soo galay, haddii ay suurogal noqoto in Alle wax siiyo, waxa uu ka fakeri jiray sidii uu xoolo miyi u tabcan lahaa, oo uu mar uun miyigii dib ugu laaban lahaa, si noloshii uu garanayey, ee ahayd tii miyiga, uu halkaa uga sii amba qaado.

Dareenkaas waa wajiga uu magaalada ku eegayo, waxa uuna kalsooni ballaaran marwalba ku qabaa miyiga oo uu garanayo noloshiisa, laakiin magaalada dan iyo baahi baa keentay.

Waxa xaqiiq ah in dadka badankoodu deegaan iyo nolol toona aysan ka soo doonan magaalada, laakiin ay ahaayeen kuwo usoo xoogsi tagey magaalada. Waxa arrintaa ii caddeeyey dhawr qof oo aan la kulmay, uuna kamid ahaa adeerkay aabbe ka weynaa soona koriyey aabbe, lana oran jiray Maxamed Siciid Cali (Qotonsey), Allaha u naxariistee. Adeer Maxamed waxa uu kamid ahaa ciidammaddii Soomaalida ee 1950kii Talyaanigu qortay, lana oran jiray Xiisaanley, Beledweynana laga qoray, halkaas oo ahayd saldhig weyn oo uu Talyaanigu ciidammadiisa ku taba bari jiray. Adeer waxa uu ahaa mid ay u dhaxeen laba xaas midna magaalo ma joogin oo miyi bay joogeen carruurtiisuna miyi bay ku wada dhasheen, markii uu is yiri xoolo miyi oo kugu fillana gacantaada waa soo galeen waxa uu ka ruqsaystay ciidankii 1960naadkii markii xorriyaddii la helay, weliba isaga oo aan filayo inuu sarkaal ahaa.

Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame(Hadraawi), kana mid ahaa barayaashii Soomaaliyeed ee Kulliyaddii Waxbarashada Lafoole ka qalin jabiyey, isla markaana qoraa ah, ayaa waxa uu muxaadaro uu kaga hadlayo dhaqanka Soomaalida iyo siday Soomaalidu magaalo ku soo gashay ku qabtay magaalada Stockholm ee dalka Sweden, sannadkii 2004tii, mar uu booqasho ku yimi. Hadraawi waxa uu sheegay in nolosha Soomaalidu ku xirneyd miyiga, dadkuna aqoon fiican u lahaayeen bay'adda ay ku noolaayeen, ahaydna mid ay aqoonteeda iyo waayo-aragnimadeeda muddo kala dhaxlayeen.

Markii ay bilaabatay in magaalo la galo, waxa lagala kulmay jahawareer badan, qofkuna ma hubin waxa kahor iman kara iyo sida uu u maareyn karo, sababtuna waxa ay ahayd, ma ahayn wax uu horey u arkay oo cid ka soo horeysay, oo jid bixiye u noqon kartaana ma jirin, taasi waxa ay horseeday in wareer badani halkaa ka dhasho. Ninkii magaalada soo galay oo ay iska caddahay in uusan soo dhaweyn fiican kala kulmin, ayaa waxa ay is heleen qof dumar ah oo iyana magaalada soo gashay oo iyana la kulantay intii uu ninku la kulmay in le, eg. Labadii qof oo deegaanka iyo bay'adda ay ka yimaadeen walaaleeyey oo iska xiga kuwii magaalada horey u joogay, ayaa waxa laga yaabaa in ay reer ankumaan ama dhidibadda u taagaan.

Reerkaa cusub ee magaalada laga aas-aasey, carruurtii ay dhaleen waxa ku adkaaneysa in aysan wax raad ah oo dhaxal ah oo magaalada ay joogaan ku saabsan uga tegin ama barin, miyigii ay garanayeena aysan carruurtii joogin amase aysan wax fikrad ah ka haysan, illeyn carruurtu magaalo ayey ku dhalataye. Arrimahaani waxa ay sababeen carruur badan oo magaalo ku

dhalatay ugu dambeyntii in miyi la geeyo oo ay dhacdo in ay labadii dhaqanba, waa kii miyiga iyo magaalada, seegaan oo ay midna wax macne leh ka faa'iidi waayaan maaddaama qaabkii noloshu is beddeshay.

Sida caadiga ah magaalo geliddu waxa ay u baahan tahay marxalado kala duwan oo ka horreeya magaalo soo gelidda. Tusaale ahaan, dadyowga magaaloobey ee reer Galbeedka, Carabta qaarkeed iyo Afrikaba, intii aysan soo gelin magaalada waxa ay la kulmeen nolol, runtii, u dhexeysa magaalada iyo miyiga. Noloshaas waxa lagu tilmaamaa in ay ahayd nolol kala guur ah*(Urbanism),* oo noloshii miyigana ka sarreysa tan magaaladana ka hooseysa. Noloshaas waxa loogu yeeraa nolosha deegaameynta, dadkuna shaqo ka duwan tii xoola raacnimada ayey helaan, oo ah in ay shaqo ka helaan beeraha ama iyaguba beeraley noqdaan.

Dalalka Yurub waxa ka jiri jirtey nooc shaqo, oo ay bixin jireen dad dhul beereed leh, adeegsan jirayna nidaamka loo yaqaan Dhulgoosiga*(Feudalism).* Dadkaasi waxa ay shaqo siin jireen dadka ka soo hayaama miyiga ee aan weli reer magaalka noqon, muddo kaddibna dadkii shaqada la siiyey, waxa ay u gudbaan, oo la qabsadaan noloshaan, taas oo u sahasha in ay magaalooyinka soo galaan nololna ka sameystaan. Laakiin Soomaalida, soo gelistii ay magaalo soo gashey ma ahayn mid tartiibtaas soo martey, ee waxa ay ahayd mid ka soo bilowdey miyiga magaalona ku xejiye, taas oo keentay wareer badan oo ay la kulmeen dadkii miyiga ka soo hayaamey, magaalooyinkana miciin iyo nololba soo bidey.

Soomaalidu waxa ay tiraahdaa *"ninkii geela laayaca ayaa ariga loo diraa"*, waxa marar badan dhacda in inanka/wiilka aan xoolaha aad u ilaalin ee loo yaqaan xoolo laayac uu aabbihii magaalada u diro, uuna yiraahdo kaas magaalada igaga ambiya oo adeerkii ama abtigii oo magaalada deggan ha loo geeyo si dugsi quraan ama iskuulka gaalada loo geeyo, kolba aniga wax ii tari maayo, oo xoolo dambe raacsan maayee.

Nin aanu saaxiibbo nahay, lana yiraahdo Cabdiwaaxid Jaamac Dirir, ayaa waxa uu iiga sheekeeyey sheeko qosol leh, waxa ayna ahayd sidan; Cabdiwaaxid waxa uu yiri: oday Soomaaliyeed, reer miyina ah ayaa dhalay dhawr nin oo doqommo lagu xanto, loona bixiyey *'Muquunooyin'*. Nimankii markii ay dareemeen in aysan waxba ka qabaneyn miyiga, oo aan cidina xoolo u dirsaneyn ayey goosteen in ay magaalo aadaan askarna qortaan, xilliggaana dalka waxa gumeysanayey Ingiriis iyo Talyaani.

Nimankii waxa ay tageen magaalo askar laga qorayo, waxa ayna galeen safkii dheeraa ee ninkii gumeystaha wakiilka ka ahaa uu miis ku haysto, dadkana mid mid u qorayo magacyadooda. Nasiib darro raggii iyaga ahaa waa loo diiday in askar la qoro, sababtana Cabdiwaaxid iima sheegin, mana hubin, waxa ayna ku soo noqdeen reerahoodii iyo miyigii. Markii ay degmaddii reerku degganaa soo gaareen, wixii ay magaalo kala soo kulmeena ka war bixiyeen, ayaa abbahood yiri; *'Wallee gaal muquuno badiyee'*, isaga oo dareensan aabbuhu in doqonimmo darteed shaqadii askarinimada oo gaalku qorayey loogu diidey. Runahaantii, Soomaalidu waxa ay ahayd mid ka faani jirtey shaqada gaalku gacanta ku hayo, inyar mooyee. Taasi waa sifo kale oo muujinaysa in aan Soomaalidu marnaba wax kalsooni ah

ku qabin magaalada, laakiin ay mar walbaba ku eegayso waji danaysi ah, oo aan aayo iyo mustaqbal midna lahayn.

1998kii, aniga oo Boosaaso jooga ayaa Hotelkii aan degganna waxa aan kula kulmey oday da'weyn oo baarid caafimaad loo keenay Boosaaso. Odayga waxa laga keenay Laasqoray, waxaana wadey nin weyn oo uu awoow u yahay. Odaygii ayaannu is wareysannay, waxa uuna ii sheegay in nolosha inta badneyd uu ahaa Badmaax(Seaman), laakiin uu waagii dambe degay dalka Ingiriiska magaalada Cardiff, oo ay deggan yihiin rag badan oo Soomaali ah, badmaaxyana u badan, kana shaqayn jiray Maraakiibta reer Galbeedka. Odaygii waxa uu i weydiiyey su'aal la xiriirta waxa aan reerka iyo caruurta ugu hayo Yurub, waxa uuna iga codsaday in aan dalka keeno, oo aan weliba miyiga geeyo.

Waxa uu intaa ii raacshay, isaga oo tilmaamaya wiilkii uu awoow u ahaa, Boosaasana keenay odayga; Waxa uuna i yiri ma aragtaa kan i wada ee adiga ku le'eg? markaas ayaan iri haa!!!
Waxa uu odaygii yiri:- aabbihii waxa uu dhashay aniga oo markab saaran oo dalka Spain jooga, miyi ayuuna ku dhashay, haddii aan ku dhali lahaa Yurub maanta wiilkiisu, oo kan ahi, ima soo kaxeeyeen amaba ismaba aan aqoonneen. Dhabahaantii, arrintaa uu odaygu sheegayo wax badan baa ka run ah, waana dhacday in carruur badan oo Yurub iyo Maraykan lagu dhalay aan maantay faro badan lagu hayn.

Macnaha aan u soo qaatay tusaalahaan ayaa waxa uu yahay, in aan muujiyo kalsoonida Soomaalidu marwalba ay ku qabtay magaalo in ay ahayd mid aad u yar amaba aan jirin. Dhawaan

ka-horow, dadka Soomaalida ahi waxa ay ahayeen badankoodu dad ka xanaaqa waxa la yiraahdo reer magaal, waxa ayna qabeen in ereyga reer magaal uu macnooyin badan oo aan wanaagsaneyn amase laga faano xambaarsan yahay.

Waxyaalaha reer magaalka lagu xifaaleeyo ama lagula kaftamona waxa kamid ah, wax is-dabamarin, daacad la'aan, been iyo waliba xaasidnimo iyo bakheylnimo. Sifaadkaasi ma aheyn kuwo lagu yaqaaney amase lagaga dhaqmo miyiga ama ay ku kici jireen dadka reer miyiga ahi. Waxaana jirta in nin Soomaaliyeed magaalada oraah ka yiri, isaga oo muujinaya in magaaladu hawlo badan tahay, dad badan oo kala nooc ah, isku jihana aan u wada socon ay magaaladu kulmisey. Ninkii oo cabbiraya aragtida uu magaalada ka qabona waxa uu yiri;-

*"Heedhe Magaalooy mugweyney, maxaad haysaa mushkiladee, Dadku waa isku wada magac ama weysku wada muuq, Qof waliba muraad iyo macno hoose leeyahay magaalooy, Maxaa Sheekh Muftiyohoo marinaaya diintiyo Mareegaale tuugiyo aad Munaafuq haysaa magaalooy".*

***"Maxamed Axmed Dhabarlaw, Allaha u naxariisto".***

Waxa aan rabaa in aan idin xasuusiyo gabay uu reer magaalka u tiriyey Mujaahid Ismaaciil Mire, mar uu Magaalada Burco ariga u iib-geeyey. Gabaygaasi waxa uu ku saabsan yahay wixii dhex maray isaga iyo niman sayladda/suuqa xoolaha dallaaliinta ka ahaa ee arigiisa u iibinayey. Mujaahid Ismaaciil waxa uu gabaygiisa ku cabbirayaa in uusan fahmin afka reer magaalku kuwada hadlo, isaga oo halkaa tilmaaan ka bixinaya. Tilmaantaas oo laga dhadhansan karo in reer magaalku wax is-dabamarinta

iyo wax kala leexinta uu aad ugu dheereeyo. Middaas oo Soomaalida miyiga ku dhaqan ceeb ku ah, laakiin reer magaalku uusan wax dhib ah u arag noloshiisa qayb kamid ahna ayba tahay. Mujaahid Ismaaciil Mire isaga oo catow iyo calaacal ka muujinaya wixii lagula kacay ayuu yiri:-

*Nimanyahow awoow iyo awoow iyo abka aan sheegto,*
*Iyo aniga abidkay ma arag iibsi lacageede,*
*Adduun buu lahaan jiray raggaan ka isirraa waaye,*
*Ololahaan wax kaga qaybsan jiray ululuf duullaane.*
*Mar uun baan amuumaday waxan aabbahay faline.*
*Afar waxan u dhaxay tuuladii awrta loo raraye,*
*Albaabkii burcaan tagey anoo aaladii sida'e,*
*Amminkiiba lay yimi sidii eegta lay yahaye,*
*Ooggii horey nagu kaceen adhi dillaalkiiye,*
*Dar iimaanka laga qaaday baa noo aloogsadaye,*
*Amankaagay goortay wankii adhaxda taabtaane,*
*Intaa weeye iyo maahadii la is i laaqaayey,*
*Asaraartankii baa qalbigu aad wax ii dhimaye,*
*Afka reer magaaluhu yaqaan waan ka awdnahaye,*
*Il-maroojiyihii bay khatalay kii aan aaminaye,*
*Afar bowlad la gooyey bay igu aluubeene,*
*Anigoo arkaayaa gacmaha laygu iibsadaye,*
*Kuwo boqonta ood laga sudhay ila ahaayeene,*
*Usha jeedal iyo suufaf bay igu illaaweene,*
*Ashcaartaba rag baa iga badshee idinku weydiiya.*

***"Mujaahid Ismaaciil Mire, Alle ha u naxariisto".***

Gabayga Mujaahid Ismaaciil Mire waxa laga dhadhansanayaa in reer magaalku yahay mid aan la aamini karin, lana isku hAlleyn karin, welibana adiga oo aan garanayn, martina u ah ayey ku dhacayaan, sida uu Ismaaciil tilmaamayoba.

Sida caadiga ah reer miyigu tuugnimada iyo xatooyadaba ceeb ayuu u yaqaan, laakiin in har cad xoolaha la dhaco, lana dareersado reer miyiga faan bay u tahay, sidaa darteed wixii reer miyigu ceebta u yaqaaney ayey ku arkeen reer magaalka oo ah wax is-dabamarin. Taasi waxa ay horseedday in Soomaalidu reer magaalka iyo magaalaba u aragto wax liita. Maahmaahyada Soomaalida waxa kamid ah *"Dudummooy in lagu dugsado iyo in lagu dareensado is kuma heshid"*.

Waxa sidaa loo yiri, dudummadda waxa Soomaalidu sheegtaa in uu dhisay *'Aboor'*, laakiin waxa la aamisan yahay in ay hoy u tahay halaq badan oo dhulka Soomaalida ku nool. Halaqaasi waxa uu isugu jiraa kuwo wax yeelo leh iyo kuwo kaleba, sidaa darteed waxa dhacda in halaqaasi uu mararka qaarkood bannaanka uga soo baxo duddummada, waxa dhici karta in uu la kulmo qof jiifa oo duddummadii hoyga halaqa u ahayd dhaxanta kaga gabbanaya. Waxa laga yaabaa in halaqaasi wax yeelleeyo qofkaas, dadka reer miyiga ah ee dudumada dhaqankeeda yaqaanaa, waxa uu marwalba muujiyaa taxadar badan, oo dareen badani ku jiro, taas ayaana keentay in maahmaahdani timaaddo.

Haddaba markii abaari dhacdo ninkii reer miyiga ahaa waxa uu u soo sahay doontaa magaalada haddii uu qaraabo iyo ehel ku leeyahay, isaga oo illowsan in magaalo iyo wixii degganaaba

in ay xaggiisa ka ahaayeen wax aan la amaanin amase ceebaysan. Waxa uu illaawaa maahmaahdaas aan kor ku soo xusay, oo waxa muuqaneysa in uu magaaalada caayeyo haddana u soo muraad iyo kaalmo doonanayo.Taasina waa wajiga dadka Soomaalidu ay magaalo ka qabaan, wajigaas oo hadba ku xiran dantiisa ee maaha waji sax oo uu magaalo u arko.

Dhinaca kale marka aan xaajada ka eegno, dadka magaalooyinka ku dhaqani wallow aysan badneyn iyaguna aragti kale ayey reer miyiga ka qabeen. Aragtidaasina waxa ay ay tahay in reer miyigu yahay dad aan xisaabtamin mar walbana u hanqal taagaya wax aysan lahayn waana kuwo, waa reer miyigee, aan marwalba xisaabtan iyo qorshe toona lahayn. Xisaab la'aanta ay reer magaalku ku eedeynayaan reer miyiga, waa mid ay wax ka jiri karaan oo reer miyigu xilligga ay barwaaqada kujiraan, xooluhuna u dhalaan oo ay irmaan yihiin, waxa dhacda in aysan ka faa'iideysan nimcadaa Alle ku manneystay. Waxa laga yaabaa in nin soo martiyey ama mutay ay markaa u loogaan ama u xoolo gooyaan, laakiin ma dhacdo in ay xusuustaan kuwii ay qaraabada ahaayeen, oo magaalada ku dacdaraysnaa ama mushahar ku noolka ahaa iyo carruurtoodiiba.

Laakiin waxa dhacda markii abaartu dhacdo in ay xasuustaan in magaalada qaraabo u jirto, loona baahan yahay in maanta samata bixin loo doonto. Reer magaalku waxa uu kale oo qabaa in aan reer miyiga Soomaalidu naxariis lahayn, waxa ayna sabab uga dhigaan iyaga oo aan dareemin, waa reer miyigee, ninkii magaalada u cararay oo aan magaalada xoolo la tegin. Haddana magaalada looga daba yimaado, iyada oo ay macquul tahay in

tabar isaga la soo bido, welibana xoolihii reerka ka dhexeeyey ay weli ku jiraan gacanta ninka reer miyiga ah.

Arrintaana reer magaalka laftiisu gabay ayey ka tiriyeen ay ku tilmaamayaan abaal darrada reer miyiga, iyada oo aad mooddo in ay kaga jawaabayaan eedo badan oo reer miyigu u soo jeediyo reer magaalka. Gabayga reer magaalku reer miyiga u tiriyey, kuna tilmaamayaan xisaab xumada iyo abaaldarrada reer miyiga waxa kamid ah erayadan uu tiriyey nin la oran jiray Cabdi Khaliif Indhoole. Cabdi isaga oo muujinaya cadownimada reer miyiga ayuu tiriyey gabay ay erayadaan hoose kamid ahaayeen, waxa uuna yiri: -

*"Macno ma lah walaalkaa miyi iyo, naag magaalaba'e*
*Labaduba markay kaa madhshaan, moodka iyo noolka*
*Lama moodo in aad maalin qudha, meel ku kulanteene".*

Gabayga Cabdi Khaliif, waxa ka muuqata in laftiisu markii hore uu ahaa nin reer miyi ah, waxaana caddeyn kuugu filan in uu ninka reer miyiga ah ku lammaaniyay qof dumar ah oo reer magaal ah. Gabaygan waxa laga dhadhansan karaa in dadka reer magaalka ah, in weli qayb kamid ahi aysan ka xisaab fiicneyn kana abaal rooneyn kuwa miyiga jooga. Waxaana filayaa sababta uu gabadha magaalada joogta ugu hal qabsaday in ay tahay, in reer miyigu qabaan in gabdhaha reer magaalku aysan reerka howl u qaban, meesha gabdhaha miyigu ay qabtaan howl aan ka dhicin/yareyn tan uu raggu qabto.

Waxa aan sheeko ku maqlay in nin Soomaaliyeed oo xikmad badnaa lana oran jiray Gurxan Muuse Cawl Allaha u naxariistee,

oo markaa doonayey qolo kaftan iyo haasaawe kala dhexeeyo in uu ku xifaaleeyo in ay yihiin niman magaalada jecel, oo aan miyiga la qabsan karin, xilligaas oo nin magaalo gala uusan la sinneyn ninka miyiga jooga, waxa uuna yiri: -

*"Magaalaa dhaaratay, waxa ayna ku dhaaratay in ay ninkii iyada yimaada luuf-luufiso oo baabi'iso, waxaana kadaba dhaartay reer hebel, oo iyana ku dhaartay in aysan iyaguna ka daba harin magaalo[17]".*

Dhacdooyinkaan oo dhammi waa kuwo noo muujinayo in marwalba Soomaalidu dhan aan wanagsaneyn ka taagneyd magaalo gelidda, loona arkayey nin magaalo galay nin dani dabada ka riixaysay, laakiin uusan ahayn nin ku talagal iyo nolol ka wanaagsan oo u dhaanta tan miyiga ka doontay magaalada.

Soomaalidu waxa ay ku maahmaahdaa *"Nin Soomaaliyeed dooh Gorey baa u dambeyn"* taas oo loola jeedo meel kasta oo ninka Soomaaliga ahi cag dhigaba waxa marnaba lagama maarmaan ah in uu noqdo kii ku soo guryo noqda miyiga, oo hashii uu miyiga kaga tagey beri hore, haddana dabadeeda qabsada, isaga oo aan wax badan oo aqoon ahi u soo kordhin. Nin aanu saaxiibbo nahay, lana yiraahdo Cabdiraxmaan Mahad Cabdullaahi, Food-

[17]Gurxan Muuse Cawl waxa uu ahaa oday Soomaaliyeed noolaana qarnigii hore ee labaatanaad(20). Gurxan waxa uu ku noolaa gobollada dhexe ee Mudug loo yaqaan, wuxuuna ahaa oday xikmad iyo kaftan badan, aadbaana loo jeclaa kaftan-gobeedkiisa, Gurxan wuxuu geeriyooday horraantii 1970aadkii, Allaha u naxariistee.

caddena lagu naaneyso, ahna nin noloshiisii miyiga weynaan ku soo gaarey, ayaa waxa uu ii sheegey, in noloshii miyiga ee uu ku noolaa, reer magaalka looga yaqaaney ama lagu tilmaami jiray *"CEYR MARYO-CAD CAD".* Taas oo muujineysa, in reer magaalku yihiin niman dhar cad oo xarrago ka muuqato, laakiin aan xoolo lahayn oo ceyr ah.

Waxa ii warramay Danjire Cumar Xaaji Bile Aadan, Cumarna waxa u sii warramay nin isagu markaa goobjoog ka ahaa dhacdadan soo socota. Cumar wuxu yiri: markii 1970kii uu Hotel Jubba gubtay ayaa dawladdu, xoolo ururin ka bilowday gobollada dalka, maaddaama ay sheeganaysay in ay tahay dawlad hantiwadaag ah, hay'adaha dalkana lagu dhisay ***'iskaa wax u qabso'.*** Guddiyaddii loo xilsaarey xoolo ururinta ayaa deegaan kamid ah Gobolka Hiiraan kula kulmay dad Soomaaliyeed oo xoolo dhaqato ah, waxa ayna u sheegeen in laga doonayo xoolo dib loogu dhiso Hotel Jubba oo ka gubtay qaranka Soomaaliyeed. Oday kamid ahaa odayadii xoolaha la weydiistey ayaa warkii qaatay oo weydiiyey meesha raggani ka yimaadeen, dabadeedna waxa loo sheegay in ay magaaladda Muqdisho ka yimaadeen. Odaygii waxa uu ku jawaabey:-

*'Haddii ay magaalo ka yimaadeen xoolo ha loo ururshо, sababta oo ah magaalo waxa ka yimaada nin col iyo gaalo wada ama nin gaajo iyo ceyrnimo ka soo cararey, sidaa darteed ha loo xoolo gooyo labadaas arrimood mid uun bey yihiine*[18].

[18]Reer Miyigu, dadka magaalo joogga ah waxa ay u yaqaaniin dad cayr ah xoolana aysan u soo xeroon, xeradooduna madowdahay. Waxa kale oo ay aaminsanaan jireen dhawaan kahorow in magaalada gaalo uun loogu tago

Waxa jira qoys kamid ah qoysaska Soomaaliyeed, runtiina, ah qoys ballaaran, waxa uu qoyskaasi aaminsan yahay ninkii magaalo gala ama magaalo ka yimaada in aan hablaha miyiga joogaa yeelin guurkiisa. Waayo waxa ay qabaan in nin magaalo ka yimi uu yahay nin liita, oo nolosha ku fashilmey, maaddaama uu magaalo naf iyo miciinba biday. Hadalkaasi waxa uu ka tarjumayaa sawirka magaalo laga haystey oo weliba dadka Soomaalida ahi badankoodu ka haysteen intii aan magaalada si wanaagsan loo soo gelin. Danjire Cumar waxa uu intaa iigu daray oo yiri: anigu markii aan yaraa oo aanan magaalada soo gelin dadka iga waaweyni waxa ay isku wareysan jireen war magaalo iyo gaaladii joogtay maxaa laga sheegay? oo waxa muuqaneysa in aan Soomaalida nin magaalo ku tirsani uusan ahayn nin Soomaali ah amaba Muslim ah. Haddaba Maahmaahyada Soomaalida waxa kamid ah:

- *Doqonta Lo'da waa loo caayaa, waana lagu ag-maalaa!*

Lo'du waxa ay kamid tahay xoolaha Soomaalidu dhaqato kuwa ugu badan ee magaalad lagaga faa'iideysto, waxaana loo yaqaan carruur koris, oo reer magaalku aad ayuu uga faa'iideystaa Lo'da magaalada lagu haysto. Haddana waxa dhacda in aad loo caayo, meesha dhanka kale Geela aad loo amaano. Cayda Lo'da la caayayana waxa kamid ah: in Lo'du saxaro badan tahay, in ay duufka cunto, in ay biyo badan doonto, intaasiba waa iin Lo'da loo yeelo, haddana waa lagu ilmo korsadaa, doqontana waa loo caayaa.

---

maaddaama ay Soomaalidu reer miyi ahayd, magaalana aysan dhaqan u lahayn, sidaa darteed marna wanaag kuma aysan tuhmeyn amase kama filayn magaalo

- *Magaalo qayrkaa u cay, adna ka muraadso!*

Magaaladuna waa mid meel lala dhigay Lo'dii, oo laysu caayayo haddana laga muraadsado, oo aan laga maarmin. Maahmaahyadani waa kuwo muujinaya danaysiga Soomaalida ee magaalo iyo agabkeedaba, haddana waxa kuu muuqanaysa in ay caayayaan, haddana ka muraadsanayaan, laba bogleynina ka muuqato.

# CUTUBKA AFRAAD

# NABADDA

*"Waa qaali nabaduye nin qumaati ugu laday*
*Oo qushigii ku meel maray idinkuba qiyaasoo,*
*Haddaan qalooc yari jirin miyaad qiri labaydeen,*
*Nin qab weyn iyo nimaan uba qabin,*
*Is qaniinaye hays qadariyeene,*
*Waa qodob su'aaloo qof waliba siday tahay aan how qaato leeyee"*

***"Axmed Mooge Liibaan, Alle ha u naxariisto".***

Waxa aad iyo aad muhiim u ah in fiiro dheer loo yeesho waxa ay nabadi tahay. Waxa aad u adag in bani'aadamku isla fahmo waxa nabadda loo yaqaan ama waxa nabadda lagu qeexo, waxaana ah mid aan sahlaneyn in ay dhacdo in la is la qaato waxa nabadi tahay iyo meesha nabadi ka jirto. Marnaba la is kuma khilaafsana in nabaddu tahay aas-aaska nolosha, noolaha oo dhammina nabadda waa u baahan yahay, mana aha mid laga maarmo, waana waxa ugu horreeya ee ay nololi ku suuroobayso amaba nolosha la waayeyo nabadda la'aanteed.

Nabi Ibraahim, Calayhi Salaam, markii uu dhisay Kacbada (Maka), wixii u horreeyey ee uu Alle(swt), ka baryey waxa ay ahayd nabad, markaa kaddib ayey dhacday in uu nolol iyo irsaaqad Alle ka dalbo. Nabadda waxa lagu qeexi karaa: in wax walba caadi yihiin, wax wer-wer ahina ka jirin xaaladda ay kooxi, degaan ama dal ku nooshahay/noolyahay.

Waxa kale oo iyana nabadda lagu qeexi karaa, in koox, degaan ama dal aan dhexdiisa wax dhib iyo iska horimaad ahi ka jirin ha noqoto af amase addin. Culummo badan oo wax ka qorta nabadda iyo xasilloonida ayaa waxa ay qabaan nabaddu in ay tahay marwalba mid xaalad*(Relative Peace),* ku xiran, oo aan ahayn mid marwalba sida ay asalka u tahay aan u suuroobeyn in laga helo dunidaan aan ku nool nahay nabad loo wada siman yahay. Cid ayaana marwalba nabadda dani ugu jirin, sidaa darteed nabad kasta oo dhacda cid baa isu aragta in ay ku dulman tahay, haddii ay noqota xagga fikirka ama nolosha.

Barry Buzan, oo ah khabiir ku takhasusay, culuumta loo yaqaan Xiriirka Caalamiga ah*(International Relations),* ahna bare wax ka dhiga Jaamacadda Dhaqaalaha iyo Culuunta Siyaasadda ee London*(London School of Economics and Political Science),* ayaa waxa uu qabaa aragti ah in nabaddu ay tahay saddex nooc oo kala duwan, kuwaas oo kala ah sidan: Nabad aan sugneyn *(Precarious Peace)*. Nabad aan la hubin waxa uu ku micneeyey, nabad cidi ilaashato oo ay iyadu dubbaha u haysato, sida markaa ay nabadda u aragtana, haddii wax iska beddelaan waxa ay isu diyaarisaa dagaal ay ku qaaddo ciddii ay u dareento in ay xaaladdii wax ka beddeshay. Nabadda noocan ah cid kale ayaa ku dulman, oo marwalba doonaysa in ay nabaddan ka hoos baxdo iyada oo dareensan in iyada madaxa cagta lagaga hayo.

Nabadda loo yaqaan Nabad-xaaladeed*(Conditional Peace)*, oo iyana Buzan ku qeexay nabad ku dhisan xaalad feejignaan ah oo lays fiirsanayo, lana kala baqayo, cid walibana ay gaashaankeeda iyo warankeeda haysato, ciddii qalabka dhigtana ay haaddu ku dhacayso. Nabadda noocaan ah waxa ay u muuqataa mid koox

waliba ay ku khasban tahay in ay ilaaliso, maaddaama ay qolo waliba mindideeda daabka haysato, haddii ay dhigtana dhegta dhiigga loo darayo. Markaa nabadda noocan ah waa nabad la kala baqayo. Waxaa kaloo xaaladdan nabadeed lagu tilmaamaa ama loogu yeeraa(Security Dilemma), oo ah laba daran mid dooro, waayo waa nabad is eegasho ku xiran .

Tan saddexaad ee Buzan carrabka ku dhiftay, in ay tahay qayb nabadda kamid, uuna qabo in aysan taasi maanta jirin amase ay dhici karto in aysan weligeedba dhicin sida uu aaminsan yahay, waxa uu ugu yeeraa Nabadda Xasillan/Joogtada ah*(Stable Peace).* Taas oo uu qabo in ay tahay nabad ka duwan labadii uu horey usoo sheegay.Tani waa nabadda saxda ee aan cidini ku dulmaneyn, cidina dubbaha u hayn ama aan ku dhisnayn iska ilaalin midba midka kale iska ilaalinayo.

Buzan waxa kale oo uu qabaa in marwalba nabadda iyo awooddu ay isku xiran yihiin, sababta oo ah in nabad joogto ah la helo marwalba waxa darbi ku gudban ku ah awoodda la adeegsanayo, ciddii awoodda la isticmaalayo kahor timaadana waxa shaki gelaya nabaddooda. Nabadda noocan ah ayaa aad u yar in ay bani'aadamka dhexdiisa ka suurtowdo, qola waliba markii ay iyadu gacan sarreyso, nabadda waxa ay u aragtaa tan dambe, 'nabadda hagaasan', meesha qolada isu aragta in la dulmiyey ay nabadda u arkaan, 'nabad aan la hubin. Sidaa darteed markii meel nabaddeeda la tilmaamayo ama cabbir laga bixinayo waxa lagu soo koobaa meesha waxa ka jirta nabad xaalad ku xiran*(Relative Peace),* haddii xaaladda ay ku xiran tahay wax iska beddelaana nabaddaasi ma sii jiri karto.

Buzan waxa uu ku caddeeyey aragtidiisa buuggiisa uu ugu magac darey: *Dadka , Dawladaha iyo Baqdinta* ama *Cabsida*(*People, States & Fear: The National Security Problem in International Relations* 1983)". Buzan, keligii ma qabo aragtidaan ee waxa isna la qaba baraha kale, ee Maraykanka ah, lana yiraahdo Kenneth N. Waltz, waxna ka dhiga Jaamacadda Kaliforniya ee carriga Maraykanka*(University of California and Columbia University)*. Waltz, buuggiisa uu ugu magac daray: Ninka, Dawladda iyo Dagaalka*(the Man the State, and the War)*, ayuu ku sheegay in aan marnaba nabad aan dagaal wadani aysan suurtagal ahayn. Mar walbana dagaalka waxa dhalinaya, oo aan dareensaneyn nabadda iyaga oo doonaya in ay marwalba awooddooda fuliyaan dad gaar ah, oo ah shakhsiyaad siyaasadda caalamka soo mara, isaga oo tusaale u soo qaatay, *Napoleon* iyo *Hitler*, [19] oo ahaa laba hoggaamiye dagaal, oo dunida soo maray.

---

[19] **Napoléon Bonaparte** wuxuu ahaa hoggaamiye ciidan iyo mid siyaasdeedba, wuxuu horseede ka ahaa kacaankii Faransiiska ee lagaga hor imaanayey dhulgoosiga. Napoléon dhalasho ahaan waxaa la sheegaa inuu asalkiisii Talyaani ka soo jeeday, oo qoyskiisu degeen dalka faransiiska qarnigii 17aad, wuxuu dagaal badan ku qaaday Yurub dhexdeeda ilaa uu gaaray Ruushka iyo xeebaha kala qaybiya Faransiiska iyo Ingiriiska. Napoléon waxaa lagu jabiyey dagaalkii Waterloo ee xeebaha Biljan sannadkii 1815, xabsi ayaana loo diray ilaa ka geeriyooday 1821kii isaga oo uu ku dhacay cudurka Kansarka ee caloosha gala.

**Odolf Hitler** waa Austrian ku dhashay Jarmalka, waana hoggaamiyihii xisbigii Naasiga, waana abaabulihii dagaalkii labaad ee Yurub isku laysay, Maraykan iyo Jabbana qayb ka ahaayeen, waxaana ciidankiisii la jabiyey sannadkii 1945kii markii la isugu tagay, loona itaal sheegtay, ayna isugu tageen Isbahaysigii uu Ingiriisku hoggaaminayey Maraykan, Ruush iyo Faransiisna qayb ka ahaayeen.

Haddaan halkaa ku hakiyo aragtiyada kala duwan ee laga bixinayo nabadda, haddaba *waji sidee ah ama qaab sidee ah ayey Soomaalidu nabadda u aragtaa amase u dareensan tahay?*

Waxa aan hadda kahor su'aal ku saabsan waxa uu aadka u jecel yahay ninka Soomaaliga ahi weydiiyey dhallinyaro u badan dad aqoonta diinta Islaamka iyo tan maaddigaba wax ka fahamsan. Dhallinyaradii celcelis jawaabtoodii waxa ay u badatay in ninka Soomaaliga ahi uu aad u jecel yahay waxa la yiraahdo'*Warka'* macnaha in uu war helo. Dooddii aniga iyo dhallinyaradu waxa ay nala gashay meelo badan oo aanu kaga doodayno arrimmo badan oo ku saabsan dhaqanka iyo caadaadka bulshada Soomaalida. Doodda iyo sheekeysiga, qaybo kamid ihi waxa ay ahaayeen ama ku saabsanaayeen, xiriirka ka dhexeeya nabadda iyo ninka Soomaaliga ah. Waxa dooddii iyo wax is weydaarsigii ka soo baxay in ninka Soomaaliga ahi uu yahay mid marwalba dareen iyo dagaal u joog ah, laakiin nabadda afka ka sheega, isla markaana aan macne badan nabadda u arag.

Ma aanan ahayn mid fogeystay ama la yaabay sida dooddu ku soo dhammaatay, waayo, dhaqanka Soomaaligu waa mid kacsanaan iyo dareen aad u dheer ku qotoma. Soomaalida intooda badan waxa lagu tilmaamaa in ay yihiin dad kul kulul, oo ad-adayg iyo xuruurinimo lagu xanto, dulqaad bandanna aan lahayn degdegna u dheer yahay. Run-ahaantii, Soomaalidu way ku amaanan tahay in aysan ahayn mid qaadata quursiga iyo kibirka. Soomaaliduna waxa ay ahayd mid ka sheeggan ummaddihii kale ee la gumaystay, inkasta oo maanta ay

muuqato in, runahaantii, khasladahaas/kaydadkaas dahabiga ah ee ay Soomaalidu lahaan jirtay ay u muuqdaan kuwo sii dabar go'aya ama guraya. Laakiin waxa aan aad ugu hanweynahay in aan marwalba ummadda laga waayeyn koox xalaal ah oo marwalba u taagan in ay ku fara adaygaan wanaaggii ummadda lagu yiqiinney.

Ustaad Gacmo-dheere ayaa waxa uu ii sheegay in dadka Shiinuhu markii ay subixii is wareysanayaan ay iska wareystaan xagga daanka, oo waxa ay isku bariidiyaan xalay muufo ma la helay, meesha Soomaalidu isku wareysato xalay ma la nabad baryey. Arrintaa oo muujinaysa qolo walba wixii markaa dareen ah ee ku jira, welwelna ay ka qabto.

Ereyga nabadda, waxa aad mooddaa in uu aad ugu badan yahay is wareysiga Soomaalida, waxaana jira in labadii qof ee Soomaali ahi markii ay kulmaanba ay iska wareystaan nabadda, iyo in midba midka kale ka wareysto nabdoonaanta uu qabo iyo meelihii uu ka soo safray in lagu nabdoon yahay. Waxa taa barbar socota, in haddana Soomaalidu marwalba ku xalliyaan dagaal haddii ay dhacdo in nabaddii hadda la iska wareysanayey meesha ka baxdo, oo ninka dagaalka ka haraa oo nabadda ka shaqeeyaa uu yahay *Tuke Baalcad*, waxa aan ula jeedaa waxa uu ahaa qofkaasi mid keli ku ah arrintaa nabad raadinta inta aan dagaalku bilaaban.

Waxa dhaca markii la is laayo oo rag badan, oo toodii gashay meesha ka baxaan, oo qoladii ciilka qabtay ciil baxdo ayaa miyirku soo degaa, markaas kaddib ayaana nabad iyo waan-waan la raadiyaa, nabad raadintaan dambena, waxa laga yaabaa in

dadka oo dhammi wax ka raadiyo. Suugaanta Soomaalida waxa aad ugu cad in Soomaalidu tahay dad marwalba nabadda fogeeya, iyaga oo marwalba ay dareenkooda ku dheehan tahay nin iska celin iyo wax iska caabbin. Waxa aanna jeclahay dhawr Suugaanyahan oo ka gabyey nabadda, iyada oo ay muuqato in mid walba uu u dardaar werinayo qolo kale, isaga oo hanjabaad iyo car-cartan ku muujinaya in aan nabad la helayn haddii aan arrintu sida uu wax u arka aysan u dhicin ama aan loo maareyn.

Abwaan Mustafe Sheekh Cilmi, ayaa muxaadaro uu ugu magac daray *"WELIGEY WAAN QAXAYEY"* ku qabtay magaalada Stockholm ee dalka Sweden, waxa uu kaga hadlay sida Soomaalida iyo nabaddu u kala dheer yihiin. Mustafe caddeymo badan, oo uu muxaadaradiisa ku xoojinayo ayuu soo bandhigay, caddeymahaa waxa kamid ahaa: gabayo Soomaalidu tirisay. Gabayadaasi waxa ay ahaayeen hanjabaad iyo faan, gabyaa walibana waxa uu ku faanayey sidii uu nabadda u fogeeyey, iyo in ay weliba ceeb iyo liidnimo tahay in nabad la qaato.

Mustafe waxa uu yiri: **Nin reer xeebeed ah baa shirbay, waxa uuna yiri:**

*"Cayri waa cagtaa ku noolee, Casiisow col noogu naadi".*

**Nin reer Caabudwaaq ah ayaa isna ku gabyey:**

*"Reerkeena way uga dartaa daanyo nabadeede,*
*Dar Allaan ku noolaan jirniyo duul la weeraro'e*
*Dudummo yuluq haddii aan harsado dacas ma*

*jiifeene,*
*Digdigtaydu waa laba habaas kolkay kabi ka duushaaye.*

**Nin reer Bari ah baa isna ku hanjabay:**

*Dhugta faraska kuma koobanee dhiig, ma kaga keeney.*
*Dharbaaxadii kolkii aan ku riday dhalasho, ma u sheegtay".*

**Nin reer Hargeysa ah ayaa isna yiri:**

*"Ilal ibili kuma soo degteen ayadaha qaare*
*Idinbacasa awrkay dhashiyo aarankay wadatay,*
*Asaxaabihii horeba waa ku intifaaceene,*
*Aakhiro nimaan geel lahayn, lama ammaaneyne,*
*Maxaan idi awraarsadaa, awr ma dhaansatiine".*

**Nin reer Boorame ah ayaa isna tuurtay:**

*"Allahayow nin ii daran maxaan daafta hore seexshay,*
*Nin i daaqsanaysana maxaan daafida ukariyey,*
*Jidhku nimaanu dooneyn maxaan, hadalka deeqsiiyey,*
*Ma degdego xaajadaa ee maxaan rag u dulqaad yeeshay*
*Debinkaan u dhigay maalintuu degelka soo meero,*
*Isagoon digniin qabin maxaan, kaga dayaansiiyey.*

Mustafe ugu dambeyntii waxa uu muxaadaradiisii ku soo gabagabeeyey, gabay uu tiriyey **nin reer Qabridaharre ah isaga oo leh:**

*"Haddaan Caynabow col iyo guluf, caato kugu raagin,*
*Waxaad coobbii weynaataba haddaadan, caday ka dhuubnaanin,*

*Casar galay sidiisii haddaadan, dhidid la caaryeysan,*
*Cududahoodu haddaan isku jabin, cuurka Bah Xawaadle,*
*Oon maydku cagahaaga noqon, sida cagaar seexday,*
*Geeddiga cedceedsaday haddaan, caga jab loo guurin,*
*Cad la quuto mooyee haddaan, caano laga dhaaran,*
*Sida laga calool qabo haddaan, Cali ka weynaanin,*
*Hadaan nabadda ceelkaan ku rido, cidi ka soo saarto,*
*Caallaan ahay oo caallaa i dhalay haddaan, dunidu ciiryaamin".*

Dhammaan suugaantaasi waxa ay muujinaysaa xiriirka ka dhexeeya Soomaalida iyo nabadda inta uu le'eg yahay. Waxaana kuu soo baxaysa in ay aad u yar tahay in nabaddu tahay mid muhiim ah marka loo eego sida Soomaalidu nabadda u aragto. Dadka Soomaalida ah, sidaan horeyba u soo xusay, aad bay ugu celceliyaan in nabaddu tahay muhiim, waxa aadna ka garaneysaa marka ay is wareysanayaan afkoodu wax aan nabad ahayn kuma dhawaaqo, haddallada ay is weydaarsanayaana waxa aad ugu badan ereyga '*Nabad*', laakiin waxa aad mooddaa in aysan afka baarkiisa dhaafsiisneyn, ayna muuqato in ay sheekada ku wanaagsanayaan. Sheeko wanaagsiga Soomaalida ee nabaddana waxa kamid ah:

- *Nabad qabi ma jirtaa,*
- *Mala nabdoon yahay,*
- *Nabadi ma idiin soo yeedhay,*
- *Nabdoonaani ma jirtaa,*
- *Nabad ma lagu beryey,*
- *Caano iyo nabad,*
- *Wiil iyo nabad,*
- *Nabad iyo nooli kulante,*

- *Nabad iyo naxariis,*
- *Nabaadiino xiran,*
- *Soo noqod nabad leh,*
- *Nabad baa naas la nuugo leh,*
- *Nabad iyo colaad kala mudan,*
- *Waxad nabad ku weydey waalli kuma helaysid,*
- *Rag waxa uu nabad ku dhaamo ma leh,*
- *Nabadeey hooyo,*
- *Rag gogoshii waa nabad,*
- *Nabad baa naruuro leh,*
- *Nabad la'aani waa nolol la'aan,*
- *Nabad baa lagu negaadaa,*
- *Nabad baa lagu naaloodaa.*

Hal-kudhigyadaa*(slogans)*,aadka u wanaagsani, ee aan qalbiga bani'aadamku ka didayn in uu usoo iisho mooyee, waxa ka xoog iyo saameyn badan kuwa liddiga ku ah ee Abwaan Mustafe Sheekh Cilmi soo bandhigay, dhammaana ka hadlaya sida ay marwalba Soomaalidu dagaal joog u tahay. Dad badan ayaana qaba in xataa kelmadahani ay raaceen Soomaalidii hore, laakiin aysan macquul ahayn in maanta laga helo kelmadahaan Soomaalida cusub, oo loola jeeda jiilalka cusub ee dadka Soomaalida ah. Abwaan Mustafe oo aan si gaar ah u wareystay, ayaa ii sheegay in uu aaminsan yahay in aan Soomaalidu ahayn mid ku cibro qaadata wixii soo maray, waxa aadna mooddaa ayuu sii raacshay Mustafe;- kuwa aan marnaba arag wax dhib ah. Sababtuna waxa ay tahay, ayuu Abwaan Mustafe leeyahay in Soomaalidu tahay dad illowshiinyo dhow. Waxa uuna tilmaamayaa in wixii basharka ku dhaca wax lagu qaato, laakiin Soomaalidu kuma jirto kuwa wax ku qaata wixii ku dhaca.

Mustafe waxa uu intaa ii raacshay, in odayga uu isagu saddex iyo toban(13)fac *'lineage'*, ka tirsado uu qaxayey, isaguna soo qaxay wiilka uu awoowga u yahayna, oo wiilkiisu dhalayna oo isna shan iyo toban(15)fac ka tirsadana uu weli qaxayo, waxa uu si caro leh Mustafe isu weydiiyey oo yiri *"WAR XAGGEE U SOCONNAA?*[20]*"*

Layaab ma leh haddii Soomaalida lagu sifeeyo dad aan nabadda wax qaddarin iyo mudnaan ah aan siin, waloow ay afka ka sheegtaan in ay yihiin dad nabadeed markii ay doonayaan in ay qof ammaanaana ku sifeeya in qofkaasi yahay qof nabadeed. Waxa muuqata haddiiba ay dhacdo in qof keliya ama koox lagu sifeeyo nabad, meeshaa nabad badani kama jirto, oo waxa caddeyn u ah wixii ummadda dhexdeeda ku yar ama qariib ka ahi qofkii ama kooxdii laga helaa waa koox ama qof ka tilmaaman ummadda inteeda kale ama badanka ummadda.

Waxa la iiga sheekeeyey in oday Soomaaliyeed damcay in uu xajka aado, soona guto rukunkaa Islaamiga ah kaddib markii ay u muuqatay in uu awooddeeda hadda leeyahay. Odaygu waxa uu ahaa oday reer miyi ah weligiina dagaal u joog ahaa, nabadna intii uu ku seexday ayba yareyd. Raggii aadku ugu dhawaa odayga, oo ay wiilashiisu kamid ahaayeen ayuu ku wargeliyey in uu niyeystay in uu xajkii Alle sannadkan aado. Ehelkii iyo wiilshasiiba waxa ay u qalab qaateen in ay odayga ambabixiyaan, howshiisana galaan. Markii howshii soo dhammaatay, ayaa

[20]Abwaan Mustafe waxa uu ahaa mid aad ula yaabban waxa Soomaalida cayrinaya, oo noloshii oo dhan ay qax iyo dagaal ugu idlaysteen, sidaa darteed waxa uu u ekaa mid garan la' meesha salaaddu iska qaban ladahay.

odaygii waxa lagu wergeliyey in howshiisii diyaar tahay, lana gaarey wakhtigii uu ambabixi lahaa. Odaygii waxa uu isu diyaariyey safarkii waxa uuna soo dhameystirtay qalabkii iyo saadkii uu safarka ku geli lahaa. Sahaydii odaygu diyaarsaday ayaa waxa laga dhex helay waran iyo toorey, waxa la is weydiiyey sida ay ku suurtowday in qalabkan dagaalka laga dhex helo odayga sahaydiisa.

Waxaana la weydiiyey odaygii qalabkaan uu wato, waxaana lagu yiri oday qalabkan dagaalka ee aad wadato xaggee u sidataa, miyaadanse ogeyn in aan xajka dagaal ka jirin ee ay tahay meel cibaado, oo aysan macquul ahayn in la is dilo maaddaama cibaado lagu gudo jiro. Odaygii waxa uu ku jawaabay, wiilashaydiiyow Xajka soow rag ma joogo? waxa loogu jawaabay rag iyo dumarba waa joogaan. Odaygii inta uu qoslay, isuna arkay mid ka gar helay raggii kale ayuu sii raacshay *"meel rag joogo nabadi ma jirtee qalabkayga ha la ii daayo"*

Qof walba oo doonaya in uu u kuurgalo ama baarid ku sameeyo ummad arrinteed waxa uu ka ambaqaadayaa hadba wixii ummaddaasi caadaad iyo dhaqan ay u leedahay. Suurtagalna ma aha in la iska indho tiro caadaadkaas iyo dhaqankaas ummaddu leedahay, la'aanteeduna waxa ay meesha ka saaareysaa in marnaba la gaaro mira dhalka howshii uu qofku doonayey in uu salkeeda helo ama ka mira dhaliyo. Cid alla ciddii doonaysa in ay arrintaa inkiraad ku samaysana, waxa la soo gudboonaanaysa caqabado iyo derbiyo ad-adag oo ay adkaan doonto in uu u gudbo ama ka gungaaro howshii uu wakhtiga badan ku dhumiyey.

Runtii, bulshada Soomaalida laguma sifeyn karo bulsho nabadda jecel, sooyaalkeeda taariikhiga ahina waxa uu ina tusinayaa in Soomaalidu tahay dad colaad iyo dagaal u joog ah, laakiin Soomaalidu waa mid dareensan in colaadda joogtada ahi tahay mid aan wanaagsaneyn mararka qaarkoodna ay ceeb u muuqanaysa in colaad joogto ah nolosha lagu salceyo. Waxa aan aad ugu kalsoonahay, oo aan hubaa in ay Soomaalidu tahay dad dareen dheer leh, dareenkaas oo ku salaysan mid dabiici ah *"Human Nature intelligence"*, ee aan ahayn dareen rug waxbarasho la aado iyo ku yimi.

Maskaxda basharkana, waxa lagu sifeeyaa in ay marka hore maran tahay ilaa wax lagu shubo, oo ay wax barato waxa la yiraahdaa way maran tahay *"blank"*, cullimadda xagga maskaxda wax ka baratayna waxa ay ku tilmaamaan maskaxda dadka sida warqadda cad oo aan waxba lagu calaamadeyn. Aniga oo arrintaa caddeynaya ayaan waxa aan jeclahay in halkaan ku soo bandhigo laba dhacdo oo aan anigu mid goobjoog ka ahaa midna aan ka daawaday barnaamij lagula hadlayey ciidammaddii Maraykanka ee loo direy 1990aadkii Soomaaliya, Barnaamijkaas oo ka baxay Televisionka/shaashadda la yiraahdo Cable Network News*(CNN)* [21] , saldhigeeduna yahay carigga Maraykanka.

[21]CNN = Cable News Network waa Idaacad iyo Shaashad, lagana leeyahay dalka Maraykanka, kuna hadasha afka Ingiriiska, waxaana iska leh qolada warbaahinta ee loo yaqaan Turner Broadcasting System, waxa la aas-aasay bishii Juun 1dii, sannadkii 1980, waxaana xarun u ah Atlanta, Georgia ee carriga Maraykanka.

Dhacdada aan anigu goobjooga u ahaa waxa ay u dhacday sidatan: Bishii Juun, 1985kii ayaan fasax ka qaatay Xerada Tababarka Ciidanka ee ku taala Mandheera, Waqooyi Galbeed, waxa noo dhammaaday tababar ciidan, waxa aanu ahayn ardadii ugu horreeysey ee barnaamijkii loogu magac daray Olalaha Gurmadka Difaaca Qaranka, oo ardada dugsiyada sare ka baxda ay tababar ciidan ku qaadanayeen. Barnaamijkas oo ahaa barnaamij dawladdu ay ugu tala gashay in dadka Soomaalida ah loo diyaariyo tababar ciidan, si haddii loo baahdo ay uga qayb qaataan difaaca dalka. Waxa ay ujeedadaydu ahayd in aan soo booqdo waaaladiinteydii oo degganaa Qoryooley oo ahayd magaaladaydii *'Hometown'.*

Aniga oo aan weli gaarin Qoryooley, Garoowena maraya, ayaa go'aankii aan ugu socday xagga iyo koonfur wax iska beddeleen, waxaana igu dhalatay in aan soo booqdo oday abtigay ah, Allaha u naxariistee, ah oo la iigu sheegay Bandarbayla, oo ku taal xeebta koonfureed ee gobolka Bari. Waxa aannu is helnay, oo yiri anaa abti kula raadinaya nin aanu qaraabe ahayn oo dhawaan geeriyooday, lana oran jirey Ciise Maxamed Ciise, loona yaqaanney Ciise Dharaar, Allaha raxmadiisa ha ka waraabiyee. Aniga iyo Ciise waxa aanu gaari ariga rara ka raacnay magaalada Qardho, waxanuna kaga degganay, oo uu ku ekaa tuulo la yiraahdo Matoorka Jeded, sida aan jeclahayna qiyaastii magaalada Qardho u jirta konton kiilo-mitir(50km) ama gelin socod. Kaddib wax-xuuraansi iyo nasoshaba, waxa aanu bilownay in aan galabtii ka carrowno annaga oo lug ah, xilliggaa Gawaari badani ma jirto dhulka, habeenkaa reer ayaannu la sii joognay aanu isku qoys nahay, subixiina waanu ka kallahnay. Barqaddii goor ay tahay ayaannu ku soo wareegnay oday

tiro(100)ari ah la jooga. Odayga iyo Ciise waa is garanayaan anigana markii uu haybsaday, loona sheegay in aan ahay Ini Suldaan Ibraahim Garyare ayuu i gartay.

Waxyaalaha Soomaalidu kaga duwan tahay ummadaha kale, gaarahaan Afrika ayaa ah in ay yihiin dad aad isu yaqaan, isuna abtiriya marka ay kulmaan ee ugu horreysaba, waxaana ugu wacan waa iyaga oo hal qawmiyada ah, iskuna af ah.

Ciise iyo odaygii wareysi dheer kaddib, ayuu odaygii waxa uu nooga sheekeeyey dhaqan badan oo magaalada yaalla, isaga oo aad dareemeyso in uu u ekaa nin weligii magaalo joogey, laakiin markii aan Ciise sii wareystey waxa uu Ciise ii sheegey in uusan odaygu weligii magaalo ku noolaan, in uu safar u aado mooyee. Ninkaa odayga ah wax raad magaalo ah oo iiga muuqday ma jirin, marka laga reebo in uu watay buraashad ay biyo ugu jireen oo aan u malaynayey in uu biyo weeyso ah ku sitay. Nasiib darro odayga magaciisa halkan kuma xusi karo oo ma aanan weydiin Ciise intii uu noolaa.

Arrinta kale oo iyana caddeyneysa fiiro-dheeraanta iyo dareenka Soomaalida waxa ay tahay, barnaamij aan ka daawaday Televisionka/Shaashadda CNN. Barnaamijku waxa uu ku saabsanaa sidaan horey u sheegayba, dardaaran iyo wacyi gelin loo jeedinayey ciidammaddii Maraykanku u diray Soomaaliya, xilligii uu xafiiska hayey George Bushkii weynaa. Waxa miiska wararka laga baahiye*(News-room),* soo fariistay nin oday ah, isla markaana ciidammadda Badda Maraykanka*(American Marines),* kamid ahaa, laakiin markaa hawlgab noday*(Retired Military*

*Veteran*). Odaygu ciidammadda ayuu siinayey wacyi gelin waxa uuna ku lahaa;

*'iska ilaaliya dadka Soomaalida ahi lamidma aha Afrikaanka kale, waa dad aad u fiiro dheer xogtana markiiba hela, khatartooduna badan tahay, wararkana isugu gudbiya si deg deg ah'.*

Waxaana dhici karta qorsheyaashiina dagaalka in ay xataa wax badan ka ogaadaan, maaddaama ay yihiin dad aad ugu dheereeya xagga war helidda, oo uu markaa ula jeedo in ay yihiin dad aad wax u basaasa, *'Spies'*. Waxa uu sii raacshay in kooda aqoonta leh, waxna akhriya iyo kan aan aqoonta lahayniba ay isku mid yihiin.

Sheekh Xassan Daahir Aweys, oo hadda kahor idaacad laga wareystay, isaga oo lagu eedeynayo in ay hayaan oo ay marti geliyeen dad ajaaniib ah, dalalkoodana dambiyo ka soo galay. Waxa uu Sheekhu ku jawaabay, in aysan macquul ahayn in Soomaalida cid kale ku dhex dhuumato, Soomaaliduna tahay hal qoys oo is wada yaqaanna, waxa uuna yiri Sheekh Xassan[22]:-

*"Martida aniga caawa ii timmaadda derisku waa ogyahay oo markiiba inta la ii yimaado ayaa waxa la i weydiinayaa wixii war ahaa ee martidu sheegtay, waxaana kale oo la i weydiinayaa maaddaama marti ii joogto in*

[22]Sheekh Xassan Daahir waa hoggaamiye Islaami ah, muddana ku soo jiray dacwada iyo u hiillinta Islaamka iyo Muslimiintaba, isaga oo muddo badan xarrig iyo dhibaato kaleba ku mutaystay u khidmeyntaas uu diinta u khidmeynayey, wuxuuna ka soo jeeda qoys diin iyo Alle ka cabsi lagu yaqaan, Allaha Xafido

*aan u baahanahay gogol aan martida ku seexsho iyo wax uun dhawrto/sooryo ah in aan deriska uga baahanahay".*

Sidaa darteed bulshada sidaa isaga war haysa ama isugu xiran ayaannu nahay, oo ma dhici karto in nala ku dhex dhuunto, wixii nin Soomaali ahi ogyahayna cid walbaa og.

Dhacdooyinkan waxa aan u soo qaatay in aan muujiyo in aysan Soomaalidu ahayn dad wax isaga qasan yihiin, oo waxa ay rabaan in ay sameeyaan ay yihiin kuwo ogsoon, ha wanaagsanaato ama ha xumaatee. Waxa laga yaabaa ummaddaha kale in laga helo dad aqoontoodu gaarsiisan tahay in ay kala saari waayaan wanaag iyo xumaan, heerka garashada looga baahan yahay in lagu kala saaro labadaasna, waa wanaagga iyo xumaantee, aysan lahayn.

Waxa aad mararka qaarkood moodeysaa ama kuu muuqaneysa in aan wax farqi ah u dhexeyn dadka Soomaalida ah ee wax bartay, maaddadii la doono ha barteene iyo kuwa aan weligood meel wax lagu barto ka ag dhawaan. Inkasta oo ummad walba oo nidaam darro iyo burbur ku dhaco laga helayo astaamahaas, ileyn dawladnimada iyo kala dambeyntu waa waalide, '*government is parental*'. Haddana Soomaalidu ma ahan dad dawladnimo keliya ay ka burburtay ee waxa ka burburay dadnimadii ummadda iyo wixii keydka u ahaa intii ay jirtay oo dhan. Waxa kale oo aan qabaa sida aan horey u soo xusayba, in aan Soomaalidu dawlad aqoon, dawladnimana soo marin, laakiin ay ka baaba'een hantidii kale ee ay ummaddu ka dhaxashay awoowayaashood, sida *run sheeggii, xishoodkii, gar-qaadashadii, ixtiraamkii, hankii, is qaddarintii iyo dulqaadkiiba.*

Kuwaas oo ummaddu u ahaa hanti maguurto ah inta aan gumeystuhu u iman, dawlad ku sheeggan uu la yimina aysan ummadda fasahaadin. Kama wado in ummaddu wada noqotay sidaa/caynkaa, laakiin sidii ay waagii hore dadka badankiisu u lahaayeen dhaqanka wanaagsan ayaa maanta lidkeeda inta badani la soo shaac baxday dhaqan xumo aynaan ab iyo isirtoona u lahayn.

Naxariistii janno Alle ha ka waraabshee oday adeerkay ah oo la oran jiray Xaaji Siciid Maxamuud Cumar, ayaa makhaayad cunto iyo mid jiif oo isku jira ku lahaa tuulo u dhow Kismaayo lana yiraahdo Haadweyne. Xaajigu waxa uu ii sheegay in ay maalin wada sheekeysteen nin markaa isagu isku sheegay in uu dalxiis yahay, una dhashay Austraaliya oo kamid ahaa dadkii qolalka jiifka kireystay. Ninkii waxa uu Xaajiga u sheegay in Soomaalida oo dhammi ay tahay sirdoon/wardoon, oo uu ula jeedo in ay aad u weydiiyeen ninka wareysi dheer, oo badanaaba lagu yaqaan ragga wararka doona ama amniga ilaaliya, caadona u tahay dhaqankaan oo kale[23].

1994tii ayaa waxa aan daawaday barnaamij aad dhaxalgal u ahaa uuna soo diyaariyey nin mar macallim ka ahaa Jamaacaddii Ummadda Soomaaliyeed, qaybteeda waxbarashada ee Lafoole, haddana dhintay allaha u naxariistee. Ustaadkaa waxa la oran

[23]Ustaad Cismaan Jaamac Daahir waxa uu kamid ahaa macallimiintii ugu horreysey ee Soomaaliyeed, wuxuuna bare ka ahaa magaalada Hargeysa markii xornimada la qaatay kaddib. Cismaan waxa uu kamid ahaa dad badan oo muddo qurbaha ku noolaa, dareenna ka qabay waxa ay mudan karaan da'yar badan oo dibadaha ku dhashay, kuna barbaarey, Allaha u naxariisto.

jiray Cismaan Jaamac Daahir, barnaamijkiisana waxa uu ugu magacdaray *'Dhanna-seegnimo' 'In-Between'*. Barnaamijku waxa uu ku saabsanaa farqiga iyo kala fogaanshaha u dhexeeya carruurta ku dhalatay qurbaha iyo eheladooda ku harey dalkii ee aan iyagu qurbaha u soo qaxin. Sida magaca barnaamijlka ka muuqatana Ustaad Cismaan ayaa u dhexeeyey laba bulsho ee labada meelood oo kala duwan ku kala nooleyd, maaddaama uu isagu labada nololoodba wax ka yaqaan oo la soo tacaaley.

Barnaamijka waxa jilayaal ka ahaa Cismaan laftiisa, wiil qurbaha ku korey, isaga oo yarna qurbaha la keenay, laguna magacaabi jiray Mahdi, dhaqanka Soomaalidana aan wax badan ka aqoon, Soomaliguna ku adag yahay iyo odaygii Jaamac Daahir ahaa, oo dhalay Cismaan Allaha u naxariistee, oo isna miyiga Burco jooga, wax fikrad ahna aan ka haysan qurbaha iyo dhaqanka reer Galbeedka. Waxyaalaha lama illaawaanka ah ee aniga xusuusta gaarka igu reebay waxa kamidahaa: Ustaad Cismaan ayaa waxa uu ka sheekaynayaa yaraantiisii markii uu miyiga joogay ee uu ahaa kureyga Nirgaha loo diro, in maalin maalmaha kamid ah uu aabbihii ku yiri; -

*"Orod aabbe nirgaha soo xeree roob baa inahayee".*

Ustaadku waxa uu yiri:-

*"xilligaa aabbe nirgaha ii dirayo cirku xataa wax caad ah ma lahayn saansaan roobna iima muuqan koley aniga".*

Wuxuu intaa sii raacshey Markii aan nirigti ugu dambeysay xerada Geela soo geliyeyna raxmaddii Alle ayaa nagu billaabatay. Ustaadku waxa uu yiri waxa aan la yaabay aragti dheerida iyo

dareenka aabbe, haddana kama muuqan amase uma diyaarsaneyn waxa uu kaga hortago roobka nawada qooyey. Ustaadku waxa uu intaa sii raacshay konton(50)sano kaddib aabbe waxa uu degganyahay meeshii aan maalintii kaga tagey, wax isbeddel ah oo iiga muuqdaana ma jiro sidii ayaa biyihii marna u qaadaan marna loo waayaa, oo ay abaar u tahay.

Ustaad Cismaan barnaamijkiisii waxa uu ku soo gabagabeeyey in Soomaalidu tahay dad markiiba fahma waxa soo muuqda, laakiin aan kayd iyo ka tabaabushaysi dambe midna lahayn. Waxa uu kale oo rajo weyn ka qabey horumar xagga nidaamka dawliga ah in ay Soomaalidu sameyn doonto maaddaama dadkeeda reer miyiga ahi yihiin dad dareen dheer, Afrikada kale ee madowna ka horreeya. Sidaa darteed Ustaad Cismaan iyo ragga aynigiisa ah ayey ahayd in isku xirka nolosha ay halkaa ka ambaqaadaan, laakiin waxa muuqatay in ay lumiyeen booskii ay bulshada ku lahaayeen, maaddaama nolol kale oo aan ummaddu garaneyn ay u boodeen oo ay banneeyeen howshii ay lahaayeen.

Waxaanse la inkiri karin in noloshii uu ku soo korey Ustaad Cismaan, oo ahayd tii miyiga ay muhiim ahayd in isagu uu hormariyo maaddaama qoloba qolada ka dambaysaa ay nolosha tadawur iyo horumarin ku sameyso. Laakiin Ustaad Cismaan waxa uu ahaa mid raja dhigay markii caasimmaddii labaad ee dalka oo Hargeysa ah, waxna ku soo bartay, macallina ka ahaa, ay dumiyeen diyaarado ka kacay gegi Hargeysa ku taal, waa sida uu hadalka u yiriye, arrintaasina waa mid dhacday oo taariikhda ku xusan. Sida badanaaba dhacda, Soomaalidu waa dad qoys ah, isuna laaya, iyaga oo mararka qaarkood iska aar-goosta. Sida aan anigu qabo, dadka Soomaalida ah ay aragtiyadooda ku sheegaan,

waxa Soomaalidu lahaan jirtay dad la yiraahdo *BIRI-MA-GEYDO*, loolana jeedo, dad badan oo aan dagaallada ka qayb ahayn sida:

- INAN-LAYAALKA, oo ahaa ninka reer xididkii la deggan.
- WIILKA ABTIGA loo yahay ama*(aysin)* loo yaqaan, oo gabari keentay.
- DADKA DA'DA AH
- DHALLAANKA
- MARTIDA
- CULUMMADA
- DUMARKA
- ERGADA

Waxa kale oo dhacda in markii laba qoys ama beelood ay islaayaan in afka laga sheega, oo la yiraahdo waxa daggaalammay laba beelood oo walaalo ah ama deris ah. Arrintaas oo ah mid aan damiirka fiyoobi qaadan karin, oo nabaddii hadda la iska wareysanayey, aysan u muuqan mid afka baarkiis dhaafsiisan.

Anigu, runahaantii, waxa aan ka soo jeedaa qoys kamid ah qoysaska nabadda laga doono, oo qoys walba waxa nabadda iyo kala dambaynta lagu tuhmaa ninka ama qoyska reerka odayga u ah sida *'ISIM* ama *DUUB'* amase *SALAADIIN'* sidaa darteed nabad ninkii ka shaqeeyey ama doonay ayaa garan kara micneheeda. Ujeeddadeydu ma aha in aan qoraal dheer ka muujiyo hawlo badan oo arrimahan iga soo maray muddaddii aabbahay dhintay "*Suldaan Ibraahim*" Allaha u naxariistee, kaddib, oo qoyskaygu ay ii igmadeen in aan booska aabbahay

buuxiyo. Sidaa darteed nabadda afka-baarkiisa saaran ee Soomaalidu dhaqanka u leedahay, ma aha mid la garan karo, wajiyo badan ayaana loo yeelaa.

# CUTUBKA SHANAAD

# QABIILKA(QABYAALADDA)

*"Hadaynaan xumaanta iyo dilkiyo, daynin kala qaadka,*
*Dibaddaan ka joognaa sharciga, daacadda Ilaahe,*
*Danbarkeedu waa Jahannama, iyo dogobkii naareede,*
*Dugsi ma leh qabyaaladi, waxa ay dumiso mooyaane".*

***Cabdullaahi Suldaan Maxamed(Timacadde) naxariistii Janno Allaha ka waraabiyee, 1967kii***

Tixdani waxa ay kamid tahay gabaygii dheeraa ee *"Dhagax-dixeed"* waxa kale oo lagu magacaabaa *"Dugsi malahan qabyaaladi waxay dumiso mooyaane"* ee uu tiriyey Cabdullaahi Suldaan (Timacadde) naxariistii Janno Allaha ka Waraabiyee, sannadkii 1967kii[24]. Sidaa si lamid ah waxa isna dareenkiisa ka muujiyey Allaha raxmaddii janno haka waraabiyee Xaaji Aadan Af-qallooc, oo isna tilmaamey aayo xumada qabyaaladda, Soomaalina la hartey, Xaajiguna waxa uu yiri:

*Waxan qabiilkii aakhirey reer ifriiqiya'e,*
*Abaarta iyo colaadubu anay ila rafiiqaane,*
*Arradka iyo gaajada ayaan ehel wadaagnaaye,*
*Waxa ay dhalay ibliisiyo jin iyo odayo sheydaane,*

[24]Cabdullaahi Suldaan Maxamed(Timacadde), waxa taariikhdu sheegtaa in uu gabaygan ka tiriyey goob ay ugu yeereen qoyska uu ka dhashay, iyaga oo doonayey in uu u gabyo ama maago qoys kale oo ay is hayeen qoyskiisa, Alle mahaddii waxa uu ugu jawaabay gabaygan taariikhda galay, habboona in baal dahaba lagu qoro, si dadka Soomaaliyeed ee qabyaaladdu madax martay uga faa'iideystaan ama ugu quus qaataan, Allaha u naxariisto halyeygaas.

*Abtirsiino kala sooc baa ii iskuulla ahe,*
*Aji iyo sab anaa ka dhigey duul walaalo ahe,*
*Dabkaan ololiyaa lagu gubtaa meel haddaan imiye,*
*Iimaan la'aantiyo dhibtaan ebid jeclaadaaye,*
*Awood waxan u leeyahay khilaaf inaan abuuraaye,*
*Isku diridda iyo baan aqaan laydinka adkaaye".*

***"Xaaji Aaden Af-qallooc"***

Runahaantii, gabayadan, waxa ay kamid yihiin gabayo dhawr ah oo dareen gaar ah igu reebay, waxaana filayaa, gabyaagu markii ay tirinayeen gabayadan, waxa is waafaqsanaa afkooda iyo uurkooda. Sababta aan saas u leeyahayna waxa ay tahay, xaajadu haddii ay basharka saameyn weyn ku yeelato daacadnimadeeda ayaa sax ah, tixahaan gaagaabanina waxa ay caddeyn u yihiin waxa qabyaaladi tahay, abwaannaduna si wanaagsan oo waafiya ayey u saafeen.

Dad badan oo Soomaali ah ayaa waxa ay isku khaldaan ama ku adkaata in ay kala saaraan waxa ay ku kala duwan yihiin qabiil iyo qabyaalad, waxaana laga yaabaa in ay isku milmaan ama isku qasmaan waxa ay kala yihiin. Labadan erey wax weyn kuma kala duwana, haddana qaabka dhismaha naxwaha iyo erayada waa kala duwan yihiin, oo qabiil waa magac, lab, keli ah, mana xumaan karo haddaan lagu xumaan falin, waxa uuna lamid yahay sida geed, libaax, buur, qof iwm. Qabiil waa isir iyo farac Soomaalidu ku abtirsato taas oo ay ula siman tahay bulsho-weynta dunida ku nool oo sidaas faracoodii hore u raad-raaca.

Qabiilnimadu/qabyaaladdu waa magac, dhedig keli ah, waana fal ay dadku isugu faanaan ama ku xafiiltmanaan, sida Qabiil weyn, qabiil tiro yar, qabiil xun, qabiil xoog badan, qabiil laandheere ah, qabiil laan-gaab ah, qabiil wanaagsan, qabiil takooran, iwm, sidaasna waxa ku mecneeyey Qaamuuska Afsoomaaliga ee sannad kahor ka soo baxay dalka Jabuuti.

Qoraa Mansuur oo isna aad ugu dheeraaday, dabaggal badanna ku sameeyey qabiilka Soomaalidu sheeg-sheegato ayaa aaminsan in uu yahay *"Isbahaysato"* dani isu keentay, laakiin aan asal ahaan farac iyo firtoonna wadaagin. Mansuur aragtidaas waxa uu ku xoojinayaa maahmaahyada Soomaaliyeed ee ah

- **Tol waa tolane**(macnaha waa dad la isku tolay, laakiin aan ab iyo isir wadaagin).
- **Tol waa tog**(sida toggu uu u leeyahay ilo badan oo isu yimi ayaa tolkuna u yahay reero badan oo dani isu keentay, laakiin aan isku isir ahayn).
- **Tol waa qobtol**(qobtol waxa laga wadaa heeryada awrta lagu heeryeeyo, oo ka samaysan lakabyo kala sarreeya ama abjadka).
- **Reewin kebda aroos wu**(maahmaahdani waa maahmaah may-may ah, micneheeduna yahay Raxanweyn waa sida kebdaha oo kale, waayo Raxanweynta ayaa caado u leh markii gabdhaha la arooso in ay aqalka ama yeesha u soo ururiyaan si gabadhii loo maamuuso, aqal laba dar-yaalle ahna loogu dhiso, Soomaali badana ayaana dhaqankaas leh).

Waxa kale oo jira gabay loo tiriyo marka la doonaya in qof la toleeyo, oo reerka lagu soo darayo, gabayganna waxa lagu waraabiya geela, oo Soomaalidu aad u jeceshahay. Gabaygaana waxa kamid ah tixdan:

- *Yaa Tallaabi Galay*
- *Oo Tolkay Noqon*
- *Oo Tol aan Tegin*
- *Taagi ii Noqon*

Arrintani waa mid muujinaysa in qabyaaladda Soomaalidu ku adduun iyo aakhiro seegtayba ay tahay mid aan asal-ahaan u jirin, laakiin la isku ka-kabay.

Wax ceeba ma ahan in qabiilka loo arko tilmaan beeleed oo keliya ee aan laga laalaadin koor ceebeed. Marka arrintan dhabnimo loogu daadago, nin xun qabiil waa ka dhashaa, hase yeeshee Qabiil xumi bulsho kama dhasho. Waxa kale oo jirta in aan ninna dooran qabiilka uu yahay ee waa Alle(swt) kan qabiilka ama qoyska u doora qofka, Allaha u naxariistee Abwaan Abshir Nuur Faarax(Abshir Bacadle), oo arrintaa gabay ka tiriyeyna waa tii uu lahaa:-

*"Qaddartaa iga hiilisee qolo ma sheegteene".*

Guud ahaanba, Soomaalidu waa ay ku xadgudubtaa qiimaynta xubnaha bulshada ugu firfircoon oo lagu dhaadan karo. Ninka wanaagsan oo nabadda jecel waxa lagu naanaysaa *"Miskiin jilicsan"* meesha kana aan xishoon ama aan runta badneyna la caleema saaro, lana yiraahdo *"Waa nin rag ah."*, *"Waa shan iyo*

*tobnaad"*. Ninka wanaagsan oo hormuudnimo ku habboonna la kahdo, isna dhanka kale la yiraahdo:- *"Nin door aan ninkaaga ahayn nin baas baa la yiraahdaa."*

Sida aan horey u soo xusayba, qabiilku ceeb ma leh, ummadda oo dhammina qabiil iyo shacab bey ku abtirsataa, sida ku cad suuradda **Xujraad** aayadeeda **16aad**, Alle[25]. Dhanka kale haddii aan ka eegno Soomaalida ma ahan dad aan garanayn amase dareensanayn in wajiga wanaagsan iyo dhanka samafalka qabiilka lala aado, waxaana jirta murti Soomaaliyeed, Soomaaliduna ku caddeynayaan wanaagga iyo adeegsiga qabiilka.

Murtidaasina waxa ay tahay:

Qabiil qiimihiisu waa:

- Nin qaldan qabashadiis!
- Nin qumman quweyntiis!
- Nin qatan quudintiis!

Hawraartani ma aha mid sahlan ee waa mid macno weyn oo waafiya ku dhisan, wanaag iyo iskaalmaysi hagaagsanna tilmaamaysa. Waxa aan xasuustaa xilliggii ururkii la dagaallamayey midab kal soocii,*'Apartheid'*, Koonfur Afrika ee la

---

[25]Suuratul-Xujraad, waxa uu ku sheegay 'in dadka laga yeelay shucuub iyo qabaa'ilo si laysu garto, waxaana idin kugu fiican kan cabsida Alle idin kugu badan'.

oran jiray African National Congress*(ANC)*[26], haddana talada dalka haya. ANC waxyaalihii ay ku dagaallami jireen, oo hal-kudhigyada*(slogans),* u ahaa waxa kamid ahaa in aysan marnaba dadka Afrikaanka ah ama qabiilooyinka Afrika ee wada degganaa dhulka aan la kala saarin. Kala saariduna ay tahay guusha nimanka ku soo duulay ee ah caddaanka tirada yare ee Afrikanerka loo yaqaan oo asalkoodii ka tagey meelo kamid ah dalalkaYurub(Netherland).

Sida taariikhda ku xusan Dutchka oo ah magac loo yaqaan dadka reer Netherland ayaa qaaradda Afrika yimi 6dii Abriil, 1652kii markii uu soo caga dhigtay ninkii la oran jiray Jan Van Riebeck, meesha loo yaqaan Cape oo ah meesha ay maanta ku taallo magaalada Cape Town. Qabiilooyinka dega dalka Koonfur Afrika oo aan isku af ahayn, dhaqan ahaana kala duwan, isdhex gal guurna uusan ka dhexayn, ayaa waxa ay door bideen in aysan marnaba oggolaan in laga dhex faa'iideysto.

Waayo waxa ay aaminsanaayeen in ay sax tahay in qaaraddan Afrika dadka Afrikaanka ah ay leeyihiin, dadka qaaradaha kale ka soo haajirayna, waxa ay mudan yihiin in ay ahaadaan marti

[26] ANC = *African National Congress,* Ururka Qarammada Afrika, oo ah Ururkii u dagaallami jiray xuquuqda iyo xorriyadda dadka tirada badan ee madowga reer Koonfur Afrika, lana dagaallamayey xukunkii caddaankii tirada yaraa ee dalkaas ka arrimin jiray wixii ka horreeyey 1994kii. ANC waxaa la aas-aasay 8dii Jannaayo sannadkii 1912kii, talada Koonfur Afrika ee maantana isaga ayaa gacanta ku haya.

edeb leh oo aan lagu xad gudbin[27]. Waana kuwo adeegsan jiray halhayska ah: *"Africa of the Africa, by the Africa, for the Africa"*[28] oo ay ula jeedeen in Afrika ay leeyihiin dadka Afrikaanka ah, ee aysan lahayn dadka doonyuhu keeneen"

*Haddaba, dadka Soomaalida ahi qabiilka sidee ayey u yaqaanaan? Ma qabaan in uu yahay mid lagu gaari karo caddaalad iyo sinnaan? Xalse ma u noqon karaa?*

Haddii aad muddo yar siiso in aad dhegeysato koox Soomaali ah oo markaa ka sheekeysanaya arrimaha Soomaalida iyo dhibaatada Soomaalida haysata, waxa aan shaki ku jirin in dhammaan kooxdaa doodaysa ay isku raacayaan in dhibaatada Soomaalidu tahay qabyaaladda iyo qabiilkii oo la dhex gashay hannaankii siyaasadda *(Politicising Clan).*

---

[27]Dadka Madow ee ku dhaqan Koonfur Afrika, halgan dheerna la galay caddaankii tirada yaraa ee ka soo hayaammay qaaradda Yurub, waxa ay ahaayeen kuwo ka gudbay in ay qolo qolo isu qaybiyaan, taas oo dan iyo faa'iido u ahayd caddaanka tirada yaraa ee siyaasadda mida-takoorka(Apartheid)ku hayey ummadda reer Koonfur Afrika ee dhulkoodii lagu soo weerarey, khasiyad iyo faduulna loola yimi.

[28]*Africa of the Africa, by the Africa, for the Africa* waa halhays ay lahaan jireen dadka reer Koonfur Afrika iyaga oo muujinaya in Afrika ay dadka Afrikaanka ahi leeyihiin, laakiin aan Caddaanku qaaradda waxba ku lahayn, wixii uu ku joogana ay tahay xoog iyo cabburin uu ku hayo dadka qaaradda u dhashay ee madow. Hal-kudhigani waxa uu lamid yahay jawaabtii uu madaxweynihii Maraykanka ee Abraham Lincoln,kaga jawaabay markii dawladnimada wax laga weydiiyey, taas oo ahayd '*Government of the people, by the people, for the people.*

Waxa kale oo dhici karta haddii qadar saacado ka dib ah la is weydiiyo maxaa xalku ku jirana, in haddana isla kooxdii ay xalka u aragto in qabiil wax lagu xalliyo. Runtii, qabiilka Soomaalidu ma aha mid xad leh meelna ku dhammaada, waxaana lagu masaalaa in uu yahay sida BASASHA oo kale. Waxaana sidaas loo yiri basashu ma leh meel ay ku hakato oo marka baal la fiiqaba mid kalaa diyaar u ah in isna la fiiqo, ilaa la gaadho guntii ay basashu ka bilaabatay. Waxaana daliil cad u ah in aan qabiilka Soomaalidu meelna ku hakan, Soomaalidu sideedaba qabiilkeedu waa danaysi ee ma aha mid asal iyo xad ku dhisan, labadii meesha isugu soo hartaaba iyagaa is dhuganaya, dabadeedna meeshii colaad iyo is qaqabsi ka bilaabaya.

Oday la yiraahdo Xaaji Cali Ismaaciil, dhawaanna ku geeriyooday deegaanka Yagoori ee gobolka Sool, Allaha u naxariistee, ayaa maalin nooga sheekeeyey, sheeko uu isagana nin kale oo dhintay uga sheekeeyey.

Sheekadu waxa ay ahayd: ninkii Xaajiga u sheekeeyey ayaa waxa uu ku noolaan jiray dalka Brazil, waxa uuna ku ahaa keli dalkaas, waa dambe ayaa waxa dalka soo galay nin Soomaali ah. Kaddib waxa uu haybsaday in wax Soomaali ah dalka joogaan, dabadeedna ninkii horey u joogay baa loo keeney oo la yiri ninkan ayaa Soomaali ah. Markii la is wareystay oo uu soo dhaweeyey ayuu waxa uu ku yiri gurigaana seexo, meeshaana ka shaqee. Muddo kaddib ayaa isna waxa yimi nin kale oo Soomaali ah, isagiina waxa loo keenay labadii nin ee horey u sii joogtay dalka.

Soo-dhaweyn iyo sooryeyn kaddib, ayaa ninkii ugu horreeyey ee meesha joogay, waa ninka Xaajiga u sheekeynayee, labadii kale ee gadaal ka timi habeen habeenadda kamid ah casumaad u fidiyey. Markii cashadii la cunay ayuu waxa uu ku yiri:- i maqla, caawa waxa aynu nahay saddex nin, haddii nin afraad inoo yimaado anigu waan idin ka guurayaa oo waxa aan aadayaa dal kale, idinkuna meeshiina jooga.Markii la weydiiyey waxa ku xambaaray in uu guurana waxa uu ku yiri:-

*'Hadda waad is jeceshihiin, waxaana laga yaabaa in aad laba midood tihiin, waa midda hore in aad isku qoys tihiin, oo aad sidaa kuwada joogtaan, ama in aad kala qoys tihiinoo aydaan waxba is yeeli karin, laakiin haddii berri mid kale yimaado, oo laba idin kamidahi isku qoys noqoto waxa dhici karta in kii qoyska kale ka joogay geeska la geliyo'.*

Ninkiina waxa uu raggii kale dareensiiyey in uusan jecleyn in uu goob joog u ahaado, waayo waxa uu sii raacshey in uu Soomaali iyo qabyaaladeeda Soomaaliya uga soo hayaamay, haddii la iga daba keenana waan ka sii guuri. Xaajigu waxa uu intaa noo raacshay, sidii uu ninkii sheegayey ayaa dhacday, oo nin kale ayaa yimi mid ka- mid ah nimankii ayeyna isku qoys noqdeen, waxaana dhacday in kii qoyska kale ahaa ay gees galiyaan. Xaajigu waxa uu yiri ninkii oo soo guurey ayaannu isku baranney dalka Netherland, halkaas buuna sheekada iigu sheegay, isaga oo sababaynaya wixii Netherland keeney, Allaha u naxariisto Netherland in uu ku dhintay ayaa Xaaji Cali noogu daray.

Xaaji Cali, waxa uu nagu yiri:- ninkii odayga ahaa wax badan ayuu iiga faa'iideeyey dhaqanka Soomaalida iyo caadaadkooda,

waxa kamid ahaa waxyaalihii aan ninkaa ka faa'iideystey, oo uu ii sheegay. Waxa uu yiri ninkaasi:- Soomaalidu waxa ay isu dhow yihiin nooc xayawaanka kamid ah, noocaasi waa nooc aan wada joogi karin, haddana aan kala maqnaan karin. Runtii, Xaaji Cali, waxa uu illaawey xayawaankii Soomaalida lagu sifeeyey in ay isu dhaqan dhow yihiin, laakiin waxa uu yiri waxan filayaa in uu ahaa xayawaanka *Eyga,* oo aad Yurub iyo reer Galbeedkaba looga dhaqdo, waxa uuna ku sababeeyey oo yiri siina raacshay, tusaalana u soo qaatey.

Haddii aad aragto laba qof oo laba ey kala wata haddii ay waddo ku kulmaan.Waxa dhacda in labadii ey isu soo ololaan oo is ur-ursadan, qadar yar kaddib waxad la dareemaa iyaga oo isku kacay, oo madaxa isla galay, lamana garan karo wax ay isku qabteen, marka horena waa isu soo hiloobaan, dabadeedna waa kuwo is-maan dhaafa. Dhaqankaas waa kan aan Soomaalida ku bartay ayuu yiri ninkii Xaajiga u sheekeeyey oo isagu aaminsanaa in uu tijaabo iyo tajruboba ku sameeyey Soomaalida. Xaajiga waxa la waydiiyey taariikhda ay ninkaa kulmeen waxaana filayaa in Xaajigu noogu sheegay 1969kii oo ahayd markii Xaajigu Yurub soo galay[29].

Waxa aan aad ula yaabay maqaal uu nin Ingiriis ah ka qoray shirkii Dooxada Eldoret, ee loogu magac daray in la isugu keenayey hoggammiye dagaaleedkii iyo madaxyo-weynta

[29]Xaaji Cali Ismaaciil, waxa uu ahaa oday Soomaaliyeed, sharaf iyo diinna Alle(swt) ku manneystay, dadnimo iyo deeqna lahaa, bilowgii sannadkii hore, 2013dii, ayuu Xaajigu ku geeriyooday deegaanka Yagoori ee ku dhaw degmada Laascaanood, gobolka Sool.

qabaa'illada Soomaalida. Waxa shirkaa barbar socday oo aan isla goobta ka dheereyn shir kale, oo isana lagu heshiisiinayey garabyadii isku hayey siyaasaddii Suudaan, dawladda Suudaan iyo jabhaddii SPLM/A, ee u dagaallameysey xuquuqda Koonfurta dalka Suudaantii hore. Suxufigu qoraalkiisa waxa uu ku bilaabay, waxa aan la kulmay dhawr qof oo kamid ah wufuuddii meesha joogtay ee Soomaalida matalaysay, waxa aan weydiiyey qof walba wixii uu xalka u arkayey. Qof kasta waxa uu ahaa mid soo dhaweynayey xalka, oo waxa uu tilmaan cad ka bixinayaa sida xalku u muuqdo. Waxa cajiib ah ayuu suxufigu yiri:-

*"markii qolka ama qaacadda shirarka dib loogu noqdo waxa aan isbeddel ka dareemaa jawiga shirka, sababta oo ah ayuu yiri:*

Xubnihii bannaanka aan ku wareystay markii ay hoolka shirarka soo galaan waxa ay ay la soo baxaan wajiyo cusub oo ka duwan kii ay lahaayeen markii bannaanka la joogay, ee aannu sheekeysanayney. Guud ahaan wafdiga Soomaalidu ma ahayn dad kala qo-qoban, oo waa la isku dhex jiraa, waana lawada shaaheynayaa, wax dareen colaadeed ahina kama muuqdo. Haddana markii ay danta guud timaaddo iyo arrintii meesha loo yimi oo ahayd dib u heshiisiinta, waxa kuu muuqanaysa in aan xaajadu xaajadii hore ahayn.

Dhanka kale qoladii matelaysay wufuudda Suudaan, dawladda Suudaan iyo Mucaaaradkii, ayaan iyana la kulmay, waxaana wareystay dhawr qof oo iyana kamid ahaa wafdiyadii kala duwannaa ee labada dhinac. Sidii Soomaalida ma ahan oo xalka si deg-deg ah ula soo boodi maayaan, laakiin way kuu

muqanaysaa in wax la taaban karo oo dhib ah oo loo baahan yahay in xal laga gaaro uu meesha yaallo, meesha aan fahmi waayey waxa Soomaalidu isku hayso oo aan qabiil ka ahayn. Waxa intaa dheer ayuu weriyuhu yiri:- wafuudda Suudaan ee labada garab isku meel ma degganeyn, sheeko dheer oo ka baxsan in hoolka shirka la isugu yimaadana ma jirin, waxaana aaminsanahay in aysan badankoodu is fahmeyn marka laga reebo rag aan badneyn oo Carabiga kuwada hadlaya mooyee. Markii ay hoolka ku laabtaana qolyihii matelayey wafdiyadda Suudaan guud ahaan, waxa markiiba ii muuqaneysey in la abbaarayo meesha sartu ka quruntay, waxaana soo if baxaysay markiiba in xal laga gaaro wixii la isku hayey ee mabda' *(principle),* ahaa marka laga reebo arrimmo yar-yar, oo farsamo iyo dhammaystir u baahan.

Ninkii wariyaha ahaa qoraalkiisii waxa uu ku soo gabagabeeyey, arrimihii aan meesha ku soo arkay waxa ay ahaayeeyn laba rrimmood oo qaabka guud isaga mid ah. Dabcan meesha waxa loo wada joogay dib u heshiisiin, laakiin qolana wax jira oo ay isku haysay ayaa muuqatey, oo waa dawladda Suudaan iyo mucaaradkeeda, waxa ayna u badneyd in hoawshaasi dhammaato, qolada kalese, waa Soomaalidee, waxa ay isku hayeen ma caddeyn marka laga reebo in kursi ku dagaallan aan anigu fahmi waayey qaabka loo maareyn karo uu meesha yaalley. Taas oo caddeyneysa in aan wax heshiis ah oo leh rukummo la taaban karo meesha ool, wax cad oo la isku hayeyna iyana iigama muuqan.

Sidii uu saadaaliyey weriyuhu ayey noqotay, shirkii waa laga wareejiyey, Eldoret, waxaana la geeyey Embigati, Soomaaliduna

u taqaanney Doofaarrey, oo dadkii shirkaa ka qayb galay ayaa sheegay in ay markii hore ahayd xero Doofaarka lagu xannaanneeyo. Laakiin shirkii Soomaalida loo beddelay meeshii Doofaarrey loogu yeeri jiray, shirkiina waxa uu qaatey muddo laba(2)sano ku siman, wax dhammeys ahina kama soo bixin, meesha mashaakilkii Suudaan lagu xalliyey maalmo kooban[30].

Sheekh Cumar Faaruuq Xaaji Cabdi-suldaan, raxmaddii janno Allaha ka waraabiyee, ayaa hadda kahor muxaadaro noo qabtay, waxa uuna kaga hadlayey dhibta Soomaalida haysta iyo waxa ay isku hayaan. Sheekh Cumar waxa uu dadkii hor fadhiyey weydiiyey, su'aalo dhawr ah oo cilmi-nafsi ah*(Psychological questions)*. Su'aalahaana waxa kamid ahaa: haddii qof walba la weydiiyo oo la yiraahdo,*'kee ku xiga wiilkaaga iyo aabbahaa,* maxaad ku jawaabaysaa, amase tee ku xigta *hooyadaa iyo gabadhaada',* maxaad iyana ku jawaabaysaa.

Runtii, haku mashquulina jawaab uma heli kartaan, sidaas ayaa loogu wareerayaa haddii la is weydiiyo waxa Soomaalidu isku hayso, ayuu Sheekh Cumar ku sii daray su'aalihiisii. Sheekh Cumar waxa uu intaa raacshay in uu la kulmay dad badan oo Muslimiin Carab iyo Cajabba ah, kana muuqato ayuu yiri: in ay u damqanayaan dadkaa Soomaaliyeed ee Muslimiinta ah, waxa

[30]Major Armed Conflicts: *Colaadaha Hubaysan ee Waaweyn*, waxa jirey qorshe dib-u-heshiineed oo Madaxweynihii hore ee dalka Maraykanka George. W. Bush ku dhawaaqay kaddib weerarkii lala beegsaday daarihii Mataanaha(Twin Towers) ee New York sannadkii 2001dii. Qorshahan xal u helidda ah ayaa arrimahooda siyaasadeed lagu eegayey dalal badan oo caalamka ah, qulqulado siyaasadeedna ka socdeen, Soomaaliya iyo Suudaana kamid ahaayeen.

ayna i weydiiyeen waxa ay Soomaaalidu isku hayso oo loo garan la yahay cudurka jira si daawo loo helo. Sheekhu waxa uu yiri xaqiiqdii jawaab aan nimankaa walaalaha ah ku qanciyo waan waayey, dabadeedna waxan ku iri, aniga oo raba in aan dareensiiyo in aanan jawaab hayn ama iyagaba uga war rooneyn ayaan waxan ku iri: Sidii uu Rasuulku(csw) ugu jawaabay markii isaga iyo asxaabta uu u yimi Malak-ul-Jibriil caleyhi salaam, sida ku cad xadiiskii dheeraa ee Cumar Binu Khadaab(rc)werinayo,[31] soo saarey, kaddib markii Jibriil ku yiri Rasuulka(csw*): iiga warran saacadda?* Jibriilna ula jeeday saacadda qiyaame goormey dhaceysaa? Rasuulku waxa uu ugu jawaabay, 'saacadda xilligeeda, kan la weydiiyey kama oga kan weydiiyey', sidaa darteed taasi waa Cilmi Alle(swt) xaggiisa jira. Sidaa si ku dhow ayaan anna walaalihii ugu jawaabay, sababta oo ah xataa anigu iyaga ugama cilmi badni su'aasha ay i weydiiyeen[32].

Hadalkaa Sheekh Cumar runtiis ayey ahayd, oo xataa cid Soomaali ah oo suureyn kartay ma jirin waxa Soomaalidu isku haysay wixii ka horeeyey dhisidii Dawladdii Embigati iyo kuwii ka dambeeyey oo midda hadda joogtaa ay kamid tahay; Dawladdahaas oo loo aaneeyo in ay dammaanad iyo saxiix siiyeen, in ay dalka soo galaan ciidamadda waddamadda deriska la ah Soomaaliya, Itoobiya iyo Keenya. Kuwaas oo la aaminsan

[31]Sida ku sharraxan kitaabka Afartanka Xadiis ee Imam Muxiyaddiin Yaxya Ibnu Sharaf al-Nawawi

[32]Sheekh Cumar Xaaji Cabdi-suldaan Xaaji Maxamuud(Cumar Faaruuq), wuxuu kamid ahaa culimmada Soomaaliyeed, wax badanna dacwo ku soo jiray, wuxuu Alle(swt) oofsaday bishii Maarso 8dii, sannadkii 2011kii, wuxuuna ku geeriyooday magaalada Jeddah ee Boqortooyada Sucuudi Caraabiya.

yahay in aysan dan Soomaali marnaba wadin, laakiin dano gumaysi iyo la dagaallan diimeed meesha u soo galeen, iyaga oo kaalmo caalami ah haysta. Waxa intaa dheer kuwa iyana magaca Afrika wata ee Uganda, Burundi iyo Sierra Leone, oo iyana qandaraasyo yar-yar wata, kaalmo buuxdana u ah kuwa deris ku sheegga la yiraahdo(Xabashida iyo Keenya).

Dad badan ayaa haya hadalkii uu ka jeediyey Jaamacadda Maryland, magaalada Washington. D. C. bannaankeeda ah bilowgii sannadkii 2004tii madaxweynihii hore ee Kenya, Daniel Arap Moi, markii uu xilka ka degey. Moi waxa uu si kal iyo laab ah ugu nuux-nuuxsaday in aysan marnaba caqliga geli karin in dawlad Soomaaliyeed soo noqoto, waayo waxa ay cabsi iyo argagax ku tahay annaga Keenya ah iyo Itoobiyaba, wixii dhacayna taariikhda ayey ku qoran yihiin, sidaa darteed yaan lagu riyoon in aanu raalli ka noqono dawlad Soomaaliyeed, mar kalena taariikhda gasha.

Waxa aan goobjoog u ahaa mar uu booqasho ku yimi magaalada Stockholm ninkii markaa shirkii Nairoobi garwadeenka ka ahaa Danjire Bethuel Kiplagat, isaga oo ay casumeen saraakiil ka tirsan wasaaradda Arrimaha Dibadda ee dalka Sweden, waxaana su'aal laga weydiiyey hadalkii Moi. Kiplagat isaga oo careysan, isuna haysta in su'aashaa la weydiiyey aysan ahayn mid sax ah, ayuu waxa uu ka sheekeeyey sheeko dheer oo dhex martay isaga iyo Maxamed Siyaad Barre 1980kii, runtii, sannadkii ma xasuusto. Waxa uu ahaa mid aad u dhaliiley dhaqankii Barre, isaga oo ku sifeeyey in uu ahaa nin kibir badan, iskalana weynaa dadka Afrikaanka ah. Intaa kaddib waxa uu dadkii ku yiri:-

*'Ma waxa aad rabtaan haddii aad Soomaali tihiin in aad sidii Barre oo kale aad dalalka deriska ah marwalba u arbushtaan?.* Isaga oo hadalkii sii wata su'aashiisiina ka jawaabaya ayuu sii raacshay:- *'Taas mar dambe qorshaha urur goboleedka IGAD[33], oo isagu uu wakiil shirka uga ahaa, iyo caalamkuba ma qabali karaan wax lamidah wixii Barre sameyn jiray'.*

Hadal kale, oo aad mooddo in uu hiil u yahay warkaa ka soo yeeray saraakiisha Keenya, ayaa isna ka sheegey aqalka labada gole ee Maraykan(Congress), ninka lagu magacaabo Johnnie Carson, aqalkana u qaabilsanaan jiray Arrimaha Afrika. Carson muddo dheer ayuu ka ahaa safiir dalal badan oo qaaradda Afrika kuyaal, Keenya iyo Ugaandhana kamid yihiin, haddana ah la taliyaha xagga amniga ee madaxweynaha Maraykanka Barack Hussein Obama. Carson waxa uu sheegey in ay ku guul darreysteen dagaalkii ay kula jireen Islaamiyiinta Soomaaliya, sidaa darteedna loo baahan yahay in dalka loo qayb-qaybiyo gobollo, awoodna loo yeelo qabaa'iladda Soomaalida, si awoodda Islaamiyiinta looga hortago, taas oo u muuqata mid sii fideysa[34]'.

---

[33]IGAD = *The Intergovernmental Authority on Development,* waa urur goboleed ay ku bahoobeen dalalka dhaca Bariga Afrika, Geeska Afrika iyo kuwa kulaala Haraha, wuxuu ka kooban yahay siddeed(8)dal, urur goboleedkan waxa la aas-aasay bishii Jannaayo sannadkii 1986kii, waxaana xarun u ah magaalada Jabuuti ee dalka Jabuuti.

[34] Johnnie Carson waa nin ah Maraykanka madow(Afro-America), muddana ka soo shaqaynayey qaybta Arrimaha dibadda ee dalka Maraykanka, muddana Safiir ka ahaa Afrikada Bari iyo tan Koonfureedba meelo kamid ah, Keenya, Ugaandha iyo Zimbabwe. Wuxuu ahaa ninkii beddelay Jendayi Frezer, oo horey jagada arrimaha Afrika u qaabilsanayd

Hadalkaasi waxa uu ahaa xaqiiqda dhabta, oo ay heshiis ku yihiin, Itoobiya, Kenya iyo asxaabtooda reer Galbeedku. Dad badan oo Soomaaliyeed, oo aad mooddo in ay dhoohan yihiin ayaan weli warkaasi u bixin.

Nin Soomaaliyeed ayaa waxa laga hayaa isaga oo nin kale maagaya*"Cadduur weli dhow-dhowdu uma dhicin"*,iyada oo la dareensan yahay in uu ahaa nin kasmadiisu gaaban tahay amase aan horey waxba u fahmin. Wixii intaa ka dambeeyey arrinta Soomaalida ha lagu kala aragti duwanaado, laakiin madaxeeda iyo majaheedaba waa la arkaa, waana la dareemi karaa waxa hadda la isku hayo; uma jeedo hadda in aan ku dheeraado mowduucaas, ee waa iga xusid.

Sheekooyinkaas iyo dhacdooyinkaaasi waxa ay marag ma doonto u yihiin, in aan Soomaalida qabiilkeedu xataa ahayn dood adag oo muujinaysa in qabiilku Soomaalidu sheeg-sheegtaa uu ku taagan yahay rukummo adag. Laakiin uu yahay xaabo markii la doonaayo wax lagu shido, oo ku meel gaar ah. Meesha waxa marwalba macne samaynayaa ay tahay dantii aynu horey u soo aragnay oo ahayd in qofka Soomaaliga ah uu marwalba laba waji ku eego wixii markaa socda, wajiga saxda ah ee uu aaminsan yahayna uu yahay kan dantiisu ku jirto, laakiin wajiga kale uusan ahayn mid isaga khuseeya, howshiisana aan ahayn. Qabiilku waxa uu kamid yahay kuwa marwalba danta laga eegayo ee ma ahan mid macno weyn qofka Soomaaliga ah ugu fadhiya, waxa uuna qabiilku la meel noqonayaa aragtidii uu

---

dawladda Maraykanka, isna waxa 2013kii, bishii Maarso beddelay Donald Yamamoto, oo isna ah nin Maraykan Asian(Asio-America) ah.

ka qabay, caddaaladda, dawladnimada, diinta, magaalada iyo nabadda.

Dhammaan qaybihii hore, ee aan ka soo sheekeyney, waxa ay u muuqdeen kuwo marwalba laga eegayey danta uu qofka Soomaaliga ahi leeyahay. Marwalbana dantii uu qofku lahaa ayuu shaygaas u bandhigayaa, haddii dantii iyo sheygii is qabsadaana sheegaasi waa kii la rabay oo saxda ahaa, haddii kalese, ma aha mid u cuntamaya, dabadeedna sheygaasi waa in uu iin yeesha, isla mar ahaantaana laga horyimaadaa.

Dad badan baa waxa ay aaminsan yihiin in aan Soomaalidu ahayn dad is indho buuxsha, oo qaddarinta iyo maamuuska ay isu hayaan waxa ka weyn kay ajaaniibta u hayaan, diintuu doonto ha haystee. Haddii dhan laga eego, waa ay wanaagsan tahay, in xushmad iyo soo dhaweyn loo muujiyo qofka martida ah, laakiin martidu nidaam iyo xeer bay leedahay, martina noqon mayso haddii xeerarkaasi jabaan, oo ay dhacdo qaybo martida kamid ahi in ay jabiyaan xeerarkaas.

Waxa aan qabaa in Soomaalida qabiilka, dawladnimada, mabaadiida iwm aysan u kala soocneyn, waxaana taa aan ku caddeynayaa arrin aan goobjoog u ahaa qaarna ay sheeko igu soo gaadhey. Midda aan goob joogga u ahaa waxa ay tahay: aniga iyo oday aanu qaraabe ahayn oo dhawr sano kahor ku dhintay carrigga Maraykanka, Allaha u naxariistee lana oran jiray Cabdinuur Maxamed Cabdulle, laguna naaneysi jiray Cabdi goobbe, ama Cabdi Great, Greatna waxa uu ahaa Xisbi kamid ah axsaabtii dalka ka jirtay kacaankii kahor, ahaana xisbi lagu

tiriyo in uu u janjeerey xagga siyaasadda reer Bariga*(Hantiwadaagga)*.

Waxa aanu ahayn aniga iyo oday Cabdinuur kuwo fadhiyey meel laga qaxweeyo, oo ku taalley degmada Wardhiigley, kuna dhaweyd jidka xaafaddii loogu yeeri jiray Cali Kamiin. Waxa nala soo fariistay oday, waxa ayna is gacan qaadeen oday Cabdinuur, waxa ayna iila muuqdeen dad horey isu yaqaanney, laakiin u ekaa in ay muddo kala maqnaayeen, waayuhuna kala qariyey, xilliggaasina waxa uu ahaa bartamihii sannadkii 1988kii.

Is-nabdaadin iyo iswareysi kaddib, ayaa odaygii noo yimi waxa uu bilaabay in uu ka sheekeeyo wixii uu la kulmay intii ay isaga iyo Cabdinuur is moogaayeen oo aan u maleynayo in ay ahayd muddo aan yareyn. Odaygii waxa uu noo sheegay in uu ka yimi dhankaa iyo Itoobiya, kana mid ahaa dad dhawaan dawladdu cafis u fidisay, kana faa'iideystay cafiskaa, isla markaana quus kaga soo tagey jabhaddii uu raacay ee Somali Salvation Democratic Front(SSDF) [35] oo mar uu hoggaamiye ka ahaa Cabdullaahi Yuusuf Axmed.

Waxyaalihii uu odaygu noo sheegay waxa kamid ahaa, in ay qabeen in la la dagaallammo dawladdii markaa jirtay, laakiin ay dad badan oo jabhadda kamid ahi, oo weliba rag sare sare ku jiraan ay qabeen in nimanka dawladda saraakiisheeda kamid ah,

---

[35] Somali Salvation Democratic Front, *Jabhaddii Badbaaadada iyo Dimuqraadiyadda Soomaaliya*, waa jabhaddii ugu horreysey ee bilowda mucaarad hubeysan, cadowgii Soomaalida ee Itoobiyana saldhig ka dhigatay, dubbihii dalka lagu dumiyeyna kamid ahayd.

oo qoys ahaana iyaga xiga, aysan lamid ahayn kuwa kale ee dawladda ku jira, laakiin ay yihiin niman tol ah, oo la khalday. Odaygu waxa uu yiri:- haddii ay sidaa u dhacdo oo ay noo kala sokeeyaan, hal nidaamna ay ka wada tirsanyihiin raggu, laakiin kuwii nala reerka ahaa aan dhib loo arag, yaa markaa lala daggaallammayaa oo la diiddan yahay? Anigu goobtii ay ka dhacday ma joogin, laakiin Soomaali badan baa sheegta warar aad u soo noq-noqda, wararkaasi waxa ay leeyihiin, markii jabhaddii United Somali Congress(USC)[36], saraakiil kamidahi la wareegeen taladii dalka gaar ahaan caasimaddii Muqdisho.

Waxa soo ifbaxay in ay damceen in ay macquul tahay in la soo dhaweeyo oo tala la weydiiyo saraakiil badan oo degaanka ah, kana tirsanaa nidaamkii lala dagaallamayey, iyada oo kuwo kalena loo arkayey in lala dagaallammo, lana soo qabto, isla markaana lagu eedeynayo in ay dambiilayaal yihiin dhib badan iyo tacaddiyona dadka Soomaaliyeed u geystey.

Waxa madax sare ka noqday gobollada Waqooyiga dalka, dadka qaarna u yaqaan Somaliland, saraakiil sar sare oo nidaamkii dalka ka talinayey meelo sare kaga jiray. Gobolladani waxa ay ku dhawaaqeen in ay ka go'een dalka intiisa kale, iyaga oo ku andacoonaya, in ay la kulmeen caddaalad darro siyaasadeed iyo mid bulshaba, taas oo kaga timi nidaamyadii dalka xukumayey.

[36]United Somali Congress, *Ururkii Mideynta Soomaaliyeed*, waxa ay ahayd jabhad kamid ah jabhaddii dalka dumiyey, dhib badanna geestey, sida tii SSDF iyo weliba Somali National Movement(SNM), *Dhaqadhaqaaqii Qaranka Soomaliyeed.*

Arrintaasi waa mid muuqata, waxaana jira in kuwii loo tirinayey in ay nidaamka kamid ahaayeen ee gobolladaa u dhashay in loo arko niman dalka iyo deegaankaba u dhashay. Meesha kuwa kale la tuhunsan yahay in ay gobollo kale ka yimaadeen ayna yihiin niman dambi ka galay dadka gobolladan dega.

Saddexdaa dhacdo, oo aan qiyaasayo in ay yihiin kuwo isu dhow dhow, ayaad mooddaa in caqliga Soomaalidu ku salaysan yahay, marka laga hadlayo xiriirka u dhexeeya qabiilka Soomaalida, nidaamka iyo dawladnimada. Waxaana iska cad in aysan u kala soocneyn qabyaaladda iyo dawladnimadu, oo aad mooddo in Soomaalidu marwalba col la tahay ninkii aan reerkeeda ahayn, laakiin kan iyada reer ahaanta u xigaa uusan marnaba ahayn mid dhib iyo luggooyo u geysta reerkiisa, xataa haddii uu nidaamka uu ku jiro yahay mid dadka dhibaato u geysta. Taasi waxa ay kooxo badan dhaxalsiisey in aysan waxba gaari karin maaddaama qabiilka, qabyaaladda iyo hadafka ay afka ka sheeganayeen, in la xaqiijiyana u baahan uusan ahayn mid u kala baxsan.

Sidaa darteed, Soomaalidu ma aha dad ay u caddahay waxa ay diidayaan iyo waxa ay doonayaan. Waxa dhici karta in ay wax iska jecel yihiin badankood, laakiin jaceylku ma ahan mid gaarsiin kara wixii ay higsanayeen maaddaama aan waxba u kala soocneyn. Soomaaliduna waxa ay ku maahmaahda *'Doqontu hal il bay leedahayoo, ishana sokeeyahay ku aragtaa'*.

*W*axa sheeko igu soo gaadhay in laba qolo oo aan sidaa u kala fogeyn marka laga eego asnaamta qabiilka ee ay soomaalidu caabudo. Labadaas qolo waxa ay ku dagaallameen deegaanka la

yiraahdo *'Ceelcad'*, oo kamid ah deeggaannada Soommaalidu degto, ee gacanta Xabashida ku jira. Labadii qolo markii ay tabari kala kaxeyn weyday ayaa qolo waliba habar wacasho iyo yaa tol ahey u dhaqaaqdey. Qolo waxa ay tagtay Gaalkacayo iyo maamulka Puntland, halkaas oo ay is la haayeen waa laydin kaga soo ciidamin doonaa, qoladii kalena waxa ay aadday, xaggaa iyo Caabudwaaq oo ay iyana ka filanayeen in looga soo ciidamin doono. Qoladii Gaalkacayo aadday, waxa ay soo heleen maleyshiyaad tuuto loo soo geliyey, oo la yiri waa ciidammada amniga ee Puntland oo qoyskooda ah.

Intii aysan soo gaarin qoladii kale oo iyana heshey maleeshiyaad ka yimi Caabudwaaq, farriintiina soo gaadhay in ciidan tuutaysan ku soo maqan yahay, ayaa waxa labadii ciidan soo kala dhexgalay ciidammo Xabashi ah oo aan war qabin, koox wareegtana*(Mobile group)* ah sidaasna aan u badneyn. Qoladii ka timi Caabudwaaq, oo sugaysay qoladii Gaalkacayo ayey isku dhaceen ciidammadii Xabashida. Waxa dhacday in Xabashidii dabada loo rogey, iyaga oo qolada Caabudwaaq ay aaminsan yihiin in ay qoladii Gaalkacayo ka timi, dharbaaxo ku dhufteen. Qaddar yar kaddib waxa loo sheegay in waxa ay laayeen ay Xabashi ahayd, qoladii Gaalkacayo ka timina aysan weli soo gaarin.

Waagii ayaa ku baryey qoladii Caabudwaaq, taasi waxa ay sabab u noqotay in labadii qolo kala badbaadaan, qolo welibana ay meeshii ka cararto maaddaama Libaaxii deegaanka, Xabashi, waa siday Soomaali badan xilliggan aaminsan tahaye, ay rag ka laayeen. Halkaa waxa ka cad in Soomaalidu iyadu isu geesi tahay iyaduna is aragto, laakiin aysan cadowgeeda marnaba il nacab ku

fiirin, laakiin iyadu isu tafa-xaydato, sida uu Xaaji Aaden Af-qalloocba horey u sheegey:-

*"Ingiriis iyo Talyaanaad sidii Nabi addeecdaane,*
*Idinna sida aboorkiyo tukaha yaysu aragtaane,*
*Wax addoommo laydinka dhigay uumiya kale'e*
*Hadba kii ajnabiyoo yimaad daba ordeysaane,*
*Nimaydaan aqoon baad fadliga u ictiqaaddaane,*

Nin aanu saaxiibbo nahay, lana yiraahdo Maxamuud Cabdisalaan Hoolif, laguna naaneyso Xayle, oo runahaantii, ah nin maasooyinka qabta, sidoo kalena aan dareensanahay in uu kamid yahay ragga maansooyinka curiyo, ayaa waxa uu iiga sheekeeyey sheeko dhex martay Maansayahankii weynaa ee Soomaaliyeed, dhawaanna Alle(swt) oofsaday ee Maxamed Xaashi Dhamac(Gaariye), Allaha u naxariistee, odayo iyo siyaasiin markaa u gacan haadinayey dagaalkii ka dhacay Gobollada Waqooyi ee Soomaalida sannadihii 1990naadkii. Kaas oo u muuqday awood ku dagaallan u dhexeeyey laba nin oo labaduba dhintay, lana kala oranjiray Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal iyo Cabdiraxmaan Axmed Cali, Allaha labadaba u naxariistee.

Gaariye, oo dareensanaa in aan marnaba adeegsiga qabiil meel weyn lagu gaareyn, dawladnimana lagu hanan karin ayaa tiriyey gabayga caanka ah ee *'ERGO'* oo ah gabay aad u dheer meelo badanna taabanaya, abwaannkuna ku hal-qabsaday Abwaan Hadraawi oo ay saaxiib ahaayeen, miraha gabaygana waxa kamid ahaa:-

*"Qul acuudu Billahi, Idaajaa Nasrullahi. A-raxmaan iyo Qaaf, iyo Alif-laam-ra isirteediyo, waxan maanta Al-haakum ilhaanka uga bilaabay. Hadraawow indhaweydba sidaydii ma ahaynoo, waxan ahay nin arkaaya, waxan uumku u jeedin, oo keligii anfariirsan, waxan ahay nin arkaya, maankaa laaha ogsooniyo iyo asraarta dhex yaala, isha laacu ka muuqdo, waxan ahay nin arkaaya ummadayda tasowday ee usha loo qabanwaayey"*

Xayle waxa uu yiri Gaariye dhulkii waa ka dhoofey oo xaggaa iyo qurbaha ayuu u hayaammay, waxa uuna soo laabtay sannad uu iigu sheegay in uu ahaa 1997kii, markaas oo ay socotay doorasho lagu dooranayo xubnihii maamulka ee Soomaaliland ama Waqooyiga Soomaalida ninba sida uu u yaqaan. Dad badan ayaa Gaariye markii uu Hargeysa soo caga dhigtay u tagey, kana codsadey in uu u duceeyo, maaddaama gabaygii Ergo uu ahaa mid guhan ah, habbaarna ka muuqday.

Gaariye oo ahaa nin maskax iyo garasho Alle ku maneystay ayaa dadkii ducada ka dalbay ugu jawaabay: in uusan habaarin, laakiin uu la taliyey taladii uu maalintii hore siiyeyna aan la qaadan isbeddelna uusan ka muuqan wixii uu ka taliyey. Gaariye waxa uu dadkii u sheegay ama uga sheekeeyey wixii Soomaali ahayd gumeysiga kahor, waxa uuna hadalkiisii ku bilaabay: Soomaalida oo ahayd dad noloshoodu ku salaysantahay nolol miyi, nidaam iyo kala dambeyn ku salaysan dhaqan ay markaa iyagu samaysteen, ayna fahmayeen ayaa Islaamku soo gaadhay dhulka Soomaalidu degto. Nidaamkii suubbanaa ee Islaamku keenay ayeyna koodii waafijiyeen, waxaana soo baxay dhaqan dadku yaqaan oo aan dhib lahayn.

Kaddib waxa yimi, oo dadkii iyo dalkiiba qabsaday gumeyste gaalo ah, dadkana aysan is fahmeyn. Muddo dabadeed, dadkii waxa ay noqdeen kuwo ku kaca gumeystaha, lana dagaallama. Gumeystihii waxa u soo baxday in uusan dadkan waxba ka faa'iideyn, dabadeedna waxa uu go'aansaday in uu gacanta u gesho xukun iyo sharci aysan garaneyn, niman uu soo urursaday, dadka dhexdoodana aan macnoweyn ku lahayn, oo ka kooban, cunto kariyaal*(Cooks)*, darawallo*(Drivers)*, dullaalliin *(Brookers)* iyo day-day*(Gangs)*, ayuu gumeystihii ku yiri dalkii idinka ayaan idin kaga tagey, sharciganna ku maamula. Nimankii dalka looga tagey, laba arrimood midna ma samayn:

Waa tan koowaade, dadkii madaxda looga dhigay isma oran, dhaqankiinii iyo kii Islaamka ee aad haysateen ayaan dawladnimada ku salaynaynaa. Waa midda labaade, isma oran kan aad haysataan shaqaynmaayo oo dalka iyo dadkaba waxa aan ku dhaqaynaa kan gumeystuhu noogaga tagey, ee waxa ay madaxa isu geliyeen kii gumesytuhu uga tagey iyo wixii raad ahaa ee ka harey nidaamkii dadku lahaa ee ka horreeyey gumeysiga. Gaariye waxa uu ku tilmaamayaa dawladnimada in ay tahay Geenyo, geenyadana si ay taran u reebto waxa ay ahayd ayuu leeyahay Gaariye in Faras loo raadsho, taasina ma dhicin oo Dameer ayaa geenyadii loo qabtay. Sida la wada ogsoon yahay, haddii ay kulmaan labada Jinsi ee fardaha iyo dameeraha, Soomaalidu waxa ay tiraahdaa waxa ay iska dhalaan Baqal, baqashana waxa la yiraahdaa ma aha noole tarma oo wax ka haraan.

Gaariye waxa uu warkiisii iyo taladiisii ku soo gabagabeeyey, in qabyaalad iyo nin jecleysi lala hoos galay wixii dawladnimo la

oran jiray, oo aynaan awalba aqoon. Taasi waxa ay meesha soo dhigtay in taran laga waayo dawladnimadii, ileyn wuxu in ay tarmaan ayaa habboone.

Baqasha uu Gaariye tilmaameyna waa dawladnimada Sooomaalidu raadinayso maanta oo ah mid aysan aqoon, gumeysina ku luggooyey, nidaan qalaad oo diinteenii iyo dhaqan Soomaalidu leedahayna aan ku salaysnayn, illaa maantana iyadii ayaa hadba darbi aan jirin laga raadinayaa[37] Soomaalidu qabiilka waa ku awrkacsataa, oo markii ay u aragto in uu dantooda u adeegayo ayey isugu habar wacataa, waana arrin iska macruuf ah oo aan la isku inkirsaneyn. Laakiin markii ay gaadho dantii ay ka lahayd qabiilka, ha ahaato mid shakhsiyeed ama mid kooxeede, qabiilkana waa ka carartaa, oo waxa laga yabaa in wax nidaam u' eg uu afkoodu soo tufo mararka qaarkood, taas oo aan dhafsiisneyn carrabka iyo labadiisa daan.

Haddii ay dhacdo in wax sadbursiinyo ahi ka maqan yihiin waxa ay meel walba la taagan yihiin xaajadu ma buuxdo oo waxbaa ka dhiman. Midaas oo loola jeedo reer hebel baa meesha ka maqan, laakiin markii la aaminsanyahay, in dantii la gaadhay, waxa daba socota qaranka iyo ummadda yaan la qasin ee hala badbaadiyo. Qaranku soow kii ma aha shalay lagu

[37] Maxamed Xaashi Dhamac(Gaariye), wuxuu kamid ahaa abwaannada Soomaaliyeed, welibana kuwa ugu hal-abuurka wanaagsan. Gaariye wuxuu kamid ahaa macalimiintii Soomaaliyeed ee ka qalin jabiyey Kulliyaddii Waxbarshada ee Lafoole 1970naadkii, Allaha u naxariistee Gaariye wuxuu ku geeriyooday Isbitaal ku yaal dalka Norwey, magaalada Oslo 30kii Sebtember 2012kii.

eedeynayey in uu dulmiyey qayb ummadda kamid ah goorma buuse qaran dhab ah oo aan cidina ku dulmaneyn noqonayaa? Amase noqon karaa, haddii xalaalnimadiisu ku xiran tahay in reer walba markooda awrka ku kacsadaan?

Awr ku kacsiga qabyaaladda ee Soomaalidu aad u adeegsato waxa gabay ka tiriyey Abwaan Hadraawi, isaga oo cabbiraya in Soomaalidu markii ay doonto ku danaysato, markii ay danteedii gaartana aan dib u eegin qofkii ama qoyskii ay ku dan gaareen. Hadraawi oo gabaygiisa ku muujinaya hooyo iyo gabadheeda sheeko dhex martay, kuna saabsan daneysiga Soomaalida, kuna hal qabsanaya Sheekh culimmada Islaamka kamid ahaa, dad badan oo caqiido ahaan khaldana ay ku fidnoobeen, lana oran jiray Sheekh Cabdulqaadir Al-Kiilaani, laakiin Soomaalidu u taqaan Sheekh Cabdulqaadir Al-Jiilaani, kuna aasan dalka Ciraaq.

Hadraawi gabaygiisa waxa uu ku bilaabay:

*Islaantii hayinkeeda kolkay heeriga saarto,*
*Kolkuu hinjin waayey, Tiri hayaay Cabdulqaadir hareer qabo awrka,*
*Hibooy inanteena ayaa tiri Hooyo maxaa horta Sheekhu inoo yahay haybta,*
*Waxa ay tiri hoogto habboonow hayinkeenu, kolkaan heeriga saarnay,*
*kolkuu hinjin waayo, ayaan ku hadaaqay ee habeen ma wadaagno.*

Gabaygan oo aad ka dhadhansan karto danaysiga Soomaalida ee qabyaaladda ayaa laga dareemi karaa in kala duwanaasho badani ka jiro adeegsiga qabiilka ama qabyaaladda Soomaalida.

# CUTUBKA LIXAAD

# QURBAHA

*"Waxan is lahaa anigu, kolkay afarta jibiyo adduunyada u kala qaxeen hambadii wax baa harin, marna waxan iraahdaa dhegahaa ka awdalan, marna waxan iraahdaa Alle ka cabsi baan jirin, marna waxan iraahdaa u kas bay u baabi'in"*

***"Abwaan Maxamuud Cabdullaahi Ciise(Sangub)"***

Soomaalidu dareenka ay ka qabtay magaalada mid lamidah ayey ka qabtay qurbaha ama qurbo joognimada. Dhawaan kahorow dad badan oo Soomaali ahi ma aheyn kuwo qurbaha u dhoofa.Qofka qurbaha ka yimaadana waxa loo yaqaaney ama loogu yeeri jiray qurbajoog marka laga reebo dad yar oo dani waddo ama howlo kale dibadaha u aada mooyee. Soomaalida, qurbo galkeedu kama horeyn bilowgii qarnigii hore, labaatan aad(20) ee Miilaadiga ama bartamihiim saddex iyo tobnaad(14) ee Hijriyada, dadkuna ma aheyn kuwo qurbe u hammuun qabey, nin dani baddo mooyee.

Taariikhahaan, Soomaalidii ugu horreysey ee qurbaha soo gasha waxa ay u badnaayeen dhallinyaro miyiga ka soo hayaantay, dabadeedna magaalooyinka soo galay. Markii ay ku adkaatay noloshii magaaladuna, raacay maraakiibta reer Galbeedka ee soo mari jiray xeebaha Soomaalida. Dhallinyaradaasi waxa ay u qaybsameen kuwo maraakiibtii ay soo raaceen waddammadda Carabta kaga harey iyo kuwo shaqo ka helay maraakiibtii, oo badmaaxiin*(seaman)* noqday.

Kuwan waxa ku xigay kuwo iyana xilliggii gumeystuhu dalka haystay loo soo direy waxbarasho dibadeed oo Jaamacadihii ama Macaahiddii ku yaalley dalalkii Soomaalida gumeystay, waxbarasho u yimi, dabadeedna qaar kamid ahi ay ku negaadeen dalalkii ay waxbarashada u yimaadeen, oo aan dalkii dib ugu soo noqon.

Qolo saddexaad ayaa jirtay, oo iyana nidaamyaddii kala dambeeyey ee dalka soo maray ay waxbarasho u soo direen, iyaguna waxa ay mareen dhabbihii qoladii ka horreysey, oo sidaa ayeysan dalkii dib ugu noqon. Waxa kuwaa xigay qolyihii jabhaddaha ahaa oo nidaamkii militariga ahaa ee kacaanka ku kacay, dabadeedna markii ay jabhadihii baaba'een iyana qurbe sii galay oo aan dib u laaban. Waxa iyana dalkii ka soo qaxay dad badan oo aqoon lahaa una haajiray waddammadda Khaliijka, iyaguna waxa ay ku biireen kuwii Yurub iyo Maraykan u sii hayaamay, oo aan dalka dib ugu laaban.

Waxa layaab lahayd in dad badan oo hantiley ahaa iyo qaybo kamid ah madaxdii dalkuba ay reerayowga iyo dhallinyaraddiiba u soo daabbuleen dalalka reer Galbeedka, iyaga oo aaminsanaa in nolol tan ka sarreysa ay meeshaa taallo. Ugu dambeyntii dad badan oo Soomaali ah, ayaa iyana ku soo hayaamay gacan haatin iyo far-malab-u-darid qurbaha loogu sheegay. Laakiin aan iyagu ahayn kuwo dano adduunyo ama waxbarasho u soo baqoolay, oo ay dhici karto in nolol ahaan ay ka wanaagsan yihiin kuwa qurbaha qaxootiga ku ah amase ku nool. Soomaalidu meeshii ay markaa deggan tahay oo ay taqaan, wixii aan ahayna waxa ay u taqaaney dhul shisheeye, mana qabin in lagu negaado, in lagu dhaxo habeenno ama maalmo mooyee.

Nin reer Qardhood ah, lana oran jirey Nuur Cali Qonof, ayaa u soo boqooley, martina ku noqday deegaanno kamid ah Gobolka Mudug. Nuur Cali Qonof isaga oo loo arka nin dhul shisheeye tagey ayaa waxa loo tiriyey gabay ay mirihiisa kamid ahaayeen:

*"Dhul shisheeye dheef ma leh, habeen dhixitin mooyee"*[38].

Gabaygan waxa Nuur Cali Qonof u tiriyey Khaalid Yuusuf Boqor Cismaan, naxariistii janno Allaha ka waraabiye labadoodaba, meesha uu dhulka shisheeye ku tilmaamayo Khaalidna waa Mudug, oo deegaan ahaan u xigta gobolka Bari oo Khaalid iyo Nuurba ku dhasheen, *sidee baa loo arkaa wixii markaa ka baxsan dhulka Soomaalidu degto?*

Waxa jira aragtiyo badan oo laga bixinayo soo dhoofitaanka loo soo dhoofayo dalalka reer Galbeedka, gaar ahaan Yurub iyo Maraykan. Aragtiyadaa kala duwani ayaa qaba in dhacdadaan ah, in la dhoofaa ay lamid tahay dhacdadii dhoofinta dadka ee qarnigii 15aad iyo wixii ka dambeeyey(International Slave Trade) [39] Taas oo muujineysa nooc cusub oo gumeystaha

[38]Nuur Cali Qonof, wuxuu oday Soomaaliyeed, gabyaana ah, waxa uu dhalay nin kamid ahaa siyaasiinta Soomaalida, lana oran jiray Cismaan Nuur Cali Qonof, wuxuuna ahaa saraakiishii ugu horreysey ee rayidka ahayd, lana shaqaysay dawladdii kacaanka, wuxuuna ahaa wasiir kamid ah wasiiraddii lagu dhawaaqay 1970kii, Allaha u naxariisto labadoodaba,

[39]International Slave Trade = *Ganacsigii Addoonsiga Caalamiga ah,* wuxuu qaab ganacsi isweydaarsi, kaas oo dadka madow looga soo rarayo qaaradda Afrika, loona soo daabulayo dalalka Yurub iyo Ameerika, wuxuuna bilowday bartamihii qarnigii 16aad, waxaana la joojiyey 3dii Maarso 1807dii

xeeladihiisa kamid ah. Waxaana arrintaa gabay ka tirisey gabadha abwaanadda Soomaaliyeed, laguna magacaabo Faadumo Axmed Dhimbil. Faadumo oo tilmaameysa eedaha gumeystaha ayey gabaygan ka tirisey dhoofinta dadka ee qarnigan kow iyo labaatanaad(21). Mirihii gabaygii Faadumona waxa kamid ahaa:

*Isticmaarka ooddu dhigiyo odaxdii waa taAlle,*
*Ma ilbixin kuwii aan lahaa wayka aargudane,*
*Iglan baaba loo dhoofiyaa weli addoomiiye,*
*Iib baa amriik loogu direy odayo waaweyne,*
*Almaaniya koley ku tahay nala asqeysiiye,*
*Kol haddey edeegga yihiin oohintiyo ciilka,*
*Uurkii islaantiyo maxaan ugu abuurmaayey,*
*Ooftiyo maxay hooyadey araxda ii saartey,*
*Allahayow awoow iyo muxuu aabbe ii dhalayey.*

Arrintaa oo xambaarsaneyd in loo helo shaqaale jaban dhulalkii ay reer Yurubku ku duuleen oo ahaa qaaradda hadda loo yaqaan Ameerika.Haddii xilligaa shaqaale jaban la soo dhoofiyey oo kharash iyo maskaxba lagu bixiyey maanta waxa jira shaqaale jaban oo dhallinyaro iyo rag xoog ah u badan oo iyagu soo dhoofaya, markii ay Yurub iyo Maraykan soo gaaraana noqda shaqaale jaban oo weliba aqoon xambaarsan. Sidaa darteed rag badan oo wax ka qora dadka soo cabbiraya ee Yurub iyo

kaddib markii madaxweynihii Maraykanka ee xilligaas Thomas Jefferson, aqalka mudanayaasha u gudbiyey go'aan ah in la joojiyo ganacsigan, wuxuuna dhaqan galay sannad kaddib(1808), dalka Ingiriiska ayaa isana saddex todobaad kaddib isna ku dhawaaqay joojinta ganacsigan dadka.

Maraykan ku soo galaya gadiidka kala duwan, doonyuhuna ugu horreeyaan, ayaa qaba in ay yihiin shaqaale aan waxba dhaamin kii qarnigii 15aad ee doonyaha lagu soo daabbulay, waana nooc cusub oo kamid ah xiriirkii addoonsi is weydaarsiga caalamka*(Moderate Slave Trade),* ee qarnigan kow iyo labaatanaad(21) ee Miilaadiga ama shan iyo tobnaad(15) ee Hijriyada.

Haddii shalay reer Yurub lagu eedaynayey in ay caalamka u horseedeen, in dadka sida xoolihii loo kala iibsado, oo suuqyadu ahaayeen kuwo ku tartama iibsiga dadka, cabasho badanna laga muujiyey, ilaa hay'ado sheegta in ay Xaquuqul Insaanka*(Human Rights)* u doodaan ku cadaadiyeen madax badan oo Maraykanka soo martay, in ay raalli gelin ka bixiyaan dhacdadaas.

*Su'aashu waxa ay tahay dadkan maanta qaxaya ee iyagu is geeyey suuqyadda dadka lagu kala iibsado yaa eeddeeda qaadaya, oo lagu cadaadinayaa in ay raalli gelin ka baxshaan?*

Aragtida laga kala qabo qurbaha ayaa dadka Soomaalida ahi weligood ku kala aragti duwanaayeen, oo nin walba meeshii uu markaa is leeyahay miciin bay kuu tahay ayuu ammaanteeda la soo shir tagi jiray. Si aan taas u muujinno waxa aan halkan ku soo bandhigaynaa laba nin oo ilma adeer ah oo mid u dhoofay dhul shisheeye, England, midna dhulkiisii joogo isaga oo geeliisii dhex taagan, ayaa waxa labadii nin dhex maray farriin gabay ah oo ay hawada isu marinayaan. Abokor Cawad Beyle, oo ah ninka qurbaha galay ayaa gabay u soo tiriyey Cilmi Xirsi Beyle oo isagu geeliisii dhex taagan, wax is beddel ahina uusan ku dhicin noloshiisii.

Abokor gabaygiisa waxa uu ku bilaabey:

*Geel iyo ninkii adhi leh bay, Gaajo wadataaye Jiilaalku waxa uu gaadayaa, Guban xagaaftiiye.*
*Geeddiga ha looyaamiyeen, Sida gabraareede Geerida horteed daar cad bay, Gogoshu ii taalle.*
*Gadhka waxan u feedhaa, Sidii Goondharka Cadmeede Gini kuma qadeeyeen haddaan, gurada Noodh oole".*

Abwaan Cilmi ayaa isna gabay jawaab celin ah u diraya ina adeerkiisa ammaaney dhul uusan lahayn, dhaleeceyna u soo jeediyey dhulkiisii hooyo. Cilmi gabaygiisa waxa uu ku hal qabsaday *'Lama Huraan waa cawska Jiilaal',* waxa uu isna gabaygiisii ku bilaabay:-

*Sirta qudhuntay saadada luntiyo, Suurta la afuufay*
*Abokoroow sabaankii na helay, Waa ku sugayaaye*
*Kol uun buu Ilaah kugu sallidi, Gaalka saynta lehe*
*Oo soo kac uun buu ku odhan, Saafur baad tahay*
*Adoo socon ayaad noogu iman, sabadi Beereede!*

Gabaygan ay is dhaafsadeen labada abwaan Allaha u naxariistee, waxa uu ku beegnaa 1940aadkii. Sidii uu Cilmi ku guhaamay/habaaray ina adeerkii oo uu aaminsanaa in uu yahay nin dhulkiisii, dhul kale ka jeclaadey ayaa waxa laga soo rogay dekedda Berbera muddo yar kaddib, taas oo markiiba ku khasabtay in uu laba go' oo cad cad xidho oo uu miyigii iyo meeshii uu shalay caayeyey dani baddo.

Wax aan dhici karin ma aha in meel aadan lahayn oo dad kale sharci u sameystey, maalin maalmaha kamid ah lagaa soo qabto oo lagu yiraahdo meeshan shalaad timi ee iskaga noqo. Haddaba iyada oo sidaas dadka Soomaalida ahi ugu kala aragti duwan yihiin, suurtagal ma tahay in Soomaalidu ay negaansho iyo degsiimo ku noqoto meesha ay u qaxaan oo dani baddo? Waxa aad loo aaminsan yahay su'aalo badanina ka taagan yihiin ku sugnaanshaha ay Soomaalidu ku sugnaato meel qurbaha kamid ah. Waana ay dhacdaa in dad badani meeshaa ku xasilaan oo ay degaan, iyaga oo aan u hanqal taagin meelo kale ama sidii reer miyigii aan awrku u rarneyn.

2008dii, aniga oo magaalada Shariqah, ee dalka Imaaraadka Carabta jooga, lana socda nin aanu saaxiibbo nahay meeshana ganacsi ku haysta deeggaana ku ah, lana yiraahdo Axmed Xaaji Cali Xirsi(ina Cali Jidaal), ayaannu nin Hindi ah, dukaanna haysta waxa aanu ka iibsannay alaab.Ninkii Af-Soomaali ayuu nagula hadlay, waxa uuna ahaa nin ay Axmed aqoon isu lahaayeen. Markii aanu ka dhaqaaqnay ayuu Axmed ii sheegay in ninkani uu Af-Soomaaliga si wanaagsan ugu hadlo.

Waxa aan Axmed sii weydiiyey in ninkani Soomaaliya joogi jiray? Axmed waxa uu iigu jawaabay maya; laakiin saaxiibbadii oo dhan ayaa Soomaali ahaa, oo carruurnimadiisii ayey wada ciyaari jireen. Waxa aan Axmed sii weydiiyey xaggee ayey ahayd meeshaasi? Axmed waxa uu yiri: xaafaddan aynu hadda dhex taaganahay ayey ahayd, oo waxa uu ninka Hindiga ah ii sheegay in dhammaan daarahaan ay Soomaali deggeneyd 1970aadkii ilaa 1980aadkii. Axmed warkii ayuu sii waday oo waxa uu yiri,

laakiin dhammaantood waxa ay u qaybsameen wax Soomaaliya dib ugu noqda iyo wax Yurub iyo Maraykan kala gala.

In Soomaalidu guur-guurto oo aysan meel ku negaan, wax ceeb ah Soomaalida kuma aha, oo weli awrkii baa u raran, oo noloshii miyiga asal-ahaana ka yimaadeen baa weli maskaxdooda ka sii sharqameysa, waxa aadna mooddaa in dad badan oo aan Soomaali ahayni taas ku baraarugsan yihiin. Oraahda Soomaalida waxa kamid ah, *"Soomaalida awr baa loo raraa"*, taas oo macneheedu yahay, haddii degmo Soomaaliyeed oo meel deggan ay soo ag maraan reero geeddi ahi, awrna u raran tahay, waxa dhacda in degmadii nagida ahayd ay iyana awrta rarato oo ka daba guudho reerihii geeddiga ahaa ee saakay ama shalay halkan maray.

Boqoradda dalka Britain Queen Elizabeth II, ayaa siddeetanaadkii(1980), waxa ay qudbad ay marwalba ku leedahay dawladda cusub ee markaa talada dalka la wareegta kaga hadashay, oo weliba codsi kudarsatay, ayna kaga codsanayso saraakiisha cusub ee dawladda in ay u sahlaan dadka Soomaalida la yiraahdo oggolaanshaha degganaanshaha*(Residence Permit)*.

Boqoraddu waxa ay ahayd mid sababaysay codsigeeda waxa ayna raacisay; -

*"in Soomaalidu tahay dad reer guuraa ah, marwalbana meeshii ay dareensan yihiin in uu ka jiro nacfi ka badan kan ay haystaan ayey u guuraan, sidaa darteed haddii aad sharciga degganaanshaha u sahashaan dhammaantood cidi ka harimayso, oo waxa dhici karta in ay wada guuraan oo xataa qaar dalkoodii dib ugu laabtaan".*

Weliba iyada oo isu aragta in ay tahay mid wax badan ka taqaan dadka Soomaalida, maaddaama uu dalkeedu kamidahaa dalalkii gumeystay Soomaaliya, dhaqan ahaana wax ka yaqaan, ayey waxa ay tiri; Anigu Soomaalida waan aqaannaayoo, welibana waan tagey aniga iyo ninkeyga, Philip Duke of Edinburgh, muddaddii ay Soomaaliya gacanta ugu jirtey gumeystaha Great Britain, waxa aan booqday ayey tiri;- magaalada Boorame, waxaana ku calool gashay gabadheyda Anne, oo mar madax ka ahayd Hay'adda Badbaadada Carruurta ee Britain, 'Save the children UK'. Elizabeth, iyada oo khibradda ama aqoonta ay Soomaali u leedahay sii sharraxaysa ayey sii raacisay; qofka Soomaaliga ahi haddii uu waayo meel uu u guuro waxa dhici karta in uu habeenba sariirta uu ku seexdo guriga uu deggan yahay meel ka dhigo, si uu isugu qanciyo in uu guurey[40]

Runahaantii, hadalkaa wax weyn ayaa ka jira, Soomaaliduna ma inkirsana in ay aad u guur guuraan, oo hadda waxa la hayaa waddammo badan oo ay markii hore ku soo qaxeen oo aan maanta lagu hayn dadkii Soomaalida ahaa oo muddo tobon sano kahor joogi jiray. Waa laga yabaa in ay dad cusubi yimaadeen, oo ay kuwii hore beddeleen, laakiin kuwii hore cid badani kama joogto, dalalkaasna waxa kamidah dalka Netherland.

[40]Elizabeth Alexandra Mary Windsor(Queen Elizabeth II) waa Boqoradda dastuuriga ah ee 16 kamid ah 53ka dawladood ee loogu yeero 'Barwaaqa-sooranta'. Waana madaxa Barwaaqa-sooranta iyo xaakimka sare ee Kaniisadda England.

Markii aan imi dalka Sweden horraantii sagaashanaadkii (1990)shaqaalaha ugu badan ee ka shaqeeya tareemadda dalka qaybihiisa kala duwan, waxa dadka soo gelootiga ah ugu badnaa Soomaalida. Muddo ku siman shan(5)sano gudahoodna, qof Soomaali ahi ma joogin, oo waa ay ka wada tageen shaqadii. Badankooduna waxa ay aadeen qurbaha kale sida Yurub qaybo kamid ah iyo Waqooyiga Ameerika, sida Kanada iyo Maraykanka.

Waxa dad badan oo Soomaali ahi ku doodi jireen markii ay dalkooda joogeen in ay qurbaha u aadayaan in carruurtu wax ugu soo barato ama waxbarasho carruurta la doonayaan. Waxa iyana dhacday in dad badan oo sidaa u soo qaxay, qaxootina noqday in markii ay yimaadeen waddamaddii ay waxbarashada carruurta darteed u yimaadeen ee reer Galbeedka, haddana dib ugu safrey waddammo kale oo dalalka Carabta u badan. Welibana waxa jira kuwo iyana Soomaaliya gobolladeeda kala duwan carruurtii dib ugu celiyey si ay wax u soo bartaan.

Qurba-joognimada oo kamid ah waxyaalaha ku cusub nolosha Soomaalida, ayaa iyana Soomaalidu waji kale ku aragtaa. Wajigaasi waa mid aan ka duwaneyn kii ay ku eegayeen mawaadiicdii aan soo xusay ee kor ku sharraxan. Weli Soomaalidu uma muuqato kuwo deggan oo meel nagi ku ah, waxaana soo baxaysa in ay weli geeddi yihiin, lamana garan karo goorta iyo meesha ay awrta ku furi doonaan. Imaatinka qurbaha ee Soomaalida, dhibaatooyin badan oo aan Soomaalidu dhaqan iyo nidaam u lahayn baa ka soo if baxay. Dhaqamadaas waxa kamid ah furriin badan oo xad dhaaf ah, haddana la aaminsan yahay in badankood been u badan yihiin oo ay u muuqato in

lagu khaldayo nidaamka waddammada lala jooga, si sadbuursiinyo iyo lacago saa'ida ah loogu helo. Midaas oo u muuqata in ay dhaawac iyo ceebeyn ku tahay diinta Islaamka iyo dhaqankii suubbannaa ee Soomaalidu lahayd.

Dhacdadaasi oo noqotay mid burbur ku keentay qoysas badan oo awal wada joogay, maaddaama ay meesha soo gashay waxa aan habbooneyn oo aan waddo sax ah ku iman. Waxa kale oo jira dhibaatooyin badan oo saameeyey qoysas badan oo kala maqan, kaddib markii tuhun iyo shaki soo galay dhab ahaantooda. Waayo nidaamka dalalka ay joogaana qayb kamid ahi waxa ay aqoonsan yihiin amase oggol yihiin in xaasaska iyo carruuraha kala maqan la isla baadi goobo, si qoysku u helo in uu meel ku wada noolaado, sidaa darteed waxa ay arrintaasi fogeysey isu raadintii qoysaskii kala maqnaa.

Arrintaa waxa mugdi geliyey tuhun badan oo laga qabo dadka soo gelootiga ah oo Soomaalidu kamid tahay. Waxaana soo baxay in carruuro badan oo ku andacoonaya in waaalidiinta ay hadda la joogaan aysan ahayn kuwii dhalay. Taasina waxa ay dhalisay buuq badan oo ka yimi carruuro badan oo qaraabanimo lagu keenay kaddib markii ay fureen dacwado ay ku doonayaan in ay ku dalbadaan waalidkii iyaga dhalay, maaddaama aysan waalidkood ahayn kuwa ay hadda la joogaan. Dhibaatooyinka kale ee Soomaalidu qurbaha kala kulantay waxa iyana kamid ah: Muranka ka dhasha qoysaska markii ay timaaddo arrin ku saaabsan in gacan loo fidiyo qaybo qaraabada kamid ah. Tusaale ahaan haddii dad kale la soo dhoofinaayo, waxa baddana la isu qabsadaa warqadaha sharciga ee la doonayo in dadkaa loo diro,

taasina waxa ay abuurtaa is fahmiwaa soo kala dhex gala qoysaska Soomaalida ee qurbaha soo galay.

Waxa laga yaabaa in dad badani taa la qabaan Soomaalida, laakiin ay dhib yartahay sida ay ku xalliyaan meesha Soomaalida arrinteedu bannaanka u soo baxdo oo ay dhacdo in dad kale oo qoyska ka baxsani xalliyaan oo qaraabanimo u soo dhex galaan arrintooda. Inkasta oo dhibaatooyin badan ay Soomaalidu kala kulantay qurbaha, misana dad badan oo Soomaali ah baa ka faa'iideystay, haddii ay ahaan lahayd xagga waxbarashada iyo xagga dhaqaalahaba, walow sida ay u joogaan aysan uga wada faa'iidaysan.

Waxa kale oo aan la inkiri karin in astaamaha wanaagsan oo Muslimiinta lagu yaqaan ay Soomalidu ku fidisay dalalka ay joogaan, waxaana macruuf ka noqday in ay muuqato sifaadka Muslimiinta lagu yaqaan oo ay kamid yihiin dharka Muslimiintu xirato sida Jalaabiibta gabdhaha Muslimiinta ah lagu yaqaan. Summaddaasi waxa ay ahayd mid aan laga aqoon wadammada qurbaha ah waliba kuwa reer Galbeedka, oo Muslimiintii Soomaalida ka soo horeysey uma muuqan kuwo xirta Jalaabiibta, laakiin waa laga yaabaa in waxa uun labis jirkooda qaybo kamid ah astura in ay isticmaali jireen. Taa beddelkeeda waxa hubaal ah in dhaqan wanaagsan oo inoo gaar ah uu isna meesha ka baxay oo ay adag tahay in dib loo soo cesho.

Ujeeddadaydu ma ahayn in aan soo tiriyo dhibaatada ku haysata Soomaalida qurbaha, laakiin way dhici kartaa in aan marar wax ka xuso, ujeedkaygu waxa uu ahaa in aan iftiimiyo sida Soomaalidu qurbaha u aragto, waxaana qabaa in ay

qurbahana laba waji ku aragto mid daneed iyo mid asal ah. Marwalba meeshii dantu ku jirto ayaad mooddaa in ay u yaacayaan, waxa ayna dhaqan ahaan shaabbahaysaa kii reer guuraanimada oo kale. Dadka qurbaha soo galay ee Soomaalida ahi ma wada aha dadkii magaalooyinka joogi jiray, ee waxa qaybo kamid ahi ay ka yimaadeen miyiga.

Waxa dhici karta in aysan xataa wax aragti ah ka haysan magaalo joognimada, oo waxa laga yaabaa in imaatinka qurbuhu uusan ahayn mid iyaga ka soo go'ay, laakiin u ahaa mid ay dabada ka riixayaan dad kale, dad badan oo Soomaali ah ayaana sidaas qurbaha ku yimi. Arrintaasi waxa ay meesha soo dhigaysaa in qurba joognimadu ay hadda u muuqata noocmaa ganacsi ah, oo soo daabbulidda dadka qaarkiis uu u muuqdo mid aan ahayn in qofku go'aansaday in uu qurbe aado ee waa mid shaqo abuurasho u muuqata.

Dad badan oo Soomaali ah ayaa waxa laga aaminsan yahay in ay gacan haatin iyo far malab u darid qurbaha ku yimaadeen, iyaga oo hanti iyo dano badan oo ay dalkii ku haysteen soo laalaabay, albaabadana isugu dhuftay wixii meherad ahaa oo ay heysteen. Waxa aan la kulmay dad badan oo qaba in ay soo lug go'een, oo ku cataabaya haddii aan sidan moodayo ma imaadeen qurbaha ee qolaa isoo waashay, haddii aan qayb helayo kharashaadkii iga baxayna dib ayaan u noqon lahaa, waxaana arkay dad badan oo dib u noday arrintaana ka dhabeeyey.Waxa dhaqanka Soomaalida kamid ah, weliba kan reer guuraaga, in aad la kulanto laba reer oo labaduba geeddi yihiin, oo is weydaaranaya, macnaha mid weliba waxa uu hayaan iyo geeddi u yahay meeshii kan kale ka yimi.

In ay is wareystaan ayaan macquul ah; mana dhacdo in ay is qanciyaan oo midba midka kale uga dayriyo meeshii uu ka soo hayaamay, oo uu ka soo naq raacay; markii la is wareysto ayaa geeddi waliba meeshii uu u hayaansanaa awrkiisii u sii hoggaansadaa.

Dhacdadaa midaan ka fogeyn ayaad ku arkaysaa Soomaalida qurbaha joogta, waayo waxad la kulmaysaa qayb dadka kamid ah, oo u guureysa dal ay ka soo guureen qaybo kale oo isla Soomaali ahi. Waxa laga yaabaa in aysan shaqo hubanti ah oo loo ballan-qaaday iyo waxbarasho midna ugu socon, laakiin ay doonayaan in ay hadda nolol cusub oo qaxootinimo ka bilaabaan, wax badan bayna taasi dhacday, kumana aha Soomaalida wax cusub.

Ummaddaha kale ee soo gelootiga ah, ee iyana qurbaha u yimi sida Soomaalidu u timi, suurta gal kama aha dal ay muddo degganaayeen in ay si sahal ah haddana uga guuraan, iyaga oo aan dammaanad shaqo iyo mid waxbarasho ka helin dalkaa cusub oo ay u guurayaan, waxaana suurtagal ah in ay dalkoodii dib ugu laabtaan iyaga oo go'aansaday in ay dib u noqdaan oo qurbaha ka guuraan. Waxa jira dhibaatooyin badan oo Soomaalidu qurbaha ka dhaxashay. Dhibaatooyinkaas waxa laga tilmaami karaa beenta oo, runtii ah arrin aad u ragaadisay da'yarta Soomaalida.

Beentaasi ma aha mid ay dadku u dareemayaan in ay dhib tahay, waayo carruurta la keeno ayaa waxa laga yaabaa in ay ku yimaadaan dalka da' ka yar ama ka weyn tii asalka ahayd. Waxa nin oday ah oo macallin ka ahaan jiray iskuullada meelo badan

oo Yurub kamid ah ii sheegay, marka la weydiiyo carruurta da'dooda waxa ay kuugu jawaabayaan, oo la soo boodayaan '*ma waxa aad i weydiisay tan dhabta ah mise tan dalka laygu keenay?*

Halkaa waxa kaaga muuqanaysa in da'yarta la baray in ay laba qaab ku joogaan dalka, labadaas qaab oo kala ah mid sax ah iyo mid aan sax ahayn oo la abuuray.

Qoraa Maxamed Sheekh Xassan Nuur(Gacmo-dheere), ayaa iiga sheekeeyey arrin isaga ku dhacday sannadkii 1994kii. Maxamed waxa geeriyooday aabbihii Sheekh Xassan Nuur, Allaha u naxariisto, waxa uu Ustaadku damcay in uu hooyo, oo dalkii Soomaaliya jirta uu u dalbo sharciga degganaanshaha, maaddaama odaygeedii geeriyooday, una baahan tahay in ay carruurteeda soo gaadho, oo la noolaato.

Xafiiskii dalabka ayaa waxa uu Maxamed ku xirey in uu keeno warqad caddeynaysa geerida aabbihii. Maxamed waxa uu u sheegay saraakiishii xafiiska socdaalka Sweden, in aan lahayn warqad caddeyn ah marka laga reebo dad gaaraya dhawr boqol oo ka soo qayb galay aaska marxuunka. Xafiiskii socdaalku waxa uu Maxamed ku wargeliyey in ay jiraan dad badan oo markii hore loo sheegay in ay dhinteen, laakiin gadaal ka soo noolaaday, taas oo ay ula jeedaan in been badan ay Soomaalidu sheegtay ama soogelootigu sheegay. Maxamed markii intaa lagu wargeliyey ayuu waxa uu go'aansaday in uu ka noqdo dacwadii uu hooyadii ugu dacwoonaayey, maddaama Soomaali badani been sheegtay, taas oo saameyn ku yeelatay nidaamkii dal ku soo galka, Soomaaliduna waxa ay ku maahmaahdaa '*Waayeel hortiisaa caano loogu barxaa'*, Maxamedna taas ayuu gartay.

Dhacdadaa qabsatay Maxamed iyo kuwa lamid ah ayaa Soomaalida qurbaha joogta la kulantay, kaddib markii siyaalo badan oo kala duwan ay Soomaalidu u adeegsatay joogitaanka qurbaha, taas oo wajiyo badan oo kala duwan keentay.

## GABAGABO

Waxa aan aad ugu kalsoonahay, in la helayo dad badan oo Soomaali ah, dadka Soomaaliyeedna iga badiya, aqoonta aan anigu u leeyahay oo aan soo ururshayna, mid ka badana haya. Waa laga yaabaa in aysan igu raacsaneyn aragtida aan ka qabo, laakiin waxa la hubaa in aan ninna igu khilaafsaneyn, in Soomaalidu u badan tahay dhaqanka ku dhisan labada waji, oo ah *"Beerka jecli xaydha jecli"*, macneheeeduna yahay in aysan u kala soocneyn waxa dhabta ah iyo waxa ay rabaan, oo ay markaas dan u arkayaan, waxaana jirta in rabitaankooda ay wax walba ku cabbiraan.

Haddii ay dhacdo in cabbirka ay wataan uu ka dheeraado amase ka gaabto rabitaankooda, sheygaasi koodii ma ahan, ha ahaato caddaalad, dawlad, diin Islaam, magaalo, nabad, qabiil/qabyaalad, qurbe iwm.

Waxa aan shaki ku jirin sida aad qoraalkan ku aragteenba, in aan Soomaalida waxba u kala baxsaneyn intooda badan, marka laga reebo inyar oo ku ceebaysan in sida ay tahay u fahamsan yihiin arrimahaan aan ka soo sheekeeyey. Waxaana markhaati u tihiin, in magacyo iyo weliba tuuro loogu yeelo qofkii sida ay tahay u raaca arrimahan.

Markii arrin qiimeyn lagu samaynayo, tirada badan ayaa marwalba macne samaynaysa, ee ma aha waxa macnaha samaynayaa tirada yar. Sidaa waxa aan u leeyahay, Soomaalida inta badan ayaa dhaqankoodu ku salaysan yahay in ay laba waji xaalad walba ku eegaan. Labada waji, sida aan horeyba u soo

xusayba, mid waa kan asalka ah ee shaygaasi leeyahay, midna waa kan Soomaalidu u'aragto, dantuna ku jirto. Wajiga dambe ee ay aaminsan tahay in dantoodu ku jirto ayey xaajadii ay rabaan ku miisaamaan, kaas ayaana ah kan ay jecel yihiin ku dhaqankiisa, haddii nidaam kasta uu jabayo, dantooda ma aha marba haddii uusan rabitaankooda kahor imaaneyn.

Dadka Soomaalida ahi waa dad isku qoys ah wax dhaqan kala duwanaansho ah oo u dhexeeyaana ma jiro, marka laga reebo in ay jiraan *'Sanamyo'* qabiil la yiraahdo oo ay kala sheegtaan, sanamyadaas oo aan lahayn meel ay ku hakadaan, sida Basashana aan lahayn unug uu ku dhammaado. Macnuhu ma aha in qabiilku asal ahaan ceebeysan yahay, laakiin haddii uu jabinayo ama ka horimanayo dhaqankiisu kan Islaamka, waxa uu noqonayaa nooc cibaadada kamid ah, oo ka soke maraya cibaadadii Alle dadka ku lahaa.

Waxaana muuqata in dad badani arrinkaas ku kadsoomeen oo ay u egtahay in ay adduun iyo aakhiraba ku seegeen, maaddaamaa aan caqligoodu wax kale qaabbili karin amase oggolaan karin. Caddaaladda in laga tago ma aha, dad badan oo Soomaaliyeed baan xaq u lahayn in xumaan loo nisbeeyo amase lagu tilmaamo, laakiin waxa aan anigu diiradda saaray waxa ay danta ka dhigteen ummadda badankeedu. Taa ayaana macne yeelanaysa ama miisaanka qaadaneysa, ee nisbo ama tiro yar oo weliba ceebeyn iyo cannaan ku mudata in ay marwalba sida dhabtu tahay xaajada u wajahaan miisaan weyn yeelan mayso.

Buuggan oo aan doonayo in la helo dad badan oo wax qora in ay halkaa ka sii ambaqaadaan mawaadiicdan, kuwo lamid ah ama kuwa ka soo horjeedana la soo bandhigo, iyada oo lagu faAlleynayo caadaadka Soomaalida iyo dhaqankoodaba.

Waxa ila habboon in fal celin laga sameeyo buuggan, xaq waafi ah ayuu qof walba u leeyahay in uu aragtidiisa ka dhiibto, ha ahaato mid ka soo horjeeda aragtidaan aan soo bandhigay amase kuwo xoojin iyo caddeymo u noqonayaba. Waxa ayna jid bixiye ama hoggaan u noqon kartaa barashada iyo horumarinta bulshada Soomaali la yiraahdo, wax badan oo aan imminka la ogeyna, waxa ayna u badan tahay in laga ogaado haddii Alle raalli ka ahaado. Taas oo sababi karta in khaladaad badan oo aan dadku wada fahamsaneyn la fahmo, dawana loo helo cudurro badan oo hadda jira.

Dawo in la helana waxa ay xal u tahay nolosha dadka Soomaalida ah wixii Alle(swt)badbaadiyo. In la helo fikrado badan oo kala duwanna waxa ayba aniga iila muuqata in ummadda wacyigeedu ku kobci karo, waayo ummad jiritaankeeda waxa kamidah in ay jiraan aragtiyo iska soo horjeeda*"Acceptance of diversity"*, oo isa saxa, isuna oggolaada in ay wada doodi karaan, kala duwanaashaha dooddana isku tix geliya. Haddii kale ummaddu waxa ay u ekaaneysaa mid aan ka wada faalloon karin wixii dhib ama dheef ah ee markaa la soo dersa. Horumarka ummaddana, waxa laga daawadaa sida ay xaajo walba u rogrogaan, Soomaaliduna waxa ay ku maahmaahdaa *'Haddaan xaajada la rog-rogin rag ma helin'*.

Sidaa oo ay tahay ayaa waxa laga yabaa in aan Soomaalidu dhaqan u lahayn in xaajo laga wada tashado, iyada oo la isku diiddan yahay qaybo kamid. In xaajo walba diidmo iyo oggolaansho la kulanto waxa ay horumar u tahay xaajada lafteeda. Waxaana dhici karta in ka hor-imaanshaha xaajada ay dawo iyo dabiibba u tahay sii jiritaanka xaajaddaa, waayo arrintii la rogrogay oo dhinac walba laga eegay waxa ay kalsooni wanaagsan siin kartaa in ay shaqayso, iyada oo dhameystiran oo ah mid la kulantay baaraandeg dheer.

Waxa aan shaki igaga jirin, oo aan hubaa, in dareenka qofka Soomaaliga ahi ku dhisan yahay wax iska caabbin iyo wax iska dhicin dagaal ku salaysan, in la isu garaabo, oo la kala garqaatana, waayahan dambe ma aha mid la jecelyahay.

Waxaana dad badani ka aaminsan yihiin arrinkaas aragti ah in ay tahay nooc kamid ah fulaynimada. Sida caadiga ah qofkii garqaata ama ka qoomameeya falkii khaldanaa, ee uu sameeyey amase ka dhacay waxa ay dad badani u arkaan qof baqdin iyo fuleynimo la soo deristay. Arrinkaanina waa mid ka soo horjeeda, aragtida kale ee oranaysa, in qofku qirto khaladaadkiisa, ama qoomamo ka muujiyaa ay tahay astaan muujinaysa geesinimo. Waayo qofkii baqaya ayaa inkiraad iyo diidmo ka muujiya wixii fal ahaa ee uu geystay, laakiin geesiga waxa lagu yaqaan in uu yahay mid diyaar u ah in uu garbaxo, waana arrinta uu Alle(swt)shuruudda uga dhigay toowbadkeenka ama toowbad dalbidda.

# TIXRAAC



- Abokor Cawad Beyle iyo Cilmi Xirsi Beyle, 1940, deegaanka Beer oo Burca u dhow iyo Dalka Ingiriiska.
- Abwaan Abshir Nuur Faarax(Abshir Bacadle), 1991, Muqdisho, Soomaaliya.
- Abwaan Cabdullaahi Macallim Axmed(Dhoodaan), 1970kii, Muqdisho, Soomaaliya.
- Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame(Hadraawi), 2004, Stockholm, Sweden.
- Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac(Kaariye), 1994, Hargeysa, Soomaaliya.
- Abwaan Mustafe Sheekh Cilmi, 2012, Stockholm, Sweden.
- Abwaan Maxamuud Cabdullaahi Ciise(Sangub), 2009.
- Abwaanad Faadumo Axmed Dhimbil, Jabuuti.
- Afartanka Xadiis ee Imam Muxyiddin Yaxya ibnu Sharaf al-Nawawi
- Al-Ghannoushi, Rashid & Jones, Linda G. (1988)."Deficiencies in the Islamic Movement". *Islam and the State*. Middle East Report 153. New York: Middle East Research and Information Project. pp. 23–24.
- Axmed Bin Cabdulxaliim(Ibnu Taymiya).
- Axmed Cumar Madow, 1986, Qoryooley, Soomaaliya.
- Axmed Mooge Liibaan.
- Axmed Xassan Cawke Tvga Universal 2010, Saylac, Soomaaliya
- Barry Buzan; *People, States & Fear 1983: The National Security Problem in International Relations*. London, UK.

- British Broadcasting Corporation: 2012.
  Cabdalla Cumar Mansuur, Taariikhda iyo Luuqadda Bulshada Soomaaliyeed, Stockholm, Sweden.
  Cabdi Khaliif Indhoole, Soomaaliya.
  Cabdi Siciid Dhuule, 1998, Boosaaso, Soomaaliya.
  Cabdishakuur Mire Aadam(Cobol), "Kobocii Islaamiyiinta Soomaaliya 1952-2002", Daabacaadda Labaad, 2013, Nairobi , Kenya.
  Cabdiwaaxid Jaamac Dirir, 2013, Stockholm, Sweden.
  Cabdullaahi Suldaan Maxamed(Timacadde), 1967, Hargeysa, Soomaaliya.
  Cabdullaahi Yuusuf Axmed, 2012, Halgan iyo Hagardaamo, Taariikh Nololeed, Jarfälla, Stockholm, Sweden .
  Cable Network News(CNN), http://edition.cnn.com/ 1992.
  Danjire Cumar Xaaji Bile Aaden, 2012, Stockholm, Sweden.
  Goodrich, Thomas(2005). The Darkest Dawn: Lincoln, Booth, and the Great American Tragedy, Indiana University Press.
  Hipolus, The Periplus of the Erythraean Sea 1st Century CE.
  Johnnie Carson, 2013, allafrica.com/stories.
  Kenneth N. Waltz.Man, the State, and War. Columbia University Press. New York: 1959.
  Kitaabka Quraanka, Suuradda Xadiid, Aayaddeeda 25aad.
- Khaalid Yuusuf Boqor Cismaan, Gobolka Bari, Soomaaliya.

- Kitaabka Quraanka, Suuradda Xujraad, Aayadeeda 16aad.
- Leo Reinich und ALFRED HOLDER, k. UK. Hof- und ÜDiversitäts- Buchhändler in WIEN, I., Rothenthurmstrasse 15. 1900.
- Mandela, Nelson. Long Walk to Freedom: The Autobiography of Nelson Mandela. 1994. Johanesburg
- Margeret Laurence, The Prophet's Camel Bell: A Mameoir of Somaliland, 1951.
- Maxamed Axmed Dhabarlaw
- Maxamed Baashe X. Xassan "HAL KA HALEEL" (Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa), 2004, London, UK.
- Maxamed Cabdulle Casiir(Faataxo), 1962, Farxaane, Qoryoolay, Soomaaliya.
- Maxamed Cumar Xaashi, 2012, Stockholm, Sweden.
- Newsweek, 2004, Nairobi.
- Maxamuud Cabdi Faarax Cadde(ini Dhoonge), 1989, Muqdisho, Soomaaliya.
- Maxamuud Cabdisamad Hoolif(Xayle), 2013, Stockholm, Sweden.
- Morgan, Kenneth. Slavery and the British Empire: From Africa to America, 2008.
- Mujaahid Ismaaciil Mire, Burco, Soomaaliya.
- Niccolo Machiavelli, Discourses, tr. by Leslie J. Walker and Bernard Crics(Viking, 1985).
- Oday Gurxan Muuse Cawl, Dhuusomareeb, Soomaaliya.

- Qoraa Khaalid Cali–guul Warsame Cadde, Hirarkii Taariikhda iyo Halgankii Soomaalida" 2010, Kobenhagen, Danmark.
- Qoraa Khaalid Cali–guul Warsame Cadde, Taariikhda Soomaalida ilaa 1960kii, 2003, Kobenhagen, Denmark.
- Qoraa Maxamed Sheekh Xassan(Gacma-dheere), 2014, Stockholm, Sweden.
- Queen Elizabeth, 1980s, in House of Common, UK.
- S. Marc Cohen, Patricia Curd, and C.D.C. Reeve, eds., pp. 645-654. © 2005, Hackett Publishing Company. Reprinted here by permission of Hackett Publishing Company, Indianapolis, IN.
- http://aristotle.thefreelibrary.com/A-Treatise-on-Government.
- Sheekh Cabdiweli Xuseen, 2012, Stockholm, Sweden.
- Sheekh Cabdullaahi Xaaji Cabdisuldaan, 2014, Stockholm, Sweden.
- Sheekh Cumar Xaaji Cabdisuldaan(Cumar Faaruuq), 1994, Stockholm, Sweden.
- Sheekh Maxamed Rashaad Macallim Isxaaq Sheekh Aweys, 1991, Stockholm, Sweden.
- Sheekh Xassan Macallim Daahir Sheekh Aweys, BBC, 2006.
- Sheekh Xuseen Cabdulle Cismaan(Codweyn), 1996, Stockholm, Sweden.
- Suldaan Maxamed Suldaan Ibraahim(Garyare), Iimihii Gumeystuhu Kaga Tagey Adduunyada" 2014, Stockholm, Sweden.

- Ustaad Axmed Sabriye Gaabow, 2013, Stockholm, Sweden.
- Ustaad Cabdullaahi Faarax Cabdi, 2013, Stockholm, Sweden.
- Ustaad Cismaan Jaamac Daahir, Barnaamijkii In-Between 1993, Amsterdam, Netherland.
- Webster's Third International Dictionary(Springfield, MA: Merriam-Webster, 1993).
- Xaaji Cali Ismaaciil, 1998, Stockholm, Sweden.
- Xaaji Siciid Maxamuud Cumar, 1990, Muqdisho, Soomaaliya.
- http://www.aarannews.com/?p=32974
- http://www.aarannews.com/ Fu'aad Maxamed Faarax (Jawi)
- http://www.aarannews.com/?p=32974
- http://somaliweyn.somaliweyn.org/index.php?option=com_content&view=article&id=498:caddAaladdu-waa-nolol-wanaagsan&catid maqaal&Itemid Abdi Jamac Aw-Aden
- http://so.wikipedia.org/wiki/Diinta_Ilaaheey.
- http://www.aljazeera.com/programmes/specialseries/2013/11/7up-south-africa-2013112612014146921.html
- http://www.jaallesiyaad.com/taariikh/taariikhda-21ka-oktoobar.



Buuggani waxa uu cabbirayaa ama tilmaan ka bixinayaa dareenka qofka Soomaaliga ahi ku eego arrimmo badan oo ku hareeraysan noloshiisa ama jiritaankiisa. Arrimahaa oo dhammi waa mid lagama maarmaan u ah nolosha qofka amase uusan qofku ka gudbi karin la'aantood. Ummad waxa lagu sinji soocaa qaabka ay u nooshahay, waxaana lagaga soocaa ummadaha kale ee ay dunida kuwada noolyihiin, iyada oo ay lagama maarmaan tahay in bani'aadamku uusan wax badan ku kala geddisneyn markii laga reebo bay'adda uu ku noolyahay iyo xaaladda deegaaneed ee Alle (swt), ku baraarshay.

Arrimaha aan rabo in aan toosh ku iftiimiyo, aana dareensanahay in ay Soomaalidu laba waji ku eegto wax walba ayaan rabaa in aan muujiyo, aniga oo jecel haddii Alle sahlo in aan mid mid isu dul taago.

Arrimahaasina waxa ay kala yihiin sidan:
Caddaaladda iyo Diinta, Dawladnimada, Magaalada, Nabadda, Qabyaaladda iyo Qurbaha.

**Suldaan Maxamed Suldaan Ibraahim(Garyare)(Diploma, BA (Hon), BSc, MSc & Ph.D Candidate)**

**Qoraagu waa cilmi baare, wuxuuna aad ugu foogan yahay cilmi-baaris badan oo la xiriirta dhaqanka iyo siyaasadda Soomaalida iyo kuwa dunida Islaamkaba.**

ISBN: 978-91-87223-18-1

9 789187 223181 >